# ISLAAMKA

## ODHAAH KOOBAN OO UGA HADLAYSA ISLAAMKA, SIDA QUR'AANKA KARIIMKA IYO SUNADDA NABIGU-SALLALLAAHU CALAYHI WASALAM- UGA WARAMEEN.

Waa kitaab muhiim ah si kooban u qeexaya: islaamka, wanaagiisa, iyo asalka uu ku dhisan yahay, ama u ah gundhiga, oo ah Quraanka kariimka iyo Sunadda Nabiga- sallallaahu calayhi wasallam-, kitaabkan wuxuu la hadlayaa dhamaan Muslimiinta iyo inta aan muslimka ahaynba, wuxuna kula hadlaya afkoodda(luqadoodda), meelkasta iyo millay kastaba, iyo xaalad walba oo ay ku jiraanba.

(waa nuqul aan ku ururiyay wixii daliil u ah qodobadaas hore ee kusoo arooray Quraanka kariimka iyo Sunadda Nabiga- sallallaahu calayhi wasalam-.

شركاء التنفيذ:

دار الإسلام جمعية الربوة رواد الترجمة المحتوى الإسلامي

يتاح طباعة هذا الإصدار ونشره بأي وسيلة مع الالتزام بالإشارة إلى المصدر وعدم التغيير في النص.

Telephone: +966114454900
ceo@rabwah.sa
P.O.BOX: 29465
RIYADH: 11557
www.islamhouse.com

## 1. ISLAAMKU WAA RISAALADA(FARIIN) ILAAHAY, EE KU SOCOTAY AADAMAHA DHAMAANTOOD, WAA FARIIN ILAAHI AH EE WAARAYSA, LAGUNA SOO GABOBABEEYAY RISAALADII KA HOREEYAY

ISLAAMKU WAA FARIINTA U SOCOTA AADAMAHA DHAMAANTII, ilaahay-koreeye- wuxuu yidhi:

﴿وَمَآ أَرۡسَلۡنَٰكَ إِلَّا كَآفَّةً لِّلنَّاسِ بَشِيرًا وَنَذِيرًا وَلَٰكِنَّ أَكۡثَرَ ٱلنَّاسِ لَا يَعۡلَمُونَ ٢٨﴾[سبأ: 28]

{ Kuuma aanu soo dirin waxaan aheyn dadka oo dhan bishaareeye iyo dige ahaan, dadku se badankoodu ma ogsoona}. [suurada sab'a, aayadda: 20]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿ قُلۡ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنِّي رَسُولُ ٱللَّهِ إِلَيۡكُمۡ جَمِيعًا...١٥٨﴾[الأعراف: 158]

{ Dheh: Dadow! Hubaal anigu waxaan ahay Rasuul Ilaahay ee loo soo diray idinka oo dhan}. [Suuradda Al-acraaf, aayada 158]

Allaha koreeye waxa uu yiri:

﴿ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ قَدۡ جَآءَكُمُ ٱلرَّسُولُ بِٱلۡحَقِّ مِن رَّبِّكُمۡ فَـَٔامِنُواْ خَيۡرًا لَّكُمۡۚ وَإِن تَكۡفُرُواْ فَإِنَّ لِلَّهِ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلِيمًا حَكِيمًا ١٧٠﴾[النساء: 170]

{ Aadamow! Hubaal Rasuulku Wuxuu idiinla yimid xaq ka yimid Rabbigiin, ee rumeeya waa wax idiin roon idinka’e. Haddiise aad rumeyn diiddaan, haddaba hubaal Allaah baa iska leh waxa jira samooyinka iyo arlada. Oo Allaah waa wax kasta Ogsoone, Xakiim ah.} [Suuradda An-nisaa, aayada:170]

ISLAAMKU WAA RISAALADDA(FARIIN) ILAAHAY EE WAARAYSAY, LAGUNA SOO GABBO GABEEYAY RISAALADIHII KA HOREEYAY, ILAAHAY WUXUU YIDHI:

﴿مَّا كَانَ مُحَمَّدٌ أَبَآ أَحَدٖ مِّن رِّجَالِكُمۡ وَلَٰكِن رَّسُولَ ٱللَّهِ وَخَاتَمَ ٱلنَّبِيِّـۧنَۗ وَكَانَ ٱللَّهُ بِكُلِّ شَيۡءٍ عَلِيمًا٤٠﴾[الأحزاب: 40]

{ Muxammad ma aha aabbaha qof ka mid ah raggiina, laakiinse waa Rasuul Ilaahay iyo kan u dambeeyey Nabiyada31, oo Allaah wax walba wuu Ogsoon yahay}. [Suuradda Al-axsaab, aayda 40]

**2- Islaamka ma ahan diin u gaar ah koox ama cid kaliya, hase yeeshee waa diintii Ilaahay, Aadamaha dhamaantiina loogu baaqayo:**

Quraanka amarkii ugu horeeray ee ku yimaadaana wuxuu ahaa:

﴿ يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱعْبُدُواْ رَبَّكُمُ ٱلَّذِى خَلَقَكُمْ وَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿٢١﴾﴾[البقرة: 21]

{ Aadamow! Caabuda Rabbigiin, idin abuuray idinka iyo kuwii idinka horeeyayba, waxaadna muddan tihiin inaad dhowrsataan}.[ Suuradda Albaqarah, aayada 21 ]

Waxa kale oo Allaha koreeya yiri:

﴿يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱتَّقُواْ رَبَّكُمُ ٱلَّذِى خَلَقَكُم مِّن نَّفْسٍ وَٰحِدَةٍ وَخَلَقَ مِنْهَا زَوْجَهَا وَبَثَّ مِنْهُمَا رِجَالًا كَثِيرًا وَنِسَآءً ۚ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ ٱلَّذِى تَسَآءَلُونَ بِهِۦ وَٱلْأَرْحَامَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ عَلَيْكُمْ رَقِيبًا ﴿١﴾﴾[النساء: 1]

{ Dadow sida aad udhan tihiin ka Dhawrsada Rabbigiina Idinka Abuuray Naf kaliya (Aadam) kana Abuuray naftaa xaggeeda xaaskiisa (Xaawo) kana tafiiray Xagooda Rag iyo Haween fara baddan}.[ Suuradda An-nisaa, aayada 1 ]

ibnu cumar -Allaha ka raali noqdee- waxa laga wariyay In Rasuulka ilaahay, -sallallaahu calayhi wasalam- u khud badeeyay dadka maalintii lafurtay makah, wuxuuna yiri:

" Hooy aadamow ilaahay baa idinka kaxeeyay kibirtii jaahilliyadda iyo waynayntii aabayaashiin aad kufaani jireen,ee Dadku waa laba mid uun; mid baari ah oo ilaah ka cabsi badan oo deeqsi ah iyo mid faajir ah oo ilaah caasi badan, ilaah aktiisana wax qiimo ah ku lahayn. Dadku waxay ka wada tafiirmeen Nabi Aadam, Aadamna waxaa laga abuuray carro, ilaahay -koreeye- wuxuu yiri:

﴿ يَـٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَـٰكُم مِّن ذَكَرٍ وَأُنثَىٰ وَجَعَلْنَـٰكُمْ شُعُوبًا وَقَبَآئِلَ لِتَعَارَفُوٓاْ ۚ إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِندَ ٱللَّهِ أَتْقَىٰكُمْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ ﴿١٣﴾﴾[الحجرات: 13]

{Dadow waxaan idinka abuuray lab iyo dhaddig, waxaana idinka yeellay shucuub iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan, Ruuxase ugu sharaf badan Eebe agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan, Eebana wax walba waa ogyahay.} [sourate Al-Hojraty : 13]

waxaa wariyay Tirmidi (3270).

kana helimaysid Quraanka wayn iyo Sunadda Rasuulka -sallallaahu calayhi waslam- shareecad u gaar ah dad kaligood, ama cid gaar ah, ama kooxba, iyodoo loo eegaya isirka ay ka soo jeedaan iyo qowmiyadda ay yihiin.

## 3. iSLAAMKU WAA RISAALADDII(FARIINTII) ILAAHAY EE DHAMAYSTIRKA U AHAYD RISAALOOYINKII AMA FARIINTII, RUSUSHII IYO NABIYADII HORE -CALAYHI SALAATU WASALAAM.

islaamku waa risaaladii ama fariintii lagu dhamaystirtay risaalooyinkii iyo fariimihii Rushusha iyo Nabiyadii hore, ee loo diray umaddii hore. Ilaahay-koreeye- wuxuu iri:

﴿۞إِنَّآ أَوۡحَيۡنَآ إِلَيۡكَ كَمَآ أَوۡحَيۡنَآ إِلَىٰ نُوحٖ وَٱلنَّبِيِّـۧنَ مِنۢ بَعۡدِهِۦۚ وَأَوۡحَيۡنَآ إِلَىٰٓ إِبۡرَٰهِيمَ وَإِسۡمَٰعِيلَ وَإِسۡحَٰقَ وَيَعۡقُوبَ وَٱلۡأَسۡبَاطِ وَعِيسَىٰ وَأَيُّوبَ وَيُونُسَ وَهَٰرُونَ وَسُلَيۡمَٰنَۚ وَءَاتَيۡنَا دَاوُۥدَ زَبُورٗا ١٦٣﴾[النساء: 163]

{ Annagaa kuu waxyoonnay sidaan ugu waxyoonay (Nabi) Nuux iyo Nabiyadii ka dambeeyey waxaana u waxyoonay Nabi Ibrahim, Ismaaeiil, Isxaaq, Yacquub, Al-Asbaad (waa Nabiyadii ahaa tafiirta Yacquub), Ciise, Ayuub, Yuunus, Haaruun, Sulaymaan, waxaana siinay Daawuudna Zabuur}.[ Suuradda Al-nisaa, aayada: 163]

Diintan loo waxyooday Nabi Muxammed -sallallaahu calayhi wasalam- waa diintii loo waxyoodday Nabiyaddii ka horeeyay, Ilaahay-koreeye- wuxuu yiri:

﴿۞شَرَعَ لَكُم مِّنَ ٱلدِّينِ مَا وَصَّىٰ بِهِۦ نُوحٗا وَٱلَّذِيٓ أَوۡحَيۡنَآ إِلَيۡكَ وَمَا وَصَّيۡنَا بِهِۦٓ إِبۡرَٰهِيمَ وَمُوسَىٰ وَعِيسَىٰٓۖ أَنۡ أَقِيمُواْ ٱلدِّينَ وَلَا تَتَفَرَّقُواْ فِيهِۚ كَبُرَ عَلَى ٱلۡمُشۡرِكِينَ مَا تَدۡعُوهُمۡ إِلَيۡهِۚ ٱللَّهُ يَجۡتَبِيٓ إِلَيۡهِ مَن يَشَآءُ وَيَهۡدِيٓ إِلَيۡهِ مَن يُنِيبُ ١٣﴾[الشورى: 13]

{ Wuxuuna idiin jideeyey xagga Diinta wuxuu u dardaarmay (Nabi) Nuux iyo kaan kuu Waxyoonay adiga iyo waxaan u dardaaranay (Nabi)

Ibrahiim (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Ciise inay oogaan Diinta aydaan kuna kala tagin dhexdiisa, waxaa ku waynaaday Gaalada waxaadugu yeedhi, Eebaa u doorta xaggiisa Cidduu doono una hanuuniya xaggiisa cidduu hanuunin }[ Suuradda Ash-shuuraa aayada:13]

Diintan loo waxyooday nabi Muxammed -calayhi salaatu wasalaam- waxay markhaati u tahay kutubtii ka horaysay sidii kitaabkii Towraat iyo Injiil, ka hor intaan labadalin/isdabamarin, Ilaahay na wuxuu yiri isaga oo arintaa caddaynaya:

﴿ وَٱلَّذِىٓ أَوۡحَيۡنَآ إِلَيۡكَ مِنَ ٱلۡكِتَٰبِ هُوَ ٱلۡحَقُّ مُصَدِّقٗا لِّمَا بَيۡنَ يَدَيۡهِۗ إِنَّ ٱللَّهَ بِعِبَادِهِۦ لَخَبِيرُۢ بَصِيرٞ ﴿٣١﴾ ﴾[فاطر: 31]

{ Oo kaan kuu waxyoonnay oo ka mid ah Kitaabka (Qur'aanka) waa Xaq dhab ah, xaqiijinaya wixii ka horreeyey (oo Kutub Ilaahay ah). Hubaal Allaah addoomahiisa wuu ka War Qabaa, Arkaa }.[ Suuradda faadir aayada 31]

## 4. NABIYADA -CALAYHIMU SALAAM- DIINTOODU WAA HAL MID, SHAREECADOODUSE WAA KALA GADISAN TAHAY.

Nabiyada diintooda waa mid kaliya, shariicadooduna way kala duwan yihiin, ilaahay wuxuu yiri:

﴿وَأَنزَلۡنَآ إِلَيۡكَ ٱلۡكِتَٰبَ بِٱلۡحَقِّ مُصَدِّقٗا لِّمَا بَيۡنَ يَدَيۡهِ مِنَ ٱلۡكِتَٰبِ وَمُهَيۡمِنًا عَلَيۡهِۖ فَٱحۡكُم بَيۡنَهُم بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُۖ وَلَا تَتَّبِعۡ أَهۡوَآءَهُمۡ عَمَّا جَآءَكَ مِنَ ٱلۡحَقِّۚ لِكُلّٖ جَعَلۡنَا مِنكُمۡ شِرۡعَةٗ وَمِنۡهَاجٗاۚ وَلَوۡ شَآءَ ٱللَّهُ لَجَعَلَكُمۡ أُمَّةٗ وَٰحِدَةٗ وَلَٰكِن لِّيَبۡلُوَكُمۡ فِي مَآ ءَاتَىٰكُمۡۖ فَٱسۡتَبِقُواْ ٱلۡخَيۡرَٰتِۚ إِلَى ٱللَّهِ مَرۡجِعُكُمۡ جَمِيعٗا فَيُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمۡ فِيهِ تَخۡتَلِفُونَ ﴿٤٨﴾ ﴾[المائدة: 48]

{ Oo Waxaan kugu soo dejinnay Kitaabka (Qur'aanka) oo Xaq ah isagoo xaqiijinaya wixii ka horreeyey oo Kitaab ah oo isla markaa markhaati iyo ilaaliye u ah. Ee ugu kala garsoor dhexdooda waxa uu Allaah soo dejiyey, oo ha raacin waxa (liita) ay nafahoodu rabaan adigoo ka leexanaya waxa kuu yimid oo Xaq ah. Mid walbaa oo idin ka mid ah, waxaan u yeellay sharci iyo waddo (cad ee diinta). Oo hadduu Allaah doono, wuxuu idin ka dhigi lahaa (dhammaantiin) ummad keliya, laakiinse waa si uu idiinku

imtixaano waxa uu idin siiyey; ee u tartama samaha. Waa Xagga Allaah meel noqodkiinna dhammaantiin; markaasuu idiin sheegi waxaad isku khilaafteen} [Suuradda Al-maa'ida, aayada 48]

Rasuulka Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: (Aniga ayaa idiinka xigga, Nabi ciise ibnu maryan aduun iyo aakhiiraba, Nabiyaddu waa walaalo aabo, oo kal baho ah,(hooyooyin kala gaddisan) diintooduna waa mid kaliya). waxa wariyay Bukhaari 3443

## 5. U BAAQA DIINTA ISLAAMKA: WAA BAAQA AY NABIYADA DHAMAANTOOD SIDA: NUUX, IBRAAHIM, MUUSE, SULEYMAAN, DAA'UUD, CIISE, UGU BAAQAYEEN: IN LA RUMEEYO IN RABBI YAHAY ALLAAH ,ABUURE, QUUDIYE, NOOLEEYE, OOFASDDE, LEH MULKIGA/MAAMULKA, MAAREEYA UMMUURAHA, WAA ALLE TURE AH, OO NAXARIIS LEH.

Islaamku wuxuu ugu baaqaa, sidii ay ku baaqeen Nabiyada dhamaanttood, sida Nuux, Ibraahiim, Muuse, Sulaymaan, Daa'uud, Ciise, -nabad galyo korkooda ha ahaatee- oo ah in la rummeeyo inuu Rabbi yahay Allaah, ee Abuuraha ah, Arsaaqe(quudiye) ah, Nooleeye, Oofsade, hantiya mulkiga iyo maamulka dhamaantii, waana Allaha maareeya umuuraha dhamaantood, isla markaana ah u tudhe naxariis badan. Ilaahay wuxuu yidhi:

﴿ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱذۡكُرُواْ نِعۡمَتَ ٱللَّهِ عَلَيۡكُمۡۚ هَلۡ مِنۡ خَٰلِقٍ غَيۡرُ ٱللَّهِ يَرۡزُقُكُم مِّنَ ٱل سَّمَآءِ وَٱلۡأَرۡضِۚ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَۖ فَأَنَّىٰ تُؤۡفَكُونَ ٣﴾[فاطر: 3]

{ Dadow! Xusuusta Nicamadda Ilaahay dushiinna; Ma waxaa jira abuure kale aan ahayn Allaah oo idinka arsaaqa cirka iyo dhulka? Ma jiro Ilaah (Xaq ah) aan Isaga ahayn. Ee xaggee baa la idiinka iilay? }. [Suuradda faadir, aayadda 3 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿قُلۡ مَن يَرۡزُقُكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلۡأَرۡضِ أَمَّن يَمۡلِكُ ٱلسَّمۡعَ وَٱلۡأَبۡصَٰرَ وَمَن يُخۡرِجُ ٱلۡحَيَّ مِنَ ٱلۡمَيِّتِ وَيُخۡرِجُ ٱلۡمَيِّتَ مِنَ ٱلۡحَيِّ وَمَن يُدَبِّرُ ٱلۡأَمۡرَۚ فَسَيَقُولُونَ ٱللَّهُۚ فَقُلۡ أَفَلَا تَتَّقُونَ٣١﴾[يونس: 31]

{ Dheh: Waa kuma kan idinka siiya risiq samada iyo arlada? ama waa kuma kan haya maqalka iyo aragyada? Oo waa kuma kan noole ka soo saara mayd, oo ka soo saara mayd noolaha? Oo waa kuma kan qorsheeya oo iskudubarida arrimaha (uunka oo idil)? Markaas waxay odhan doonaan: Allaah. Dheh: Miyeydaan haddaba ka joogeyn (xumaha)?}. [Suuradda yuunis, aayada 31]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿ أَمَّن يَبۡدَؤُاْ ٱلۡخَلۡقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ وَمَن يَرۡزُقُكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلۡأَرۡضِۗ أَءِلَٰهٞ مَّعَ ٱللَّهِۚ قُلۡ هَاتُواْ بُرۡهَٰنَكُمۡ إِن كُنتُمۡ صَٰدِقِينَ ٦٤ ﴾[النمل: 64]

{ Kan billaaba asal ahaan abuurka, markaas soo celin, oo ah Kan idinka irsaaqa samada iyo arlada? Ma waxaa jira ilaah la jirka Allaah? Dheh: Keena Xujadiinna, haddaad run sheegaysaan}. [Suuradda la-naml, aayada 64]

Kan billaaba asal ahaan abuurka, markaas soo celin, oo ah Kan idinka irsaaqa samada iyo arlada? Ma waxaa jira ilaah la jirka Allaah? Dheh:

﴿وَلَقَدۡ بَعَثۡنَا فِي كُلِّ أُمَّةٖ رَّسُولًا أَنِ ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ وَٱجۡتَنِبُواْٱلطَّٰغُوتَۖ فَمِنۡهُم مَّنۡ هَدَى ٱللَّهُ وَمِنۡهُم مَّنۡ حَقَّتۡ عَلَيۡهِ ٱلضَّلَٰلَةُۚ فَسِيرُواْ فِي ٱلۡأَرۡضِ فَٱنظُرُواْ كَيۡفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلۡمُكَذِّبِينَ٣٦﴾[النحل: 36]

{ Keena Xujadiinna, haddaad run sheegaysaan). (Waxaan ka soo saarnay Umad kasta Rasuul inay caabudaan alle kana dheeraadaan Daaguutka waana (in lacaabudo wax kasta kasoo haray allaah), Dadkaa waxa kamida Cid alle Hanuuniyay, waxa kale oo ka Mida ciday ku sugnaatay Baadinimo, Ee socda dhulka oo Eega siday Noqotay Ciribtii Beeniyayaasha.} [Suuradda Al-naxli, aayada 36 ]

Allaha koreeye waxa uu yiri:

﴿ وَمَآ أَرۡسَلۡنَا مِن قَبۡلِكَ مِن رَّسُولٍ إِلَّا نُوحِيٓ إِلَيۡهِ أَنَّهُۥ لَآ إِلَٰهَ إِلَّآ أَنَا۠ فَٱعۡبُدُونِ ٢٥ ﴾[الأنبياء: 25]

{ Oo ma aanu soo dirin hortaa Rasuulna oo aan u waxyoon (Annagoo leh), "ma jiro Ilaah (Xaq ah oo) aan Aniga (Allaah) ahayn, ee i caabuda (Anigoo keliya}. [Suuradda Al-anbiyaa, aayada 25]

Ilaahay ayaa kaga waramay kitaabkiisa Nabi Nuux -nabad galyo korkiisa ha ahaatee- inuu ku yiri tolkii:

﴿ لَقَدۡ أَرۡسَلۡنَا نُوحًا إِلَىٰ قَوۡمِهِۦ فَقَالَ يَٰقَوۡمِ ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنۡ إِلَٰهٍ غَيۡرُهُۥٓ إِنِّيٓ أَخَافُ عَلَيۡكُمۡ عَذَابَ يَوۡمٍ عَظِيمٖ ٥٩ ﴾[الأعراف: 59]

{ Xaqiiq Waxaan u soo dirnay Nuux dadkiisii markaasuu wuxuu yidhi: Dadkaygiyow! Caabuda Allaah Keliya! Ma lihidin ilaah (xaq ah) aan Isaga ahayn. Hubaal waxaan anigu idiinka cabsi qabaa Cadaab Maalin aad u murugo weyn}. [Suuradda Al-acraaf, aayada 59]

Wuxuu Nabi ibraahiim na yiri -sida Alle kaga waramay kitiibkiisa: (waxaan soo dirnay) Ibraahiim markuu ku lahaa tolkii:

﴿ وَإِبۡرَٰهِيمَ إِذۡ قَالَ لِقَوۡمِهِ ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ وَٱتَّقُوهُۖ ذَٰلِكُمۡ خَيۡرٞ لَّكُمۡ إِن كُنتُمۡ تَعۡلَمُونَ ١٦ ﴾ [العنكبوت: 16]

{ Caabuda, Allaah (Keliya) oo ka dhawrsada, saasaa idiin khayr badan, haddaad og tihiin }. [Suuradda Al-cankabuut, aayadda 16]

Nabi Saalax na wuxuu yiri -sida uu Allaah ka waramay-:

﴿ وَإِلَىٰ ثَمُودَ أَخَاهُمۡ صَٰلِحٗاۚ قَالَ يَٰقَوۡمِ ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنۡ إِلَٰهٍ غَيۡرُهُۥۖ قَدۡ جَآءَتۡكُم بَيِّنَةٞ مِّن رَّبِّكُمۡۖ هَٰذِهِۦ نَاقَةُ ٱللَّهِ لَكُمۡ ءَايَةٗۖ فَذَرُوهَا تَأۡكُلۡ فِيٓ أَرۡضِ ٱللَّهِۖ وَلَا تَمَسُّوهَا بِسُوٓءٖ فَيَأۡخُذَكُمۡ عَذَابٌ أَلِيمٞ ٧٣ ﴾[الأعراف: 73]

{ Oo xagga Thamuud (waxaan u dirnay) walaalkood Saalix. Wuxuu yidhi: Dadkaygiyow! Caabuda Allaah Keliya, ma lihdin ilaah kale Isaga maahee. Xujo cad baa xaqiiq idiinka timid xagga Rabbigiin. tani waa Hal Ilaahay aad leedihiin, oo ah Calaamo; ee iska daaya ha daaqdo’e arlada Ilaahay, oo ha u geysannina wax waxyeello ah, haddii kale cadaab xanuun badan baa idin qaadi doonta.} [Suuradda Al-acraaf, aayada 73]

Nabi Shucayb na wuxuu yirir -sida Alle ka waramay-:

﴿وَإِلَىٰ مَدۡيَنَ أَخَاهُمۡ شُعَيۡبٗاۚ قَالَ يَٰقَوۡمِ ٱعۡبُدُواْ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنۡ إِلَٰهٍ غَيۡرُهُۥۖ قَدۡ جَآءَتۡكُم بَيِّنَةٞ مِّن رَّبِّكُمۡۖ فَأَوۡفُواْ ٱلۡكَيۡلَ وَٱلۡمِيزَانَ وَلَا تَبۡخَسُواْ ٱلنَّاسَ أَشۡيَآءَهُمۡ وَلَا تُفۡسِدُواْ فِي ٱلۡأَرۡضِ بَعۡدَ إِصۡلَٰحِهَاۚ ذَٰلِكُمۡ خَيۡرٞ لَّكُمۡ إِن كُنتُم مُّؤۡمِنِينَ ٨٥﴾[الأعراف: 85]

{ Oo xagga Madyan (waxaan u dirnay) walaalkood Shucayb. Wuxuu yidhi: Dadkaygiyow! Caabuda Allaah, ma lihidin ilaah kale Isaga maahee. Xujo cad xaqiiq waxay idiinka timid xagga Rabbigiin; ee dhammeystira beegga iyo miisaanka oo ha ka dhimina dadka waxyaalahooda, oo ha ku falina fasahaad arlada, inta la hagaajiyey kaddib, sidaas baa idiin khayr badan, haddaad tihiin mu'miniin.} [suurada al-acraaf 85]

Wixii ugu horeeyay ee ilaahay kula hadlay nabi Muuse:

﴿ وَأَنَا ٱخۡتَرۡتُكَ فَٱسۡتَمِعۡ لِمَا يُوحَىٰٓ ١٣ إِنَّنِيٓ أَنَا ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّآ أَنَا۠ فَٱعۡبُدۡنِي وَأَقِمِ ٱلصَّلَوٰةَ لِذِكۡرِيٓ ١٤ ﴾[طه: 14-13]

{ Oo Aniga baa ku doortay ee dhegayso waxaa laguu waxyoodo). 13 (Anigu waxaan ahay Allaah. Ma jiro ilaah (xaq ah) aan aheyn Aniga, ee Anigoo Keliya i caabud, oo u oog salaadda Xuskayga}. [Suuradda Daahaa, aayaddaha 13, 14].

Waxa uu yiri nabi Muuse Calayhi salaatu wasalaam -sida Alle ka waray, isagoo magan galaya-:

﴿ وَقَالَ مُوسَىٰٓ إِنِّي عُذۡتُ بِرَبِّي وَرَبِّكُم مِّن كُلِّ مُتَكَبِّرٖ لَّا يُؤۡمِنُ بِيَوۡمِ ٱلۡحِسَابِ ٢٧﴾
[غافر: 27]

{ Wuxuuna Muuse yidhi: Waxaan ka magan galay Rabbigay iyo Rabbigiinba mid kastoo islaweyn oo aan rumaysnayn Maalinta Xisaabta }. [Suuradda Qaafir, aayadda 27]

Illaahay ayaa yiri-isaga oo ka warama Masiixi- calayhi salaatu wasalaam-:

﴿ إِنَّ ٱللَّهَ رَبِّي وَرَبُّكُمۡ فَٱعۡبُدُوهُۚ هَٰذَا صِرَٰطٞ مُّسۡتَقِيمٞ ٥١﴾[آل عمران: 51]

{ Hubaal Allaah waa Rabbigay iyo Rabbigiinba, ee caabuda Isagoo Keliya, waa kane Jidka Toosan.} [Suuradda Aali-cimraan aayada 51]

ilaahay wuxuu yiri-isagoo ka warama Masiix- calayhi salaatu wasalaam- mar kale:

﴿لَقَدْ كَفَرَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلْمَسِيحُ ٱبْنُ مَرْيَمَۖ وَقَالَ ٱلْمَسِيحُ يَٰبَنِيٓ إِسْرَٰٓءِيلَ ٱعْبُدُواْ ٱللَّهَ رَبِّي وَرَبَّكُمْۖ إِنَّهُۥ مَن يُشْرِكْ بِٱللَّهِ فَقَدْ حَرَّمَ ٱللَّهُ عَلَيْهِ ٱلْجَنَّةَ وَمَأْوَىٰهُ ٱلنَّارُۖ وَمَا لِلظَّٰلِمِينَ مِنْ أَنصَارٍ ٧٢﴾[المائدة: 72]

{ Xaqiiq waa gaalo kuwa yidhaahda: Allaah, waa Masiixa ina Maryam; Masiixuna wuxuu yidhi: Ilmahii Israa'iiloow! Caabuda Allaah Keliya, Rabbigay iyo Rabbigiin. Hubaal, qofkii wax la wadaajiya (cibaadada) Allaah, markaa wuxuu Allaah ka xaaraantinimeeyey Jannada, oo hoygiisu waa Naarta. Oo halkaa ma lahaan doonaan gar diidka wax u soo gargaara.} [Suurada Almaa'ida aayada 72]

sidaas uun maahee, kitaabka towraad iyo injiilba waxaa ku yimid (kuqoran) ku adkaynta: in alle kaligii loo cibaaddaysto, waxa kale oo kusoo arooray(sifri tatniya) oraahdii nabi Muuse yiri: maqal reer israa'iilow Rabbi waa ilaaheena waana Rabbi keliya Sidaas oo kale waxa Tawxiidka adkayntiis aiyo caddayntiisu ku timid kitaabkii Injiil ee Nabi Ciise wuxuu ku yiri: (Dardaaranka ugu horeeya waxaa weeye: maqal israa'iilow rabbi waa ilaaheena waana rabbi keliya0 ilaahay wuxuu cadeeyay in nabiyada dhamaantiid loo soo diray muhimadaan wayn waana: in dadka tawxiidka loogu yeero. Allaah-koreeye- wuxuu uu yiri :

﴿وَلَقَدْ بَعَثْنَا فِي كُلِّ أُمَّةٍ رَّسُولًا أَنِ ٱعْبُدُواْ ٱللَّهَ وَٱجْتَنِبُواْ ٱلطَّٰغُوتَۖ فَمِنْهُم مَّنْ هَدَى ٱللَّهُ وَمِنْهُم مَّنْ حَقَّتْ عَلَيْهِ ٱلضَّلَٰلَةُۚ فَسِيرُواْ فِي ٱلْأَرْضِ فَٱنظُرُواْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ ٱلْمُكَذِّبِينَ ٣٦﴾[النحل: 36]

{ Oo Waxaan ka soo bixinnay ummad walba Rasuul (leh): Caabuda Allaah Keliya, oo ka dheeraada Shaydaan. Markaa baa waxaa ka mid noqday qaar Allaah uu hanuuniyey, oo waxaa ka mid noqday qaar habowga ku waajibay. Ee mara dhulka markaa fiiriya sida ay aheyd cidhibta beeniyayaasha.} [Suuradda Al-naxal aayadda 36]

Ilaahay kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿قُلْ أَرَءَيْتُم مَّا تَدْعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ أَرُونِى مَاذَا خَلَقُوا۟ مِنَ ٱلْأَرْضِ أَمْ لَهُمْ شِرْكٌ فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ ۖ ٱئْتُونِى بِكِتَٰبٍ مِّن قَبْلِ هَٰذَآ أَوْ أَثَٰرَةٍ مِّنْ عِلْمٍ إِن كُنتُمْ صَٰدِقِينَ ﴿٤﴾﴾[الأحقاف: 4]

{Dheh: Bal fiirsha waxa aad caabuddaan Allaah sokadi? I tusa maxay abuureen oo ka mid ah arlada, mise ma waxay ku leeyihiin qayb samooyinka? Ii keena Kitaab (Qur'aan) kan horti ah ama wax raad cilmi (hore) ah haddii aad run sheegeysaan}. [Suuradda Al axqaaf, aayada 4]

wuxuu yiri Shiikh alsicdi; waxaa la ogaaday in murankii gaaladu ku dhisnayn xujo iyo daliil midnaba, ee uu ahaa kaliya malo-awaal been ah, iyo ra'yi qalooca oo ka soo burqanaya caqli aan toosnayn. Taasina waxaa tusaale u cad u ah sida uu ahaa xaalkooda, iyo noloshii ay ku dhamaysteen cibaado xumo iyo shirki leh, midaas oon waxba uga tarin illaahay xaggiisa if iyo aakhiraba. kitaabka taysiirul kariim al-mannaan. 779.

## 6. Illaahay keliya ayaa ah abuurre, mutaystana in la caabuddo, oon cid kele lala caabuddin.

ilahay keliya ayaa mutaysta in la caabuddo, oon cid kele lala caabuddin sida Allaah -koreeye- uu yiri:

﴿يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱعْبُدُوا۟ رَبَّكُمُ ٱلَّذِى خَلَقَكُمْ وَٱلَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ ﴿٢١﴾ ٱلَّذِى جَعَلَ لَكُمُ ٱلْأَرْضَ فِرَٰشًا وَٱلسَّمَآءَ بِنَآءً وَأَنزَلَ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَخْرَجَ بِهِۦ مِنَ ٱلثَّمَرَٰتِ رِزْقًا لَّكُمْ ۖ فَلَا تَجْعَلُوا۟ لِلَّهِ أَندَادًا وَأَنتُمْ تَعْلَمُونَ ﴿٢٢﴾﴾[البقرة: 22-21]

{ Dadow! Caabuda Rabbigiin, ee idin abuuray idinka iyo kuwii idinka horreeyayba, bal inaad dhowrtaan (amarrada Ilaahay oo iska jirtaan xumaha). (21) (Dadow! Caabuda Rabbigiin, ee idin abuuray idinka iyo kuwii idinka horreeyayba, bal inaad dhowrtaan (amarrada Ilaahay oo iska jirtaan xumaha). (22).} [Suuradda Al baqarah, aayadaha 21-22]

ilaaha na, abuuray anaga iyo kuwii naga horeeyay dhulkana ka yeelay Gogol, Samadana kasoo dajiyey biyo, kuna soo bixiyey Midho si aan u helno arsaaqad, midkaasu uunbaa ah midka cibaadadda mutaystay kaligii. Allaah wuxuu yiri:

﴿ يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱذۡكُرُواْ نِعۡمَتَ ٱللَّهِ عَلَيۡكُمۡۚ هَلۡ مِنۡ خَٰلِقٍ غَيۡرُ ٱللَّهِ يَرۡزُقُكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلۡأَرۡضِۚ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَۖ فَأَنَّىٰ تُؤۡفَكُونَ ٣ ﴾[فاطر: 3]

{ Dadow! Caabuda Rabbigiin, ee idin abuuray idinka iyo kuwii idinka horreeyayba, bal inaad dhowrtaan (amarrada Ilaahay oo iska jirtaan xumaha} [suuradda faadir, aayadda: 3]

Allaha wax abuura oo arsaaqa ayuun baa xaq u leh cibaadadda kaligii, wuxuuna yiri ilaahay:

﴿ ذَٰلِكُمُ ٱللَّهُ رَبُّكُمۡۖ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَۖ خَٰلِقُ كُلِّ شَيۡءٖ فَٱعۡبُدُوهُۚ وَهُوَ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ وَكِيلٞ ١٠٢ ﴾[الأنعام: 102]

{ Kaas waa Allaah, Rabbigiin, Ma jiro Ilaah (xaq lagu caabudo) aan Isaga ahayn. Abuuraha wax kasta, ee caabuda Keligii, oo Isaga baa wax kasta xilkood haya}. [suuradda al-ancaam, aayada102]

wixii ilaahay kasoo haray oo lacaabudo ma mutaysto cibaado, waayo wax mulki ah kuma leh samadda iyo dhulkka, ilaahayna wax lama laha kaalmana uma aha, ee sideebaa loola wadaajin cibaadadiisa cid kale, ilaahay wuxuu yiri:

﴿ قُلِ ٱدۡعُواْ ٱلَّذِينَ زَعَمۡتُم مِّن دُونِ ٱللَّهِ لَا يَمۡلِكُونَ مِثۡقَالَ ذَرَّةٖ فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَلَا فِي ٱلۡأَرۡضِ وَمَا لَهُمۡ فِيهِمَا مِن شِرۡكٖ وَمَا لَهُۥ مِنۡهُم مِّن ظَهِيرٖ ٢٢ ﴾[سبأ: 22]

{ Kaas waa Allaah, Rabbigiin, Ma jiro Ilaah (xaq lagu caabudo) aan Isaga ahayn. Abuuraha wax kasta, ee caabuda Keligii, oo Isaga baa wax kasta xilkood haya.} [suurada saba'a aayada 22]

ilaahay-nasahnaaye- isagaa unkay abuurka(makhluuqaadka) kana unkay wax aan hore ujirin, Taasi waxay tusinaysaa jiritaankiisa, Rabbinimo, iyo ilaahnimo ba, wuxuu yiri -Ilaahay:

﴿وَمِنۡ ءَايَٰتِهِۦٓ أَنۡ خَلَقَكُم مِّن تُرَابٖ ثُمَّ إِذَآ أَنتُم بَشَرٞ تَنتَشِرُونَ ٢٠ وَمِنۡ ءَايَٰتِهِۦٓ أَنۡ خَلَقَ لَكُم مِّنۡ
أَنفُسِكُمۡ أَزۡوَٰجٗا لِّتَسۡكُنُوٓاْ إِلَيۡهَا وَجَعَلَ بَيۡنَكُم مَّوَدَّةٗ وَرَحۡمَةًۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ
يَتَفَكَّرُونَ ٢١ وَمِنۡ ءَايَٰتِهِۦ خَلۡقُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ وَٱخۡتِلَٰفُ أَلۡسِنَتِكُمۡ وَأَلۡوَٰنِكُمۡۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ
لِّلۡعَٰلِمِينَ ٢٢ وَمِنۡ ءَايَٰتِهِۦ مَنَامُكُم بِٱلَّيۡلِ وَٱلنَّهَارِ وَٱبۡتِغَآؤُكُم مِّن فَضۡلِهِۦٓۚ إِنَّ فِي ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ
يَسۡمَعُونَ ٢٣ وَمِنۡ ءَايَٰتِهِۦ يُرِيكُمُ ٱلۡبَرۡقَ خَوۡفٗا وَطَمَعٗا وَيُنَزِّلُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءٗ فَيُحۡيِۦ بِهِ ٱلۡأَرۡضَ بَعۡدَ مَوۡتِهَآۚ إِنَّ فِي
ذَٰلِكَ لَأٓيَٰتٖ لِّقَوۡمٖ يَعۡقِلُونَ ٢٤ وَمِنۡ ءَايَٰتِهِۦٓ أَن تَقُومَ ٱلسَّمَآءُ وَٱلۡأَرۡضُ بِأَمۡرِهِۦۚ ثُمَّ إِذَا دَعَاكُمۡ دَعۡوَةٗ مِّنَ
ٱلۡأَرۡضِ إِذَآ أَنتُمۡ تَخۡرُجُونَ ٢٥ وَلَهُۥ مَن فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۖ كُلّٞ لَّهُۥ قَٰنِتُونَ ٢٦ وَهُوَ ٱلَّذِي يَبۡدَؤُاْ ٱلۡخَلۡقَ ثُمَّ يُعِيدُهُۥ
وَهُوَ أَهۡوَنُ عَلَيۡهِۚ وَلَهُ ٱلۡمَثَلُ ٱلۡأَعۡلَىٰ فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ وَهُوَ ٱلۡعَزِيزُ ٱلۡحَكِيمُ ٢٧﴾[الروم: 20-27]

{ Oo waxaa ka mid ah Calaamooyinka (Ilaahay ee muujinaya Awooddiisa) inuu idinka abuuray carro, mise waxaadba tihiin dad ku faafa arlada). (Oo waxaa ka mid ah Calaamooyinkiisa inuu idiinka abuuray nafahiinna lammaan idinla nooc ah si aad ugu xasishaan, oo Wuxuu dhexdiinna dhigay kalgacalo iyo naxariis, hubaal arrinkani waxaa ugu sugan calaamooyin qolo fekereysa). (Oo waxaa ka mid ah Calaamooyinkiisa abuurista samooyinka iyo arlada iyo kala duwanaanta carrabyadiinna iyo midabya- diinna. Hubaal waxaa arrinkani ugu sugan Calaamooyin kuwa aqoonta leh). (Oo waxaa ka mid ah Calaamooyinkiisa hurdadiinna habeenka iyo maalinta iyo doonashadiinna Deeqdiisa. Hubaal waxaa arrinkani ugu sugan Calaamooyin qolo wax maqasha). (Oo waxaa ka mid ah Calaamooyinkiisa inuu idin tusiyo hillaaca oo baqdin iyo rajoba leh, oo Wuxuu ka soo dejiyaa biyo (roob) daruuraha oo ku nooleeyaa arlada dhimashadeeda kaddib. Hubaal waxaa arrinkani ugu sugan calaamooyin qolo garasho leh). (Oo waxaa ka mid ah Calaamooyinkiisa inay samada iyo arlada ku sakhiran yihiin Amarkiisa, haddana marka uu idiinka yeedho yeermo keliya dhulka, aad kolkiiba soo baxeysaan). (Oo Isaga baa iska leh waxa ku sugan samooyinka iyo arlada, kulligoodba Isaga (Allaah) bay u hoggaansan yihiin). ( Oo waa isaga (Alle) Kan billaaba uunka, haddana soo nooleyn dhimasho kaddib, oo aad bay

ugu sahlan tahay. Oo Isaga baa iska leh sifooyinka sare samooyinka iyo arlada gudahooda, oo Waa Isaga Adkaadaha Sare, Xakiimka ah }. [Suurada Ar- ruum, aayaddaha 20 - 27]

Namruud ayaa inkiray in Rabbi jiro markaasuu Nabi Ibraahiim-calayhi salaam- ku yiri:

﴿أَلَمۡ تَرَ إِلَى ٱلَّذِي حَآجَّ إِبۡرَٰهِـۧمَ فِي رَبِّهِۦٓ أَنۡ ءَاتَىٰهُ ٱللَّهُ ٱلۡمُلۡكَ إِذۡ قَالَ إِبۡرَٰهِـۧمُ رَبِّيَ ٱلَّذِي يُحۡيِۦ وَيُمِيتُ قَالَ أَنَا۠ أُحۡيِۦ وَأُمِيتُۖ قَالَ إِبۡرَٰهِـۧمُ فَإِنَّ ٱللَّهَ يَأۡتِي بِٱلشَّمۡسِ مِنَ ٱلۡمَشۡرِقِ فَأۡتِ بِهَا مِنَ ٱلۡمَغۡرِبِ فَبُهِتَ ٱلَّذِي كَفَرَۗ وَٱللَّهُ لَا يَهۡدِي ٱلۡقَوۡمَ ٱلظَّٰلِمِينَ٢٥٨﴾[البقرة: 258]

{ Ma waadan u fiirsan kaa (Namruud) ee kala dooday Ibraahiim arrinka Rabbigi, inuu Allaah siiyey boqortooyo darteed? markuu Ibraahiim yidhi: Rabbigay waa Kan bixiya nolol ee sabab dhimasho. wuxuu yidhi: Aniguba waxaan bixiyaa nolol oo sababaa dhimasho68. Ibraahiim wuxuu yidhi: Haddaba hubaal Allaah wuxuu qorraxda ka soo saaraa xagga bariga ee adigu ka soo saar xagga galbeedka. Markaasuu kaa isagu gaaloobay amakaag aamusay. Oo Allaah ma hanuuniyo dadka gar maqaatayaasha ah.}. [suurada Al-baqara, aayada 258]

Wuxuuna Nabi Ibraahiim daliil uga dhiggay tolkii:

﴿ ٱلَّذِي خَلَقَنِي فَهُوَ يَهۡدِينِ٧٨ وَٱلَّذِي هُوَ يُطۡعِمُنِي وَيَسۡقِينِ٧٩ وَإِذَا مَرِضۡتُ فَهُوَ يَشۡفِينِ٨٠ وَٱلَّذِي يُمِيتُنِي ثُمَّ يُحۡيِينِ ٨١﴾[الشعراء: 78-81]

{ inuu ilaahay yahay kan hanuuniyay oo quudiyay, ee haya xanuunka iyo caafimaadkaba, nolosha iyo geeriddaba. (Ee i abuuray, ee ah Kan i hanuunsha). (‘Oo Waa Isaga Kan I quudiya oo i waraabsha). (Markaan Bukoodana Isagaa I Caafiya). (Waana kan I dili Ina Noolayn }. [Suuradda As-shucaraa aayadaha 78- 81 ]

Ilaahay-koreeye- wuxuu yiri -isaga oo ka warama nabi muuse-calayhi salaam, doodii dhex martay fircoon, inuu yiri Muuse Rabbigay:

﴿قَالَ رَبُّنَا ٱلَّذِيٓ أَعۡطَىٰ كُلَّ شَيۡءٍ خَلۡقَهُۥ ثُمَّ هَدَىٰ٥٠﴾[طه: 50]

{ waa kan Siiyay wax walba Abuurkiisa oo hadana habuuniya} [Suuradda Daahaa, aayadda 50 ]

Ilaahay wuxuu u sakhiray aadamaha wax walba oo kusugan samada iyo dhulka, nimco badana wuu siiyay si ay isaga uun u caabudaan, oo ayna ku gaaloobin:

﴿أَلَمۡ تَرَوۡاْ أَنَّ ٱللَّهَ سَخَّرَ لَكُم مَّا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِ وَأَسۡبَغَ عَلَيۡكُمۡ نِعَمَهُۥ ظَٰهِرَةٗ وَبَاطِنَةٗۗ وَمِنَ ٱلنَّاسِ مَن يُجَٰدِلُ فِي ٱللَّهِ بِغَيۡرِ عِلۡمٖ وَلَا هُدٗى وَلَا كِتَٰبٖ مُّنِيرٖ ٢٠﴾[لقمان: 20]

{ Miyeydaan arkayn inuu Ilaahay idiin sakhiray waxa ku sugan samooyinka iyo arlada, oo idinku galladay korkiina Nicmooyinkiisa kuwo muuqda iyo kuwo qarsoonba? . Dadka waxaa ka mid ah kuwo ka dooda arrinka Ilaahay isagoon u lahayn cilmi iyo hanuun iyo kitaab wax iftiimiya midna }. { Suurada luqmaan aayada 20]

Sidaad uu Ilaahay dadka ugu sakhiray waxa ku sugan samada iyo dhulka, ayuu u sameeyay aadamaha maqal iyo arag si ay u bartaan wax kasta oo ay u baahan yihiin, iyo aqoon walba oo anfacaysa, taasi waxay ku tusinnaysaa gargaarkiisa wuxuu yiri ilaahay:

﴿ وَٱللَّهُ أَخۡرَجَكُم مِّنۢ بُطُونِ أُمَّهَٰتِكُمۡ لَا تَعۡلَمُونَ شَيۡـٔٗا وَجَعَلَ لَكُمُ ٱلسَّمۡعَ وَٱلۡأَبۡصَٰرَ وَٱلۡأَفۡـِٔدَةَ لَعَلَّكُمۡ تَشۡكُرُونَ ٧٨﴾[النحل: 78]

{ Ilaahay wuxuu idinka soo bixiyay Caloosha Hooyooyinkiin Waxba idinkoon ogayn wuxuuna idiin yeelay maqal iyo arag iyo quluub, si aad ugu mahadnaqdaan.} [Suuradda An-naxl, aayadda: 78]

Ilaahay-koreeye- isagaa abuuray dhamaan Uunka, iyo Aadamaha ba, oo siiyay waxkasta oo ay u baahan yihiin, iyo awood uu ku guto Aadamahaasi Cibaadada ilaahay dhulkana u cammiro, markaasaa loo fududeeyay wax walba oo ku jira Samada iyo Arlada dhexdeeda.

Waxayna daliil iyo caddayn u yihiin Abuurista uu abuuray Uumankaas waawayn, Ilaahnimadiisa keensanaysa in la Caabudo, isagoo taasi caddaynaya wuxuu yiri:

﴿قُلۡ مَن يَرۡزُقُكُم مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلۡأَرۡضِ أَمَّن يَمۡلِكُ ٱلسَّمۡعَ وَٱلۡأَبۡصَٰرَ وَمَن يُخۡرِجُ ٱلۡحَيَّ مِنَ ٱلۡمَيِّتِ وَيُخۡرِجُ ٱلۡمَيِّتَ مِنَ ٱلۡحَيِّ وَمَن يُدَبِّرُ ٱلۡأَمۡرَۚ فَسَيَقُولُونَ ٱللَّهُۚ فَقُلۡ أَفَلَا تَتَّقُونَ ٣١﴾[يونس: 31]

{ waxaad dhahdaa yaa idinka Arsaaqa Samada iyo dhulka, yaana hanta maqalka, Aragyada, yaana ka soo bixiya wax nool wax dhintay, kana soo bixiya was dhintay wax nool, yaana qorsheeya umuurta, waxay ku odhan Eebe, waxaad dhahdaa miyeydaan Dhawrsanayn} [Suuradda Yuunis, aayadda:31]

ilaahay wuxuu yiri:

﴿قُلۡ أَرَءَيۡتُم مَّا تَدۡعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ أَرُونِي مَاذَا خَلَقُواْ مِنَ ٱلۡأَرۡضِ أَمۡ لَهُمۡ شِرۡكٞ فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِۖ ٱئۡتُونِي بِكِتَٰبٖ مِّن قَبۡلِ هَٰذَآ أَوۡ أَثَٰرَةٖ مِّنۡ عِلۡمٍ إِن كُنتُمۡ صَٰدِقِينَ﴿٤﴾﴾[الأحقاف: 4]

{ Waxaad Dhahdaa nabiyoow bal ka warrama waxaad caabudaysaan ee Eebe ka soo hadhay ina tusiya waxay ku abuureen dhulka, ama shirkad ah oy ku leeyihiin Samaawaadka, ii keena (oo i tusiya) Kitaab Quraanka, ka horreyay, ama wax raad cilmi ah, haddaad run sheegeeysaan} [suuradda al axqaaf, aayadda 4 ]

Allaha sareeyay waxa uu yiri:

﴿ خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ بِغَيۡرِ عَمَدٖ تَرَوۡنَهَاۖ وَأَلۡقَىٰ فِي ٱلۡأَرۡضِ رَوَٰسِيَ أَن تَمِيدَ بِكُمۡ وَبَثَّ فِيهَا مِن كُلِّ دَآبَّةٖۚ وَأَنزَلۡنَا مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءٗ فَأَنۢبَتۡنَا فِيهَا مِن كُلِّ زَوۡجٖ كَرِيمٍ﴿١٠﴾ هَٰذَا خَلۡقُ ٱللَّهِ فَأَرُونِي مَاذَا خَلَقَ ٱلَّذِينَ مِن دُونِهِۦۚ بَلِ ٱلظَّٰلِمُونَ فِي ضَلَٰلٖ مُّبِينٖ ﴿١١﴾﴾[لقمان: 10-11]

{isaga abuuray Samooyinka Tiir aad aragtaan la'aantiis, dhulkana wuxuu ku tuuray Buuro (suga) inayan dhaqdhaqaaqin, wuxuuna ku fidiyey dhexdiisa daabad kasta, Samadana waxaan ka soo dejinay Biyo, waxaana ku soo bixiney nooc kasta oo quruxsan(kaasi waa abuurkii Eebe, ee i tusiya waxay abuureen kuwa ka soo hadhay Eebe, saas ma aha, ee dulmi falayaashu waxay ku suganyihiin baadi Cad. [suuradda al-naml, aayaddaha 10- 11]

ilaahay -koreeye- wuxuu yiri:

﴿ أَمۡ خُلِقُواْ مِنۡ غَيۡرِ شَيۡءٍ أَمۡ هُمُ ٱلۡخَٰلِقُونَ﴿٣٥﴾ أَمۡ خَلَقُواْ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضَۚ بَل لَّا يُوقِنُونَ﴿٣٦﴾ أَمۡ عِندَهُمۡ خَزَآئِنُ رَبِّكَ أَمۡ هُمُ ٱلۡمُصَيۡطِرُونَ ﴿٣٧﴾﴾[الطور: 35-37]

{ Mise waxaa la abuuray abuure la'aan, mise iyagaa abuuray (naftooda). (Mise iyagaa Samaawaadka iyo Dhulka abuuray, saas ma aha ee wax ma ayan yaqiininin). {Mise agtooddaa waxaa yaala rabbigaa kayd yaalkiisa, Mise iyagaa xisaabin dadka} [suuradda Ad-duur aayaddaha 35- 37]

wuxuu yiri shiikh Sicdi: "Tani waa daliil dushooda ah daliilkaas oo ku qasbaya inay xaqa raacaan ama ay noqdaan kuwo ka hor imanaya wixii ay caqli iyo diin tusayaan. tafsiirka shiikh Sicdi: 816.

## 7. ilaahay waa kan abuuray waxa uunka ku sugan een inoo muuqda iyo kan aanan muuqanba, wixii isaga kasoo harayna waa wax la abuuray, oo ilaahay lix maalin ayuu ku abuurray samooyinka iyo dhulka:

ilaahay waa kan abuuray waxa uunka kusugan oon aragno iyo kan aan aragba, wixii isaga kasoo harayna waa wax la abuuray oo makh luuqiisa ka mid ah, ilaahay na wuxuu yiri:

﴿قُلۡ مَن رَّبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ قُلِ ٱللَّهُۚ قُلۡ أَفَٱتَّخَذۡتُم مِّن دُونِهِۦٓ أَوۡلِيَآءَ لَا يَمۡلِكُونَ لِأَنفُسِهِمۡ نَفۡعٗا وَلَا ضَرّٗاۚ قُلۡ هَلۡ يَسۡتَوِي ٱلۡأَعۡمَىٰ وَٱلۡبَصِيرُ أَمۡ هَلۡ تَسۡتَوِي ٱلظُّلُمَٰتُ وَٱلنُّورُۗ أَمۡ جَعَلُواْ لِلَّهِ شُرَكَآءَ خَلَقُواْ كَخَلۡقِهِۦ فَتَشَٰبَهَ ٱلۡخَلۡقُ عَلَيۡهِمۡۚ قُلِ ٱللَّهُ خَٰلِقُ كُلِّ شَيۡءٖ وَهُوَ ٱلۡوَٰحِدُ ٱلۡقَهَّٰرُ ١٦﴾[الرعد: 16]

{ waxaad dhahdaa yaa ah Eebaha Samooyinka iyo Dhulka, waxaadna dhahdaa waa Eebe, waxaadna dhahdaa ma yeelanaysaan Eebe ka sokow Awliyo (gargaarayaal) oon u hananayn naftooda Nacfi iyo dhib midna, dheh ma egyihiin Indhoole iyo wax Arke, mase ehyihiin Mugdiyo iyo Nuur mise waxay u yeeleen Eebe Shuruko wax u Abuuray sida Abuurka Eebe oo waxaa isaga ekaaday Abuurkii, waxaad dhahdaa Eebaa wax kasta Abuuray waana kali awood badan.} [suurada al-racad 16]

ilaahay wuxuu yiri:

﴿...وَيَخۡلُقُ مَا لَا تَعۡلَمُونَ ٨﴾[النحل: 8]

{ Fardaha iyo Baqlaha iyo Dameeraha wuxuu (idiin ku abuuray Eebe) Inaad kortaan iyo Qurux, Wuxuuna abuuri Waxaydaan Ogayn} [suurada al-naxli 8.]

Alle waa kan ku abuuray Samooyinka iyo Dhulka lix maalmood, isagoo taas ka hadlaya ilaahayna wuxuu yiri:

﴿قُلۡ مَن رَّبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ قُلِ ٱللَّهُۚ قُلۡ أَفَٱتَّخَذۡتُم مِّن دُونِهِۦٓ أَوۡلِيَآءَ لَا يَمۡلِكُونَ لِأَنفُسِهِمۡ نَفۡعٗا وَلَا ضَرّٗاۚ قُلۡ هَلۡ يَسۡتَوِي ٱلۡأَعۡمَىٰ وَٱلۡبَصِيرُ أَمۡ هَلۡ تَسۡتَوِي ٱلظُّلُمَٰتُ وَٱلنُّورُۗ أَمۡ جَعَلُواْ لِلَّهِ شُرَكَآءَ خَلَقُواْ كَخَلۡقِهِۦ فَتَشَٰبَهَ ٱلۡخَلۡقُ عَلَيۡهِمۡۚ قُلِ ٱللَّهُ خَٰلِقُ كُلِّ شَيۡءٖ وَهُوَ ٱلۡوَٰحِدُ ٱلۡقَهَّٰرُ ١٦﴾[الحديد: 4]

{ Eebe waa kan ku abuuray Samaawaadka iyo Dhulka Lix Maalmood , markaasna Carshiga ka kor ahaaday(si isaga u qunta), wuxuuna ogyahay waxa Dhulka gali iyo waxa ka soo bixi, waxa Samada ka soo daga iyo waxa kori, Eebana waa idinla jiraa meelkastood ku sugantihiinba, waxaad camal falaysaanna Eebe waa arkaa.} [Suuradda Alxadiid, aayadda:4]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وَلَقَدۡ خَلَقۡنَا ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضَ وَمَا بَيۡنَهُمَا فِي سِتَّةِ أَيَّامٖ وَمَا مَسَّنَا مِن لُّغُوبٖ ٣٨﴾[ق: 38]

{ Dhabahaan annagaa Samaawaadka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya ku abuura lix maalmood, wax daal ahna nama taabanin.} [Suuradda Qaaf, aayadda: 38]

## 8. ALLAAH AYAA -XUMAAN OO DHAN KA NASAHAN- MANA JIRTO CID LA WADAAGTA MAAMULKIISA, ABUURISTIISA, IYO HAGIDDA UMUURAHA.

Ilaahay waa boqorka boqorada, mana jirto cid lawadaagto mulkigiisa iyo abuuritaankiisa iyo maamulida kownka, isagoo tusaale bixinaya wuxuu yiri:

﴿قُلۡ أَرَءَيۡتُم مَّا تَدۡعُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ أَرُونِي مَاذَا خَلَقُواْ مِنَ ٱلۡأَرۡضِ أَمۡ لَهُمۡ شِرۡكٞ فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِۖ ٱئۡتُونِي بِكِتَٰبٖ مِّن قَبۡلِ هَٰذَآ أَوۡ أَثَٰرَةٖ مِّنۡ عِلۡمٍ إِن كُنتُمۡ صَٰدِقِينَ ٤﴾[الأحقاف: 4]

{ Dhabahaan annagaa Samaawaadka iyo Dhulka iyo waxa u dhaxeeya ku abuura lix maalmood, wax daal ahna nama taabanin} [suurada al axqaaf 4 ]

wuxuu yiri shiikh alsicdi:ً Waxaad ku dhahdaa mushrikiinta caabbudaya sanamyo iyo wixii ay Alle la simayaan, kuwaa aad caabudaysaan waxba idiinka tari maayaan, dhib iyo dheef, ama nolol iyo geeri, ama isa soo

saarka(qiyaame), oo ku dheh adoo u caddeynaya tabaryaridoodda waxaa ay caabudayaan (I tusa maxay abuureen oo ka mid ah arlada, mise samooyinka ayay qayb ku leeyihiin) oo wax ka abuureen,? buuraha se ma unkeen, geed ma abuureen oo ma soo bixiyeen? wabiyaal ma socdsiiyeen?!, intaasi iyo kuwo kaleba waa daliilo caqli ku dhisan,(caqligal ah) in wixii kasoo harray ilaahay cibaadadiisu ay tahay baadi iyo hallow. Daliiladaa macquulka ah ee caqliga ku dhisan markii loo hogo-tusaaleeyay kadib, ayaa loogu darray daliilo xaga xujadda ah(naqli), wuxuuna yidhi: (Ii keena Kitaab (Qur،aan) kan hortii) oo Shirki ku baaqaya, (ama wax raad cilmi (hore) ah) oo laga dhaxlay Rusushii , oo sidaas idin faraya. Shaki kuma jiro inay arintaasi keeni kari waayeen, waxa kale oo aan shaki ku jirin in Rushusha dhamaantood ku baaqayeen Tawxiidka Ilaahay, dadkoodana ka reebayeen wixii shirki ah. Tafsiirka shiikh sicdi: 779.

ilaahay isagaa ah mulkiilaha maamula kawnka, cid la wadaagtana ma jirto, isagoo arintaa caddayna ilaahay wuxuu yiri:

﴿ قُلِ ٱللَّهُمَّ مَٰلِكَ ٱلۡمُلۡكِ تُؤۡتِي ٱلۡمُلۡكَ مَن تَشَآءُ وَتَنزِعُ ٱلۡمُلۡكَ مِمَّن تَشَآءُ وَتُعِزُّ مَن تَشَآءُ وَتُذِلُّ مَن تَشَآءُۖ بِيَدِكَ ٱلۡخَيۡرُۖ إِنَّكَ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٞ ٢٦﴾[آل عمران: 26]

{ Waxaad dhahdaa Eebow adaa hanta Xukunka waxaad siisaa Xukunka Ciddaad doonto waxaad ka siibtaa «Wareejisaa» Xukunka Ciddaad doonto, waxaadna cisaysaa Ciddaad doonto waxaadna Dulaysaa Ciddaad doonto, Gacantaaduu ku jiraa Khayrka(dhamaantii) adaana wax kasta kara.} [Suurada Aal-cimraan aayada 26]

Ilaahay wuxuu caddeeyay in mulkiga dhamaystiran maalinta qiyaamaha isagu leeyahay:

﴿ يَوۡمَ هُم بَٰرِزُونَۖ لَا يَخۡفَىٰ عَلَى ٱللَّهِ مِنۡهُمۡ شَيۡءٞۚ لِّمَنِ ٱلۡمُلۡكُ ٱلۡيَوۡمَۖ لِلَّهِ ٱلۡوَٰحِدِ ٱلۡقَهَّارِ ١٦﴾[غافر: 16]

[Maalinta ay usoo muuqan (usoo bixi) Eebe waxba kama qarsoona korkiisa, wuxuuna dhihi Eebe yaa xukunka iska leh maanta, markaasuu dhihi Eebaha kalida ah ee awooda badan.} [suuradda Qaafir, aayadda : 16]

ilaahay cid lawaagto mulkigiisa iyo abuuritaankiisa iyo maamulida koonka iyo cibaadada majirto ilaahay wuxuu yiri:

﴿ وَقُلِ ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ ٱلَّذِي لَمۡ يَتَّخِذۡ وَلَدٗا وَلَمۡ يَكُن لَّهُۥ شَرِيكٞ فِي ٱلۡمُلۡكِ وَلَمۡ يَكُن لَّهُۥ وَلِيّٞ مِّنَ ٱلذُّلِّۖ وَكَبِّرۡهُ تَكۡبِيرَۢا ١١١ ﴾[الإسراء: 111]

{ waxaadna dhahdaa mahad Eebaa iska leh een Yeelanin Ilmo, una signayn shariig xukunkiisu (lawadaage) una sugnayn gargaare dulli dartiis (uga gargaare) ee waynee waynayn.} [ Suuradda israa, aayadda: 111]

Allah koreeyae waxa uu yiri:

﴿ ٱلَّذِي لَهُۥ مُلۡكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ وَلَمۡ يَتَّخِذۡ وَلَدٗا وَلَمۡ يَكُن لَّهُۥ شَرِيكٞ فِي ٱلۡمُلۡكِ وَخَلَقَ كُلَّ شَيۡءٖ فَقَدَّرَهُۥ تَقۡدِيرٗا ٢ ﴾[الفرقان: 2]

{ Eebaha uu u Sugnaaday Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, Yeelaninna Ilmo una Sugnaanin Shariig (la Wadaage) Xukunka, Abuuraynа wax kasta, oo u ahaysiiyey si Qiyaasan.} [suuradda al-furqaan, aayadda: 2 ]

ilaahay waa kan leh waxkasta wixii kasooharayna waa lahante waana abuuraha waxa kalena waa la abuurayaal waana kan maamula waxkasta hadaba ruuxa arinkiisu sidaa yahay waxaa waajib ah in isaga lacaabudo wixii kale oo lacaabudo waa caqli yaraan iyo shirki kaa fasahaadinaya aduun iyo aakhiro ilaahay wuxuu yiri:

﴿ وَقَالُواْ كُونُواْ هُودًا أَوۡ نَصَٰرَىٰ تَهۡتَدُواْۗ قُلۡ بَلۡ مِلَّةَ إِبۡرَٰهِـۧمَ حَنِيفٗاۖ وَمَا كَانَ مِنَ ٱلۡمُشۡرِكِينَ ١٣٥ ﴾[البقرة: 135]

{ waxay ku dhaheen Gaaladii Muslimiinta ama Yuhuud noqda ama Nasaara aad hanuunteene, waxad dhahdaa mayee milladda (Diinta Nabi) Ibraahim yaan raacaynaa ee Xaqa u iishay, kamana mid ahayn Gaalada} [suurada albaqrah, aayadda: 135]

Allah koreeyae waxa uu yiri:

﴿ وَمَنۡ أَحۡسَنُ دِينٗا مِّمَّنۡ أَسۡلَمَ وَجۡهَهُۥ لِلَّهِ وَهُوَ مُحۡسِنٞ وَٱتَّبَعَ مِلَّةَ إِبۡرَٰهِيمَ حَنِيفٗاۗ وَٱتَّخَذَ ٱللَّهُ إِبۡرَٰهِيمَ خَلِيلٗا ١٢٥ ﴾[النساء: 125]

{ yaa ka diin fiican ruux u jeediyey wajigiisa Eebe isagoo sama fali oo raaca diinta (Nabi) Ibraahim, wuxuuna ka yeeshay Eebe Ibraahiim khaliil (mid u gaar ah.} [suurada al-nisaa 125]

ilaahay wuxuu cadeeyey in qofkii raaca diin aan ahayn midii nabi ibraahiim uu yahay mid caqli gaaban alle wuxuu yiri:

﴿ وَمَن يَرۡغَبُ عَن مِّلَّةِ إِبۡرَٰهِـۧمَ إِلَّا مَن سَفِهَ نَفۡسَهُۥۚ وَلَقَدِ ٱصۡطَفَيۡنَٰهُ فِي ٱلدُّنۡيَاۖ وَإِنَّهُۥ فِي ٱلۡأٓخِرَةِ لَمِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴾[البقرة: 130]

{ Yaa naca diinta Nabi Ibraahim ruux xumeeyey naftiisa mooyee, waana doorannay Nabi Ibraahim adduunyada(inuu nabi iyo rasuul noqdo), aakhirana wuxuu ka mid noqon kuwa saalixiinta.}. [suurada Al-baqrah, aayadda : 130 ]

## 9. ilaahay wax ma dhalin, isna lama dhalin.Wax u dhigma ama la mid ahna ma jiro.

ilaahay ma dhalin(ilmo ma laha), lamana dhalin(ma laha waalid), mana laha cid u dhigma ama la mid ah, ilaahayna wuxuu yiri:

﴿ قُلۡ هُوَ ٱللَّهُ أَحَدٌ ١ ٱللَّهُ ٱلصَّمَدُ ٢ لَمۡ يَلِدۡ وَلَمۡ يُولَدۡ ٣ وَلَمۡ يَكُن لَّهُۥ كُفُوًا أَحَدُۢ ٤ ﴾[الإخلاص: 1-4]

{Waxaad dhahdaa (Nabiyow) Eebe waa Kali (wehelna ma leh). (Waana Sayid (deeqtoon). (Waana Sayid (deeqtoon). (Wax la mid ahna ma jiro}. [suurada al-ikhlaas, aayaddaha: 1-4]

Allah koreeyae waxa uu yiri:

﴿ رَّبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ وَمَا بَيۡنَهُمَا فَٱعۡبُدۡهُ وَٱصۡطَبِرۡ لِعِبَٰدَتِهِۦۚ هَلۡ تَعۡلَمُ لَهُۥ سَمِيّٗا ٦٥ ﴾[مريم: 65]

{waa Eebaha samooyinka iyo dhulka iyo waxa u dhaxeeya ee caabud kuna samir cibaadadiisa, ma u ogtahay Eebe wax la mid ah, (oo la magaca} [suurada Maryam, aayadda: 65 ]

ilaaha xaqa ah wuxuu yiri:

﴿ فَاطِرُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ جَعَلَ لَكُم مِّنۡ أَنفُسِكُمۡ أَزۡوَٰجٗا وَمِنَ ٱلۡأَنۡعَٰمِ أَزۡوَٰجٗا يَذۡرَؤُكُمۡ فِيهِۚ لَيۡسَ كَمِثۡلِهِۦ شَيۡءٞۖ وَهُوَ ٱلسَّمِيعُ ٱلۡبَصِيرُ ١١ ﴾[الشورى: 11]

{ Isagaa abuuray Samooyinka iyo dhulka idiinkana yeelay naftiinna noocyo (Lab iyo Dhaddig) xoolahana idiinka yeelay Noocyo, wuuna idiin abuuraa, wax la mid ahna ma jiro, waana maqle arka.} [Suurada Ash-shuuraa aayadda 11]

## 10. ilaahay -nasahnaaye- meelna ma dhex dago jasad(jir) kale oo inta uu abuuray ka mid ah, cidna iskuma eekaysiiyo.

laahay -nasahnaaye- meelna ma dhex dago, jasad(jir) kale oo inta uu abuuray ka mid ahna iskuma eekaysiiyo, wax uu la midoobaana ma jirto, maxaa yeelay ilaahay isaga uunbaa khaaliq(uume) ah wixii ka soo harayna waa la'uume(makhluuq), wax kasta isagaa mulkiya oo leh, ee sidee ku suurto gali inuu cid kale u baahdo, isagaa ka wayn wax walba. isagoo ilaahay haddaladaas ku daadafaynaya(fogaynaya) kuwii sheegtay inuu ilaahay ku dhex jiro nabi Ciise:

﴿لَّقَدۡ كَفَرَ ٱلَّذِينَ قَالُوٓاْ إِنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلۡمَسِيحُ ٱبۡنُ مَرۡيَمَۚ قُلۡ فَمَن يَمۡلِكُ مِنَ ٱللَّهِ شَيۡـًٔا إِنۡ أَرَادَ أَن يُهۡلِكَ ٱلۡمَسِيحَ ٱبۡنَ مَرۡيَمَ وَأُمَّهُۥ وَمَن فِي ٱلۡأَرۡضِ جَمِيعٗاۗ وَلِلَّهِ مُلۡكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ وَمَا بَيۡنَهُمَاۚ يَخۡلُقُ مَا يَشَآءُۚ وَٱللَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٞ ١٧﴾[المائدة: 17]

{ dhab ahaan way gaaloobay kuwa yidhi Eebe waa uun Masiixi Ibnu maryama, yaa uga Hanan Eebe wax haddii uu doono inuu Hallaago Masiixi Ibnu Maryama iyo Hooyadiis iyo waxa Dhulka ku sugaan Dhammaan, Eeba iska leh Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, iyo waxa u Dhaxeeya, wuxuuna abuuraa wuxu Doono, Eebana wax kasta wuu karaa} [Suurada Almaa'idah, aayadda: 17 ]

Allaha -koreeye- waxa uu yiri:

﴿وَلِلَّهِ ٱلۡمَشۡرِقُ وَٱلۡمَغۡرِبُۚ فَأَيۡنَمَا تُوَلُّواْ فَثَمَّ وَجۡهُ ٱللَّهِۚ إِنَّ ٱللَّهَ وَٰسِعٌ عَلِيمٞ ١١٥ وَقَالُواْ ٱتَّخَذَ ٱللَّهُ وَلَدٗاۗ سُبۡحَٰنَهُۥۖ بَل لَّهُۥ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۖ كُلّٞ لَّهُۥ قَٰنِتُونَ ١١٦ بَدِيعُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۖ وَإِذَا قَضَىٰٓ أَمۡرٗا فَإِنَّمَا يَقُولُ لَهُۥ كُن فَيَكُونُ ١١٧﴾[البقرة: 115-117]

{Qorax ka soo baxa iyo qorax u dhacba Eebaa iska leh, meel kastood u jeedsataanna waxa ah wajiga ilaahay, (markaad Qiblada ka habowdaan) ilaahayna waa deeq-balaarne, ogaal badan}. (115). (waxay dhaheen Gaaladii wuxuu yeeshay ilaahay ilmo, nasahnaaye, saas maaha, oo waxaa u sugnaaday wixii samooyinka ku jira iyo arlada(dhulka) dhamaanna ilaahay bay u hogaansamaan} (116). {Waa unkaha Samooyinka iyo

Dhulka, markuu xukumo arrinna, wuxuu dhahaa uun ahaw wuuna ahaadaa)arinkii. (117)} [Suurada albaqara, aayaddaha: 115-117 ]

Allah koreeyae waxa uu yiri:

﴿وَقَالُواْ ٱتَّخَذَ ٱلرَّحۡمَٰنُ وَلَدٗا ٨٨ لَّقَدۡ جِئۡتُمۡ شَيۡـًٔا إِدّٗا ٨٩ تَكَادُ ٱلسَّمَٰوَٰتُ يَتَفَطَّرۡنَ مِنۡهُ وَتَنشَقُّ ٱلۡأَرۡضُ وَتَخِرُّ
ٱلۡجِبَالُ هَدًّا ٩٠ أَن دَعَوۡاْ لِلرَّحۡمَٰنِ وَلَدٗا ٩١ وَمَا يَنۢبَغِي لِلرَّحۡمَٰنِ أَن يَتَّخِذَ وَلَدًا ٩٢ إِن كُلُّ مَن فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ
إِلَّآ ءَاتِي ٱلرَّحۡمَٰنِ عَبۡدٗا ٩٣ لَّقَدۡ أَحۡصَىٰهُمۡ وَعَدَّهُمۡ عَدّٗا ٩٤ وَكُلُّهُمۡ ءَاتِيهِ يَوۡمَ ٱلۡقِيَٰمَةِ فَرۡدًا ٩٥﴾[مريم: 88-95]

{ waxay dheheen (gaaladu) wuxuu yeeshay Eebaha Raxmaana ilmo). (waxay dheheen (gaaladu) wuxuu yeeshay Eebaha Raxmaana ilmo). (oy u dhawdahay samooyinku inay la dillaacaan lana jeexmo dhulku oy la hoobato buuruhu burbur). (inay u sheegeen Eebaha Raxmaana ilmo). (kuma habboona Eebaha Raxmaana inuu yeesho ilmo). (wax kastoo Samada iyo Dhulka ku sugan uxuu u imaan Eebe isagoo Addoona). (wuu koobay Eebe wuuna Tiriyey Tiro). (wuu koobay Eebe wuuna Tiriyey Tiro. [suurada Maryam, aayaddaha: 88-95]

Ilaahay kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ٱللَّهُ لَآ إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ٱلۡحَيُّ ٱلۡقَيُّومُۚ لَا تَأۡخُذُهُۥ سِنَةٞ وَلَا نَوۡمٞۚ لَّهُۥ مَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِي ٱلۡأَرۡضِۗ مَن ذَا ٱلَّذِي
يَشۡفَعُ عِندَهُۥٓ إِلَّا بِإِذۡنِهِۦۚ يَعۡلَمُ مَا بَيۡنَ أَيۡدِيهِمۡ وَمَا خَلۡفَهُمۡۖ وَلَا يُحِيطُونَ بِشَيۡءٖ مِّنۡ عِلۡمِهِۦٓ إِلَّا بِمَا شَآءَۚ وَسِعَ
كُرۡسِيُّهُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضَۖ وَلَا يَـُٔودُهُۥ حِفۡظُهُمَاۚ وَهُوَ ٱلۡعَلِيُّ ٱلۡعَظِيمُ ٢٥٥﴾[البقرة: 255]

{ Eebe Ilaahaan isaga ahayn ma jiro, waana Eebaha Nool, Khalqigana maamula. Ma qabato Lulmo iyo hurdo (midna) wuxuuna iska leeyahay waxa Samooyinka ka sugan iyo Dhulka, waa kuma kan ka shafeeci agtiisa (Eebe) idankiisa mooyee, wuxuu ogyahay (Eebe) waxa Dadka hortooda ah iyo waxa ka dambeeya mana koobaan wax Cilmigiisa ah, wuxuu Eebe doono mooyee, wuuna u waasacay kursigiisu Samaawaadka iyo Dhulka, mana Cusleeyo ilaalintoodu, Eebana waa sareeye wayn.} [suurada Albaqrah, aayadda 255]

allaha sidaa uu u kala duwan yahay xaaladiisa iyo xaalada uunkiisa uu abuuray yahay arinkiisu, siduu udhex dagaa odoomadiisa mid kamid ah ama uu uyeeshaa ilmo, ama ilaah kale u samaystaa?!

## 11. ilaahay waa mid uturid badan unaxariista adoomadiisa wuxuuna usoodiray adoomadiisa Rusul kutubna waa usoo dejiyay.

ilaahay waa u ture u naxariiste adoomadiisa, Naxariistiisana waxaa kamid ah: inuu usoo diray adoomadiisa Rusul, una soo dajiyay kutub, si uu uga saaro mugddiyada gaalnimada iyo shirkiga oo gaadhsiiyo Nuurka towxiidka iyo hanuunka, isagoo midaas ka hadlaya wuxuu yidhi ilaahay:

﴿ هُوَ ٱلَّذِي يُنَزِّلُ عَلَىٰ عَبۡدِهِۦٓ ءَايَٰتِۭ بَيِّنَٰتٖ لِّيُخۡرِجَكُم مِّنَ ٱلظُّلُمَٰتِ إِلَى ٱلنُّورِۚ وَإِنَّ ٱللَّهَ بِكُمۡ لَرَءُوفٞ رَّحِيمٞ ٩﴾[الحديد: 9]

{ Eebe waa ka soo dajiyay Aayaad cadcad si uu idiinka bixiyo mugdiga, Nuurna idiinku bixiyo, Eebana waa idiin naxariis badanyahay.} [suuradda Alxadiid, aayaddaha : 9 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وَمَآ أَرۡسَلۡنَٰكَ إِلَّا رَحۡمَةٗ لِّلۡعَٰلَمِينَ ١٠٧﴾[الأنبياء: 107]

{ Eebe waa ka soo dajiyay Aayaad cadcad si uu idiinka bixiyo mugdiga, Nuurna idiinku bixiyo, Eebana waa idiin naxariis badanyahay.} [Suuradda Al-anbiyaa aayadda 107]

ilaahay wuxuu usheegay nabigiisa muxamed inuu ilaahay yahay dambidhaafe naxariiste ilaahay wuxuu yiri:

﴿۞ نَبِّئۡ عِبَادِيٓ أَنِّيٓ أَنَا ٱلۡغَفُورُ ٱلرَّحِيمُ ٤٩﴾[الحجر: 49]

{ U warran addomadayda inaan anugu Dambi dhaafe Naxariista ahay} [suuradda alxijri aayadda: 49 ]

naxariistiisa waxaa kamida inuu feedo dhibka khayrkana soo dejiyo ilaahay wuxuu yir:

﴿ وَإِن يَمۡسَسۡكَ ٱللَّهُ بِضُرّٖ فَلَا كَاشِفَ لَهُۥٓ إِلَّا هُوَۖ وَإِن يُرِدۡكَ بِخَيۡرٖ فَلَا رَآدَّ لِفَضۡلِهِۦۚ يُصِيبُ بِهِۦ مَن يَشَآءُ مِنۡ عِبَادِهِۦۚ وَهُوَ ٱلۡغَفُورُ ٱلرَّحِيمُ ١٠٧﴾[يونس: 107]

{ Hadduu Alle ku taabsiiyo dhibaato, ma jirto cid kaa feydi kartaa aan Isaga ahayn; hadduu kula doono khayrna ma jirto cid celin karta Fadlgiisa

uu siiyo midkuu doono oo ka mid ah addoomahiisa, waana Denbi Dhaaf Badanaha, Naxariista Badan.} [suurada Yoonis, aayadda: 107]

**12. Ilaahay isaga ayaa ah Rabbiga Naxariista leh, kellidii ayaa ah xisaabiyaha uunkiisa(inta uu abuuray) maalinta qiyaame, aminta laga soo saaro qabuurahooda, ruux walba waxaa laga abaalmarin wuxuu fallay khayr ama shar, ruuxa camal wanaagsan fallay isagoo Mu'min ah, wuxuu leeyahay nimcooyin joogta ah, ruuxiise gaalooba, oo camal xun sameeya, wuxuu leeyahay cadaab daran aakhiro.**

ilaahay isaga ayaa ah xisaabiyaha adoomadiisa qiyaame qof walba waxaa laga abaalmarin wuxuu sameeyay khayr ama shar, muminka wuxuu gali jano gaalkana xumaanta sameeyay cadaab wayn qiyaamaha ilaahay xikmadiisa waxaa kamida inuu aduunka kadhigay meel lugu camal falo aakhirana meel lasku abaalmariyo, dadka qaarkood waxay latahay wax fog laakin adila badan ayaa sheegtay inuu yahay soocelinta dadka xaq aan shaki lahayn ilaahay wuxuu yiri:

﴿وَمِنۡ ءَايَٰتِهِۦٓ أَنَّكَ تَرَى ٱلۡأَرۡضَ خَٰشِعَةٗ فَإِذَآ أَنزَلۡنَا عَلَيۡهَا ٱلۡمَآءَ ٱهۡتَزَّتۡ وَرَبَتۡۚ إِنَّ ٱلَّذِيٓ أَحۡيَاهَا لَمُحۡيِ
ٱلۡمَوۡتَىٰٓۚ إِنَّهُۥ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٌ ٣٩﴾[فصلت: 39]

{ Aayaadka Eebe waxaa ka mid ah inaad aragtidDhulkoo dulleysan (abaar ah) markaan ku soo dajinno Biyaha uu gilgisho soona kor noqdo, midka nooleeyey wuxuu nooleyn wixii dhintay wax walbana wuu karaa.} [suurada fusilat aayada: 39 ]

Allah koreeyae waxa uu yiri:

﴿يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِن كُنتُمۡ فِي رَيۡبٖ مِّنَ ٱلۡبَعۡثِ فَإِنَّا خَلَقۡنَٰكُم مِّن تُرَابٖ ثُمَّ مِن نُّطۡفَةٖ ثُمَّ مِنۡ عَلَقَةٖ ثُمَّ
مِن مُّضۡغَةٖ مُّخَلَّقَةٖ وَغَيۡرِ مُخَلَّقَةٖ لِّنُبَيِّنَ لَكُمۡۚ وَنُقِرُّ فِي ٱلۡأَرۡحَامِ مَا نَشَآءُ إِلَىٰٓ أَجَلٖ مُّسَمّٗى ثُمَّ نُخۡرِجُكُمۡ طِفۡلٗا ثُمَّ
{ Miyeyna Fiirfiirinayn Quraanka, hadduu ka yimid Eebe Agtiisa Meelaan ahayn waxay ka heli lahaayeen dhexdiisa is khilaaf badan.} [suurada al-nisaa : 82 ].

qur,aanku waa mid qoran ahna kitaab wayn, mucjiz ah oo ay wacantahay in la aqriyo ama ladhegaysto, ama macnihiisa la aqriyo sida sunada nabiga iyo tacaaliimteeda, siiradeeda loo xafiday loona sooguuriyay qaab wariyayaal isdabajooga ah oo lugu kalsoonyahay waxayna ku qorantahay lugada carabiga oo nabigu ku sheekeeyay loona tarjumay luqada faradan, quraanka iyo sunadu waa masdarka kaliya ee laga qaato iyo sharciyada islaamka lagamaqaato dadka hab dhaqankooda oo islaam unisba sheegta ee waxaa laga qaataa waxyiga alle ee ilaashan waana qur,aanka iyo sunada nabiga, ilaahay wuxuu ka yiri arinka quraanka :

﴿إِنَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بِٱلذِّكۡرِ لَمَّا جَآءَهُمۡۖ وَإِنَّهُۥ لَكِتَٰبٌ عَزِيزٞ ٤١ لَّا يَأۡتِيهِ ٱلۡبَٰطِلُ مِنۢ بَيۡنِ يَدَيۡهِ وَلَا مِنۡ خَلۡفِهِۦۖ تَنزِيلٞ مِّنۡ حَكِيمٍ حَمِيدٖ ٤٢﴾[فصلت: 41-42]

{ Kuwa ka gaaloobay Quraanka markuu u yimid (waa la abaal marin) waana Kitaab qaali ah.} [suurada fusilat: 41-42 ]

ilaahay arinka sunada nabiga inay waxyi ilaahay tahay wuxuu ka yiri:

﴿...وَمَآ ءَاتَىٰكُمُ ٱلرَّسُولُ فَخُذُوهُ وَمَا نَهَىٰكُمۡ عَنۡهُ فَٱنتَهُواْۚ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَۖ إِنَّ ٱللَّهَ شَدِيدُ ٱلۡعِقَابِ ٧﴾[الحشر: 7]

{ Wixii Xoola aha ee Ilaahay ku soo celiyo ee uga yimaadda Degmooyinka Yuhuudda Rasuulkiisa; waxaa leh Ilaahay, Rasuulka, Qaraabada, Agoonta, Masaakiinta iyo Musaafiriinta «socdaalka» si ayan u noqon wax ku wareegaysta kuwa Hodanka ah dhexdooda wuxuu Rasuulku dadka siiyo ama faro waa inay qaataan, wuxuu ka reebana waa inay ka reebmaan, Eebana waa in laga dhawrsado, maxaa yeelay Ciqaabtiisu waa darantahay.} suurada al xashar aayada: 7 ]

## 29. islaamku wuxuu amrayaa in labada waalid loo ixsaan sameeyo haba ahaadeen kuwaan muslim ahayn waxaana lafaray waalidiinta inay udardaarmaan caruurtooda.

islaamku wuxuu amrayaa in loo ixsaan sameeyo labada waalid ilaahayna wuxuu yiri:

﴿۞ وَقَضَىٰ رَبُّكَ أَلَّا تَعْبُدُوا إِلَّا إِيَّاهُ وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا ۚ إِمَّا يَبْلُغَنَّ عِندَكَ الْكِبَرَ أَحَدُهُمَا أَوْ كِلَاهُمَا فَلَا تَقُل لَّهُمَا أُفٍّ وَلَا تَنْهَرْهُمَا وَقُل لَّهُمَا قَوْلًا كَرِيمًا ٢٣﴾[الإسراء: 23]

{ Wuxuu Faray Eebahaa inaydaan Caabudin isaga mooyee iyo inaad u samo fashaan Labadii Waalid Samo falid, hadduu ku gaadho Agtaada wayni midkood ama Labaduba ha ku Dhihin uf, hana Canaanan una dheh hadal Fiican.} [suurada al-israa: 23 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وَوَصَّيْنَا الْإِنسَانَ بِوَالِدَيْهِ حَمَلَتْهُ أُمُّهُ وَهْنًا عَلَىٰ وَهْنٍ وَفِصَالُهُ فِي عَامَيْنِ أَنِ اشْكُرْ لِي وَلِوَالِدَيْكَ إِلَيَّ الْمَصِيرُ ﴿١٤﴾﴾[لقمان: 14]

{ waxaan u dardaaranay dadka labadiisii Waalid, way sidday Hooyadis iyadoo tabaryar tabar yari kalana ku sugan, Gudhidiisuna waa Labo sano ee ku mahadi ani iyo Labadaadii Waalid, xagaygaana loo ahaan.} [suurada luqmaan : 14 ].

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وَوَصَّيْنَا الْإِنسَانَ بِوَالِدَيْهِ إِحْسَانًا ۖ حَمَلَتْهُ أُمُّهُ كُرْهًا وَوَضَعَتْهُ كُرْهًا ۖ وَحَمْلُهُ وَفِصَالُهُ ثَلَاثُونَ شَهْرًا ۚ حَتَّىٰ إِذَا بَلَغَ أَشُدَّهُ وَبَلَغَ أَرْبَعِينَ سَنَةً قَالَ رَبِّ أَوْزِعْنِي أَنْ أَشْكُرَ نِعْمَتَكَ الَّتِي أَنْعَمْتَ عَلَيَّ وَعَلَىٰ وَالِدَيَّ وَأَنْ أَعْمَلَ صَالِحًا تَرْضَاهُ وَأَصْلِحْ لِي فِي ذُرِّيَّتِي ۖ إِنِّي تُبْتُ إِلَيْكَ وَإِنِّي مِنَ الْمُسْلِمِينَ ﴿١٥﴾﴾[الأحقاف: 15]

{ Dadka waxaan u dardaarannay labadiisii Waalid inuu u wanaag falo, Hooyadiis uurkay ku sidday iyadoo dhibban wayna dhashay iyadoo dhibban, uurkiisa iyo gudhintiisuna waa Soddon bilood, markuu ilmihii tabar yeesho oo Afartan gaadho yuu (kan fiican) dhahaa eebow igu toosi inaan kugu mahadiyo nicmadaada aad iigu nicmaysay Aniga iyo waaliddiintay, iguna toosi inaan camal fiican ood ka raalli tahay falo, iina wanaaji faracayga, waaba kuu toobadkeenaye, waxaana ka mid ahay muslimiinta }. [suurada al-axqaaf: 15 ]

abii hurayra waxaa laga wariyey inuu yiri: nin baa uyimid rasuulka scw kuna yiri: rasuulka alaw yaa ugu haboon inaan lasaaxiibo? wuxuu ku yiri hooyadaa, dibadeedna? hooyadaa dibadeedna? waa hooyadaa dibadeedna aabahaa ayaakuxiga waa markii afaraad. Saxiix Muslim Dardaaran waalidka la isku dardaaray waa mid ay u siman yihiin waalidku muslimiin ama gaalo ha ahaadaane. asmaa waxaa laga wariyey inay tiri:waxaa isoo booqday hooyaday oo gaala ahoo wadata wiilkeeda waqtigii ay balanta kala galeen nabiga scw iyo quraysh nabiga ayaan waydiiyay inay hooyadey ii timid ayadoo idoonaysa ee ma xiriiriyaa? wuxuu yiri nabigi haa xiriiri hooyadaa. Saxiix Albukhaari haday labada waalid isku dayaan oo ay kudadaalaan inay wiilka gaalaysiiyaan wuxuu islaamka farayaa wiilka inuu u ixsaan sameeyo mana kuadeecayo

gaalnimadaa wuxuuna iska ahaan mu,min macruufkoodana wuu daaimi ilaahay wuxuu yiri:

﴿وَإِن جَٰهَدَاكَ عَلَىٰٓ أَن تُشۡرِكَ بِي مَا لَيۡسَ لَكَ بِهِۦ عِلۡمٞ فَلَا تُطِعۡهُمَاۖ وَصَاحِبۡهُمَا فِي ٱلدُّنۡيَا مَعۡرُوفٗاۖ وَٱتَّبِعۡ سَبِيلَ مَنۡ أَنَابَ إِلَيَّۚ ثُمَّ إِلَيَّ مَرۡجِعُكُمۡ فَأُنَبِّئُكُم بِمَا كُنتُمۡ تَعۡمَلُونَ ١٥﴾[لقمان: 15]

{ hadday kugula dadaalaan (Labada waalid) inaad ii shariig yeesho (ila wadaajiso) waxaadan aqoon u lahayn ha ku adeecin kulana noolow adduunka si fiican, raacna Jidka kuwa ii noqda, xagayga yaa laydiin soo celin waxaana idiinka warami waxaad camalfali jirteen.} [suurada luqmaan : 15 ]

islaamku ma udiidayo qofka muslimka ah inuu u ixsaan sameeyo qaraabadiisa gaalada ah hadaysan ahayn kuwa la dagaalamaya ilaahay wuxuu yiri:

﴿لَّا يَنْهَاكُمُ اللَّهُ عَنِ الَّذِينَ لَمْ يُقَاتِلُوكُمْ فِي الدِّينِ وَلَمْ يُخْرِجُوكُم مِّن دِيَارِكُمْ أَن تَبَرُّوهُمْ وَتُقْسِطُوا إِلَيْهِمْ ۚ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ ٨﴾[الممتحنة: 8]

{ Eebe kama reebayo kuwa xaqa rumeeyey inay u samo iyo Caddaalad falaan kuwa aan Diinta kula dagaallamin Guryahoodana ka bixinin, maxaa yeelay Eebe waa jecel yahay kuwa Caadiliinta ah (Garsoor)} [suurada al-mumtaxanah: 8 ]

islaamku wuxuu amrayaa waalidka inay u dardaarmaan Ubadkooda, waxaana ugu wayn inuu barro xuquuqda ilaahay uu ku leeyahay korkooda, sida uu Nabiga -calayhi salaatu wasalaam- uu ku yiri ina adeerkiis cabdilaahi ibnu cabaas- Allaha ka raali noqdo isaga iyo aabihiibee: (Wiilow miyaanan kubareen oraahyo uu ilaahay kugu anfaco?, waxaan ku idhi buu yidh: haa, wuxuu yiri: "waa inaad xafidaa ilaahay isna wuu ku xafidi hortaadana waad ka heli, oo garo oo xasuusnaw ilaahay waqtiga bawaaqada isna wuxuu kuu gargaari waqtiga dhibkaaga, oo hadii aad cid wax waydiisanayso ilaahay waydiiso kalligii, hadii aad kaalmo waydiisanayso ilaahay kaliya waydiiso". waxaa wariyay axmed 4/ 287 labada waalid waxaa lafaray inay caruurtooda baraan waxa u anfacaya xaga diintooda iyo aduunyadooda ba, ilaahayna wuxuu yiri- isagoo midaas ka waramaya:

﴿يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ قُوٓاْ أَنفُسَكُمۡ وَأَهۡلِيكُمۡ نَارٗا وَقُودُهَا ٱلنَّاسُ وَٱلۡحِجَارَةُ عَلَيۡهَا مَلَٰٓئِكَةٌ غِلَاظٞ شِدَادٞ لَّا يَعۡصُونَ ٱللَّهَ مَآ أَمَرَهُمۡ وَيَفۡعَلُونَ مَا يُؤۡمَرُونَ٦﴾[التحريم: 6]

{ Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawra Naftiina iyo ehelkiinna naar lagu shido dad iyo dhagax ay kana (shaqeeyaan) malaa'ig adag oo daran oon Eebe ku caasiyeyn wuxuu faro, falana wixii la amru} [suurada al-taxriim, aayada: 6

waxaa laga wariyey Cali binu abii Daalib -Allaha ka raali noqdee: markuu sharxayay hadalka ilaahay: (ka badbaadiya Naftiina iyo ehelkiinna Naar) inuu yiri: edbiya waxna bara. lNabigu -sallallaahu calayhi wasalam- wuu amray labadda waalid: inay ilmihooga baraan salaadda inta ay yaryihiin, si uu ulla qabsaddo oo uu ku barbaaro, wuxuuna yidhi: (Fara ubadkiina Salaada iyagoo Toddobo jir ah) waxa wariyay Abuu daa'uud Rasuulka Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi; (Dhamaantiin waxaad tihiin kuwa masuul ah imaamka waa masuul waana lawaydiin arinkaa ninku wuxuu masuul kayahay ehelkiisa waana lawaydiin, hawaynayda masuul bay katahay guriga ninkeeda waana laga waydiin, khaadimku wuxuu masuul kayahay xoolaha sayidkiisa waana lawaydiin, dhamaan dadku waa ilaaliye waana laga su,aaliwaxa ay ilaaliye kayihiin. saxiixu ibnu xibbaan 4490

islaamku wuxuu amrayaa waalidka(aabaha) inuu nafaqeeyo(quudiyo) ubadkisa iyo ehelka gurigiisa Hore ayaan arimahaas ugu soo xusnay kitaabakan faqradiisa (18)aad, halkaas oo uu Nabigu -sallallaahu calayhi wasalam- oo caddaynaya fadliga ay leedahay quudinta ubadku wuxuuna yiri: Diinaarka ugu fadliga badan inuu ninku bixiyo: waa diinaar uu kubixiyo ciyaalkiisa iyo diinaar uu kubixiyo daabadiisa ee jihaadka kujirta iyo diinaar uu kubixiyo asxaabtiisa ee jihaadka. saxiixu muslim 994

## 30. islaamku wuxuu amrayaa in cadaalad loosameeyo hadalka iyo camalka xataa kuwa colka la, ah.

ilaahay wuxuu kusifeesanyahay caadilnimo iyo garsoor afcaashiisa iyo maamulkiisa adoomadiisa dhaxdooda ilaahay wixii uu amray ama uu reebay

iyo wuxuu abuuray ama uu qadaray wuxuu ku wadaa dariiq toosan ilaahay wuxuu yiri:

﴿ شَهِدَ اللَّهُ أَنَّهُ لَا إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ وَالْمَلَائِكَةُ وَأُولُو الْعِلْمِ قَائِمًا بِالْقِسْطِ ۚ لَا إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ ﴿١٨﴾﴾[آل عمران: 18]

{ Eebe wuxuu Qirayaa inaan Eebe mooyee Ilaah kale jirin(oo xaq lagu caabudo), Malaa'igtuna (way qiri) iyo kuwa Cilmiga leh, U qumana Cadaalad, Eebe kale ma jiro(oo xaq lagu caabudo) isaga mooyee waana adkaade Falsan..} [suurada al-cimraan: 18 ]

ilaahay wuxuu amray cadaalad in lasameeyo ilaahay wuxuu yiri:

﴿قُلْ أَمَرَ رَبِّي بِٱلْقِسْطِ ۖ... ﴿٢٩﴾﴾[الأعراف: 29]

{ Waxaad Dhahdaa wuxuu faraa Eebe Cadaaladda iyo inaad u Jeedisaan Wajigiinna (Xagiisa) Masaajidkasta Agtiisa, baryana idinkoo u kaliyeeli Diinta siduu idinku Billaabay Yaad ku soo Noqonaysaan} [suurada al-acraaf: 29 ]

rususha iyo anbiyada dhamaan waxay layimaadeen garsoor ilaahay wuxuu yiri:

﴿ لَقَدْ أَرْسَلْنَا رُسُلَنَا بِالْبَيِّنَاتِ وَأَنزَلْنَا مَعَهُمُ الْكِتَابَ وَالْمِيزَانَ لِيَقُومَ النَّاسُ بِالْقِسْطِ...﴾[الحديد: 25]

{ Dhab ahaan baan ula dirray Rasuulladannadii xujooyin, waxaana u soo dajinnay Kutub iyo Caddaalad, si dadku ugu tooso Caddaalad, waxaana soo dajinnay birta iyadoo Shiddo ku dheehantahay iyo nacfi dadka iyo in Eebe muujiyo Cidda u gargaari isaga (Diinta) iyo Rasuulladiisa iyagoon arkaynin, Eebana waa Xoog badane Adkaade ah.} [suurada al-xadiid: 25 ]

miisaanku waa in cadaalad lugu sameeyo hadalada iyo afcficilad. islaamku wuxuu amrayaa in cadaalad loosameeyo hadalka iyo camalka xataakuwa colka la, ah muslimiinta ilaah wuxuu yiri:

﴿۞يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُونُوا قَوَّامِينَ بِالْقِسْطِ شُهَدَاءَ لِلَّهِ وَلَوْ عَلَىٰ أَنفُسِكُمْ أَوِ الْوَالِدَيْنِ وَالْأَقْرَبِينَ ۚ إِن يَكُنْ غَنِيًّا أَوْ فَقِيرًا فَاللَّهُ أَوْلَىٰ بِهِمَا ۖ فَلَا تَتَّبِعُوا الْهَوَىٰ أَن تَعْدِلُوا ۚ وَإِن تَلْوُوا أَوْ تُعْرِضُوا فَإِنَّ اللَّهَ كَانَ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرًا﴿١٣٥﴾﴾[النساء: 135]

{ kuwa (Xaqa) rumeeyow noqda kuwo u istaaaga Caddaalad oo ah marag Eebe, naftiinnaba ha ahaato ama Waalidkiin ama qaraabo, hadday hodan yihiin ama faqiir Eebaa u mudnaansho badan ee ha ka raacina hawada inaad Caddaalo fashaan, haddaadse iilataan ama jeedsataan Eebe waxaad camal falaysaan waa ogyahay} []. suurada al-nisaa: 135 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿...وَلَا يَجْرِمَنَّكُمْ شَنَآنُ قَوْمٍ أَن صَدُّوكُمْ عَنِ الْمَسْجِدِ الْحَرَامِ أَن تَعْتَدُوا ۘ وَتَعَاوَنُوا عَلَى الْبِرِّ وَالتَّقْوَىٰ ۖ وَلَا تَعَاوَنُوا عَلَى الْإِثْمِ وَالْعُدْوَانِ ۚ وَاتَّقُوا اللَّهَ ۖ إِنَّ اللَّهَ شَدِيدُ الْعِقَابِ﴿٢﴾﴾[المائدة: 2]

{ Kuwa (xaqa) Rumeeyow ha Banaysanina Calaamooyinka Eebe (waxa reeban) iyo Bisha Xurmaysan iyu Hadyada iyo Midda loo Luqun Xidhay (Hadyada Baydka) iyo kuwa u Qasdi Baydka Xurmaysan, iyagoo Dooni Fadliga Eebahood iyo Raali ahaanshihiisa, Markaad Xalaalowdaanna (Dhamaysaan Xajka iyo Cumrada) Ugaadhsada (hadaad Doontaan) yeyna Idin ku Xambaarin Cadhada Qoom idinka Celiyey Masaajidka Xurmaysan inaad Xad gudubtaan, Isugu kaalmeeya Samaha iyo Dhawrsiga hana Isugu Kaalmaynina Dambi iyo Colnimo, kana Dhawrsada Eebe, Ilaahay way darantahay Ciqaabtiisu.} [suurada al-maaidah: 2 ].

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُونُوا قَوَّامِينَ لِلَّهِ شُهَدَاءَ بِالْقِسْطِ ۖ وَلَا يَجْرِمَنَّكُمْ شَنَآنُ قَوْمٍ عَلَىٰ أَلَّا تَعْدِلُوا ۚ اعْدِلُوا هُوَ أَقْرَبُ لِلتَّقْوَىٰ﴿٨﴾﴾[المائدة: 8]

{ Kuwa (xaqa) Rumeeyow Noqda kuwa Istaaga (u Darban) dar Eebe oo ku marag kaca Caddaalad yeyna idinku Xambaarin Cadhada qoom inaydaan Caddaalad falin, Caddaalad fala iyadaa u dhaw Dhawrsashada (Eebe) kana Dhawrsada ILaahay, Eebe waa Ogyahay waxaad falaysaane.} [suurada al-maaidah: 8 ]

makahelaysaa qawaaniinta umadaha maanta  ay dagsadeen arinkaan oo kale in lasheego marqaati xaq ah iyo run layiraahdo nafsadaada dusheeda iyo labadaada waalid iyo qaraabadaada iyo in cadaalad loo sameeyo xataa cadawgaaga iyo saaxiibkaada Nabiga scw wuxuu amray in cadaalad loo sameeyo caruurtadhaxdooda. caamir waxaa laga wariyayay inuu kamaqlay nucmaan bin bashiir isagoo minbarka saaran inuu yiri: aabahay baa isiiyay

hadiyad waxay tiri camrah bintu rawaaxah: raali kama ihi ilaa aad ulatagto rasuulka ilaahay marqaatina uga dhigto, rasuulka ayuu u yimid wuxuuna ku yiri: wiilkayga ay dhashay camrah bintu rawaaxa ayaan siiyay hadiyad waxayna ifartay inaan kugu marqaatiyeeyo wuxuuna yiri: caruurtaada kale wax masiisay maya ayuu yiri markaasuu nabiga yiri: ilaahay kacabsada ee u cadaalad fala caruurtiina kadibna wuu noqday wuxuuna celiyay hadiyadiisii. saxiixulbukhaari 2587

kaasi wuxuu yahay arinka dadku inuusan hagaagayn  dowladuhuna ay san hagaagayn ilaa cadaalad lahelo aamina manaqonayaan diintooda iyo dhiigooda iyo caruurtooda iyo sharaftooda iyo maalkooda iyo wadankooda ilaa calaad laga helo, sidaa waatuu nabiga scw markii ladhibay muslimiinta uu amray in ay u hijroodaan xabashida wuxuuna sababta kadhigay inuu joogo boqor caadil ah aan agtiisa cidna lagu dulmin.

## 31. islaamku wuxuu amrayaa in ixsaan loo sameeyo dadkoo dhan dhan wuuna uguyeerayaa akhlaaqda iyo acmaasha wanaagsan.

islaamku wuxuu amrayaa in loo ixsaan sameeyo khalqiga oo dhan ilaahayna wuxuu yiri:

﴿۞ إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُ بِالْعَدْلِ وَالْإِحْسَانِ وَإِيتَاءِ ذِى الْقُرْبَىٰ.﴿٩٠﴾﴾[النحل: 90]

{ Eebe wuxuu Fari Caddaalad iyo Samafal iyo Wax siinta qaraabada Wuxuuna reebi Xumaan iyo Munkar iyo Gardarro, Wuuna idin Waanin inaad wax Xasuusataan.} [suurada al-naxli: 90 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿ الَّذِينَ يُنفِقُونَ فِى السَّرَّاءِ وَالضَّرَّاءِ وَالْكَاظِمِينَ الْغَيْظَ وَالْعَافِينَ عَنِ النَّاسِ ۗ وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ ﴿١٣٤﴾﴾[آل عمران: 134]

{ Ee ah kuwa wax bixiya Waqtiga Ladnaanta iyo Dhibkaba, ee Damiya Cadhada ee iska Cafiya Dadka, Eebana waa Jecel yahay Samafalayaasha.} [suurada al-cimraan: 134 ].

Rasuulka Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yiri: Ilaahay wuxuu ku qoray samafalka  wax walba, hadii aad wax dilaysaan si wanaagsan u dila, hadii aad wax gawracaysaana si wanaagsan u gawraca (yaan lagu silcin nafta), qofka wax gawracayana waa in uu middidiisa soofaysto una

raaxeeyo xoolaha uu gawracaayo. saxiixu muslim 1955 islaamku wuxuu ugu yeerayaa dadka akhlaaqda iyo acmaasha wanaagsan, ilaahay wuxuu ku yiri sifada nabiga s.c.w. ee kutubihii hore:

﴿الَّذِينَ يَتَّبِعُونَ الرَّسُولَ النَّبِيَّ الْأُمِّيَّ الَّذِي يَجِدُونَهُ مَكْتُوبًا عِندَهُمْ فِي التَّوْرَاةِ وَالْإِنجِيلِ يَأْمُرُهُم بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَاهُمْ عَنِ الْمُنكَرِ وَيُحِلُّ لَهُمُ الطَّيِّبَاتِ وَيُحَرِّمُ عَلَيْهِمُ الْخَبَائِثَ وَيَضَعُ عَنْهُمْ إِصْرَهُمْ وَالْأَغْلَالَ الَّتِي كَانَتْ عَلَيْهِمْ ۚ فَالَّذِينَ آمَنُوا بِهِ وَعَزَّرُوهُ وَنَصَرُوهُ وَاتَّبَعُوا النُّورَ الَّذِي أُنزِلَ مَعَهُ ۙ أُولَٰئِكَ هُمُ الْمُفْلِحُونَ﴿١٥٧﴾﴾[الأعراف: 157]

{ ee ah kuwa Raaca Rasuulka Nabiga ah ec Umiga ah ee ah kay ka heleyeen Isagoo ku qoran agtooda Tawreed iyo Injiil Farana wanaagga kana reeba Xumaanta una Baneeya Wanaagga (Xalaasha) kana Xarrima Xumaanta (Xaaraanta) kana dejiya Culayskii iyo Xadhkihii korkooda ahaa, kuwa Rumeeyey Nabigaas oo Qaddariyey oo u Gargaaray oo Raacay Nuurka lagu soo Dejiyey kuwaasu waa uun kuwa Liibaanay.} [suurada al-acraaf: 157 ]

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: caaishay ilaahay waa dhimriye turis badan wuuna jecelyahay turista wuxuuna kusiiyaa turista wuxuusan kusiin wixii kasoo haray, saxiixu muslim 2593

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yiri: ilaahay wuxuu ka xarimay dushiina ku caasinta hooyada, aasitaanka gabdhaha iyagoo nool, diidmo iyo isii, wuxuuna idiin nacay waxaasaa layiri, ama wuu yiri suaasha oo labadiyo, iyo maalka oo la dayaco. saxiixulbukhaari 2408

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: janada gali maysaan ilaa aad rumaysaan, mana rumaynaysaan ilaad aad isjeclaataan, ma idiin sheegaa wax hadaad samaysaan aad isjeclaanaysiin? ku faafiya salaanta dhexdiina. saxiixu muslim 54

**32. islaamku wuxuu farayaa dabeecada la mahdiyo sida runta, amaanada oo laguto, dhowrsanaan,xishood, geesinimo, deeqsinimo. qofka ubaahan kaalmo oo lakaalmeeyo, qof gaajo hayso oo laquudiyo, daris wanaagnimo, qaraabada oo lixiiriyo, xawayaanka oo loo naxariisto.**

islaamku wuxuu farayaa dabeecada la mahdiyo rasuulku scw wuxuu yiri: waxaa la iisoodiray saan u dhamaystiro dabeecadaha wanaagsan saxiix al adab almufrad 207

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: kaan ugu jeclahay dadka iina dhaw maalinta qiyaame waa kan idinku dabecada wanaagsan, kan aan ugu necebahay dadka igana fog fadhi ahaan maalinta qiyaame waa kan hadalka badan, aftahan iska doon doon, iyo iskibriye. alsilsilah alsaxiixah 791

waxaa laga wariyay cabdilaahi bin camri inuu yiri: nabiga scw ma ahayn mid af xun oo akhlaaq daran, wuxuuna nabigu oran jiran: kiina ugu akhyaarsan waa kan idinku dabeecad wacan. saxiixulbukhaari 3559

iyo intaa waxaan ahayn oo ah aayaadkii iyo axaadiistii tusinaysay in islaamku ku boorinhaya akhlaaqda wanaagsan iyo acmaasha wanaagsan si guud. islaamku waxyaabaha uu farayo waxaa kamida runta rasuulkuna scw wuxuu yiri: runta laazima waayo waxay ku hanuunin samafal samafalkuna janada ninku kama suulayo inuu run sheegayo uu ku dadaalayo runta ilaa looga qoro ilaahay agtiisa runloow. saxiixu muslim 2607

islaamku waxyaabaha uu farayo waxaa kamida Amaana oo laguto ilaahayna wuxuu yiri :

﴿إِنَّ اللَّهَ يَأْمُرُكُمْ أَن تُؤَدُّوا الْأَمَانَاتِ إِلَىٰ أَهْلِهَا...﴿٥٨﴾﴾[النساء: 58]

{ Eebe wuxuu idin Fari inaad u Gudaan (siisaan) Amaanada Ehelkeeda, (Ciddeeda) haddaad kala Xukumaysaan Dadkana inaad ku kala Xukuntaan Caddaalad, Eebe waxaa Wanaagsan wuu idinku waanin Eebana waa Maqle Arka} [Suuradda An-nisaa: 58 ]

islaamku waxyaabaha uu farayo waxaa kamida dhawrsanaan iyo xaaraan kadhowrsi rasuulku scw wuxuu yiri: sadex ruux ilaahay bay kuleeyihiin inuu ukaalmeeyo waxaa kamida mid doonaya guur si uu dhowrsado. sunan At-tirmidi 1655

ducooyinkii nabiga scw waxaa kamida inuu oranjiray: ilaahayow waxaan kuwaydiisanayaa hanuun, alle kacabsi, dhowrsanaan hodantimo. saxiixu muslim 2721

islaamku waxyaabaha uu farayo waxaa kamida xishoodka rasuulku scw wuxuu yiri: xishoodku waxaan khayr ahayn makeeno. saxiixu Albukhaari Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: diinkaste waxuu leeyahay akhlaaq,islaamka akhlaaqdiisuna waa xishood. waxaa soo saaray albayhaqi kitaabkiisi shucabul iimaan 6/ 2619

islaamku waxyaabaha uu farayo waxaa kamida geesinimada anas wuxuu rasuulk kawariyay scw inuu yiri: nabigu waxaa ahaa midka dadka ugu wanaagsan dadkana ugu geesisan uguna deeqsi badan, ehlu madiina ayaa argagaxay maalin waxaana ugu horeeyay oo faras fuulay nabiga. saxiixu Albukhaari.

rasuulku wuxuu ahaa mid magangala ilaahay fulanimada wuxuuna oranjiray: Ilaahow waxan kaa magan galay fulinimada. saxiix Albukhaari 6374. islaamku waxyaabaha uu farayo waxaa kamida wax bixinta iyo deeqsinimada ilaahay wuxuu yiri:

﴿مَّثَلُ الَّذِينَ يُنفِقُونَ أَمْوَالَهُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ كَمَثَلِ حَبَّةٍ أَنبَتَتْ سَبْعَ سَنَابِلَ فِي كُلِّ سُنبُلَةٍ مِّائَةُ حَبَّةٍ ۗ وَاللَّهُ يُضَاعِفُ لِمَن يَشَاءُ ۗ وَاللَّهُ وَاسِعٌ عَلِيمٌ ﴿٢٦١﴾﴾[البقرة: 261]

{ kiiwa ku bixiya Xoolahooda Jidka alleEebe waxay la midyihiin Xabbad (Masago ah) oo bixisay Todobo Sabuul, Sabuul kastanawalbana bixiyey Boqol xabbo, alleEebe waa u Laab laabaa (AjarkaAjirka) Cidduu doono allenaEebana waa Deeq badane og. (261).} [Suuradda Albaqara, aayada: 261 ].

dabeecada nabiga scw wuxuu ahaa deeqsinimo, ibnu cabaas waxaa laga wariyay inuu yiri: nabigu wuxuu ahaa midka ugudeeqsiga badan qeyrka waxuuna ahaa marka uu ugu deeqsi badan yahay ramadaanka markuu

lakulmi jiray jibriil waana habeen kaste ilaa uu dhamaado ramaan nabiguna wuxuu ubandhgi jiray quraanka jibriil markuu lakulmana wuxuu ahaa mid kadeeqsinama badan dabeesha lasoodiray saxiixu Albukhaari

Islaamku waxyaabaha uu farayo waxaa kamida ruuxa u baahan kaalmo oo la kaalmeeyo, midka gaajo hayso oo laquudiyo, dariska oo loo wanaag sameeyo, qaraabada oo laxariiryo, xawayaanka oo loo naxariisto. Cabdilahi bin camri- Allaha ka raali noqdo isaga iyo aabihiiba- waxaa laga wariyay: inuu nin waydiiyay Rasuulka -sallallaahu calayhi wasalam- Maxaa islaamka ugu khayr badan? wuxuu yiri: (Quudinta(midka baahan), in aad salaantid cida aad garanayso iyo cid aadan garanayninba). Saxii Albukhaari

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: waqti uu nin soconayay wadada waxaa qabsaday haraad wuxuu helay ceel wuuna kudagay waana uu soocebey biyihii wuuna soobaxay, waqtigaas wuxuu arkay ey carabka soosaaray isagoo cunaya carada oon dartii wuxuuna yiri ninkii aygaan waxaa gaaray haraadkii ihayay waxyar kahor, ceelkii buu galay wuuna soobuuxiyay khufkiisii afkuuna kusooqabtay wuxuuna waraabiyay aygii ilaahayna wuu kushukriyay wuuna udanbidhaafay, waxay saxaabadii yiraahdeen rasuulka allow ajer miyaan kuleenahay xawayaanka? wuxuuku yiri: haa waxwalba oo beer qoyan leh ajar bay leedahay. saxiixu ibnu Xibbaan 544

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: qofkii usocda dumarka garoobaha ah (ragla,aanta ah) iyo masaakiinta wuxuu lamid yahay mujaahid wadada ilaahay, kuwa habeenka u istaaga salaatu layl soomana maalintii. saxiix Allbukhaari 5353

islaamku wuxuu adkeen xuquuqda raximka wuuna waajibinayaa xariirinta raximka ilaahay wuxuu yiri:

﴿النَّبِيُّ أَوْلَىٰ بِالْمُؤْمِنِينَ مِنْ أَنفُسِهِمْ ۖ وَأَزْوَاجُهُ أُمَّهَاتُهُمْ ۗ وَأُولُو الْأَرْحَامِ بَعْضُهُمْ أَوْلَىٰ بِبَعْضٍ فِي كِتَابِ اللَّهِ مِنَ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُهَاجِرِينَ إِلَّا أَن تَفْعَلُوا إِلَىٰ أَوْلِيَائِكُم مَّعْرُوفًا ۚ كَانَ ذَٰلِكَ فِي الْكِتَابِ مَسْطُورًا {

٦﴾[الأحزاب: 6]

{ Nabigaa uga Roon (Turid badan) Mu'miniinta Naftooda, haweenkiisuna waa Hooyooyinkood, Qaraabaduna iyagaa qarkood qaarka kale kaga Mudan Kitaabka Eebe, Mu'miniinta (kale) iyo Muhaajiriinta, inaad wanaag u fashaan gargaarayaashiina mooyee, Xukunkaasna wuxuu ku Qoran yahay Kitaabka} [suurada al-axzaab: 6 ]

wuxuu kadigay in lagooyo qaraabada wuxuu la xiriiriyay fasaadka dhulka ilaahay wuxuu yiri:

﴿فَهَلْ عَسَيْتُمْ إِن تَوَلَّيْتُمْ أَن تُفْسِدُوا فِي الْأَرْضِ وَتُقَطِّعُوا أَرْحَامَكُمْ ﴿٢٢﴾ أُولَٰئِكَ الَّذِينَ لَعَنَهُمُ اللَّهُ فَأَصَمَّهُمْ وَأَعْمَىٰ أَبْصَارَهُمْ ﴿٢٣﴾﴾ [محمد: 22-23]

{Ma laga yaabaa haddaad jeedsataan, inaad fasahaadisaan arlada, oo goysaan qaraabadiinna}. {Kuwaasi weeye kuwa uu Ilaahay nacladay, oo dhago tiray oo indho tiray.} [Suuradda Muxammed, aayadaha: 22-23 ]

Raasuulku wuxuu yiri-sallalalahu calayhi wasalam- Janadu ma gallo Qarraabo goysku) saxiixu muslim 2556 Qaraabada ay tahay waajib in laxariiriyo waa: labadda waalid, walaalaha(rag iyo haweenba), adeeradda, eddooyinka, abtiyaasha, habaryaraha. Islaamku wuxuu adkyenayaa xuquuqda dariska, haba ahaado mid aan muslim ahayne, Ilaahay wuxuu yiri:

﴿۞وَاعْبُدُوا اللَّهَ وَلَا تُشْرِكُوا بِهِ شَيْئًا ۖ وَبِالْوَالِدَيْنِ إِحْسَانًا وَبِذِي الْقُرْبَىٰ وَالْيَتَامَىٰ وَالْمَسَاكِينِ وَالْجَارِ ذِي الْقُرْبَىٰ وَالْجَارِ الْجُنُبِ وَالصَّاحِبِ بِالْجَنبِ وَابْنِ السَّبِيلِ وَمَا مَلَكَتْ أَيْمَانُكُمْ ۗ إِنَّ اللَّهَ لَا يُحِبُّ مَن كَانَ مُخْتَالًا فَخُورًا ﴿٣٦﴾﴾ [النساء: 36]

{ Caabuda Eebe hana la Wadaajinina waxba, Labada Waalidna u Wanaag fala, iyo Qaraabada, Agoonta, Masaakiinta, Dariska dhaw, Dariska Durugsan, Saaxiibka Dhinaca, Socotada iyo waxay hanatay Gacmihiinnu, Eebana ma Jecla Cidda Kibirka badan ee Faanka badan.} [Suuradda An-nisaa, aayada: 36 ].

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yiri (Kama taggin Mallaku Jibriil inuu ii dardarmayo xaqa dariska, jeeroo aan u maleeyey inuu is dhaxalsiinayo). Saxiix Abii daawuud 5152

.

## 33. Islaamku wuxuu xalaaleeyay waxyaabaha wanaagsan oo ah wax lacuno ama lacabo, wuxuna amray in ladaahiriyo qalbiga, jirka, guriga sidaas darteedna wuxuu baneeyay guurka sida uu ufaray anbiyada arinkaas waxayna ayana dadka farayaan wax walba oo wanaagsan.

slaamku wuxuu xalaaleeyay waxyaabaha wanaagsan oo ah wax lacuno ama lacabo rasuulku scw wuxuu yiri: llaahay wuxuu yiri: dadaw sidaad udhantihiin ilaahay waa wanaagsan Yahay mana aqbalo wax aan wanaagsaneyn, Ilaahayna wuxuu faray mu'miniinta, wixii uu faray Rususha allana wuxuuyiri: "Rusuleey cuna raashinka kiisa xalaasha ah ee fiican, camal fiicanna fala waxaad samaynaysaan waan ogsoonahay", ilaahay wuxuu yiri: "Mu'miniineey Cuna midka fiican ee aan idinku arsaaqnay kuna shukriya ilaahay hadii aad tihiin kuwa caabuda asaga."

Markaasuu xusay nin meel dheer u socdaalaya oo tima basaasan, boorleh, oo gacmaha kor u taagaya, isagoo llaahay baryaaya oo leh: Rabbigeeyow, Rabbigeeyow, isla markaana cuntadiisa, cabiddiisa, dharkiisa xaaraan yahay, xaaraan la soo quudiyay sidee looga aqbalayaa ducadiisa? saxiix Muslim 1015 Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿قُلْ مَنْ حَرَّمَ زِينَةَ اللَّهِ الَّتِي أَخْرَجَ لِعِبَادِهِ وَالطَّيِّبَاتِ مِنَ الرِّزْقِ ۚ قُلْ هِيَ لِلَّذِينَ آمَنُوا فِي الْحَيَاةِ الدُّنْيَا خَالِصَةً يَوْمَ الْقِيَامَةِ ۗ كَذَٰلِكَ نُفَصِّلُ الْآيَاتِ لِقَوْمٍ يَعْلَمُونَ﴿٣٢﴾﴾[الأعراف: 32]

{" Waxaadna Dhahdaa yaa Reebay Quruxdii Eebe u soo Bixiyey Addoomadiisa, iyo Wanaagga Rizqiga ag, waxaad Dhahdaa waxaa iska leh kuwa Rumeeyey Nolosha Adduunyo Dhexdeeda, Gaarna u tahay Maalinta Qiyaame, saasaana ugu Caddaynay Aayaadkanaga Ciddii wax Og } [suurada al-acraaf: 32 ]

wuxuna amray islaamku in ladaahiriyo qalbiga, jirka, guriga sidaasi daraadeed alle wuxuu baneeyay guurka sida oow ufaray anbiyada iyo rususha wuu amray waxayna dadka farayaan wax walba oo wanaagsan ilaahay wuxuu yiri:

﴿وَاللَّهُ جَعَلَ لَكُمْ مِنْ أَنْفُسِكُمْ أَزْوَاجًا وَجَعَلَ لَكُمْ مِنْ أَزْوَاجِكُمْ بَنِينَ وَحَفَدَةً وَرَزَقَكُمْ مِنَ الطَّيِّبَاتِ أَفَبِالْبَاطِلِ يُؤْمِنُونَ وَبِنِعْمَتِ اللَّهِ هُمْ يَكْفُرُونَ﴿٧٢﴾﴾[النحل: 72]

{ Eebe wuxuu idinka yeelay naftiinna azwaaj wuxuuna idinka yeelay Haweenkiinna caruur iyo farac idinkuna arsaaqay wanaag ma baadhilbay rumayn oy Nicmada Eebay ka Gaaloobi } [suurada al-naxli: 72 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وَثِيَابَكَ فَطَهِّرْ ﴿٤﴾ وَٱلرُّجْزَ فَٱهْجُرْ﴿٥﴾﴾[المدثر: 4-5]

{ Dharkaagana daahiri). (Xumuuntana ka hijroo (iyo Sanamyada.} [suurada al-mudathir: 4-5 ]

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: magalo janada qof qalbigiisa uu kujiro wax kibir ah oo lamid quraanjo oo kale nin baa yiri: ninku wuxuu jecelyahay ino khamiiskiisa iyo kabihiisa ay ahaadaan kuwo wanaagsan oo qurux badan? wuxuu yiri nabigu scw: ilaahay wuu quruxsanyahay wuuna jecelyahay quruxda, kibirku waa in ladiido xaqa dadkana laxaqiro. saxiixu muslim 91

## 34. islaamku wuxuu xarimay muxaramaatka kuwa ugu waa wayn sida shirkiga, gaalnimada, caabudida asnaamta, iyo kubeen abuurka ilaahay cilmi la'aan, dilka caruurta, nafta dadka, fasaadka dhulka, sixirka, faaxishada,zinada, khaniisnimada, wuu xarimay ribada, cunida baqtiga, wixii asnaamta loo gooracay, hilibka doofaarka, wixii najaas iyo qurun ah, cunida maalka agoonka, miizaanka oo ladhimo,qaraabada oo lagooyo, anbiyaduna way kamidaysanyihiin waxyaabahaa xaaraanimadooda.

slaamku wuxuu xarimay muxaramaatka kuwa ugu waa wayn sida shirkiga, gaalnimada, caabudida asnaamta, iyo kubeen abuurka ilaahay cilmi la'aan, dilka caruurta ilaahay wuxuu yiri:

﴿۞قُلۡ تَعَالَوۡاْ أَتۡلُ مَا حَرَّمَ رَبُّكُمۡ عَلَيۡكُمۡۖ أَلَّا تُشۡرِكُواْ بِهِۦ شَيۡـٔٗاۖ وَبِٱلۡوَٰلِدَيۡنِ إِحۡسَٰنٗاۖ وَلَا تَقۡتُلُوٓاْ أَوۡلَٰدَكُم مِّنۡ إِمۡلَٰقٖ نَّحۡنُ نَرۡزُقُكُمۡ وَإِيَّاهُمۡۖ وَلَا تَقۡرَبُواْ ٱلۡفَوَٰحِشَ مَا ظَهَرَ مِنۡهَا وَمَا بَطَنَۖ وَلَا تَقۡتُلُواْ ٱلنَّفۡسَ ٱلَّتِي حَرَّمَ ٱللَّهُ إِلَّا بِٱلۡحَقِّۚ ذَٰلِكُمۡ وَصَّىٰكُم بِهِۦ لَعَلَّكُمۡ تَعۡقِلُونَ١٥٢﴾[الأنعام: 151-152]

{ Waxaad Dhahdaa Kaalaya aan idiin Akhriyo waxa Eebe idinka reebaye, waa inaydaan wax la Wadaajin, Labada waalidna waa inaad u samo Fashaan (Oydaan Caasiyin) oydaan laynna Caruurtiinna Saboolnimo (Baahi) Anagaa idinka iyo Iyagaba Arzaaqi, hana u Dhawaanina Xumaanta teeda muuqata iyo Teeda Qarsoonba, hana dilina Naftii Eebe Reebay in Xaq darro lagu Dilo, saasuuna Eebe idin fari inaad wax kastaan). (hana u Dhawaanina Xoolaha Agoonta si Fiican mooyee intay ka Gaadhaan Xoogooda, Dhammaystirana Miisidda iyo Miisaanka, si Caddaalada, laguma kalifo Nafi waxayna karin haddaad hadlaysaanna Caddaalad fala, Qaraababa ha ahaadee, oofiyana Ballanka Eebe, Sidaasaana Eebe idin faray inaad waantoowdaan.} [suurada al-ancaam: 151-152 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿قُلۡ إِنَّمَا حَرَّمَ رَبِّيَ ٱلۡفَوَٰحِشَ مَا ظَهَرَ مِنۡهَا وَمَا بَطَنَ وَٱلۡإِثۡمَ وَٱلۡبَغۡيَ بِغَيۡرِ ٱلۡحَقِّ وَأَن تُشۡرِكُواْ بِٱللَّهِ مَا لَمۡ يُنَزِّلۡ بِهِۦ سُلۡطَٰنٗا وَأَن تَقُولُواْ عَلَى ٱللَّهِ مَا لَا تَعۡلَمُونَ٣٣﴾[الأعراف: 33]

{ Waxaad dhahdaa wuxuu uun Xarrimay Eebahay wax Xun kan Muuqda iyo ka Qarsoonba, iyo Dambiga, iyo Xad Gudub Xaq darro iyo inaad la wadaajisaan Eebe wuxuusan Xujo u soo Dejinin, iyo inaad ku Sheegtaan Eebe waxaydaan Ogayn «Xaqnimadiisa» } [suurada al-acraaf: 33 ].

islaamku wuxuu xarimay in ladilo naf aan waxgalabsan ilaahayna wuxuu yiri:

﴿وَلَا تَقۡتُلُواْ ٱلنَّفۡسَ ٱلَّتِي حَرَّمَ ٱللَّهُ إِلَّا بِٱلۡحَقِّۗ وَمَن قُتِلَ مَظۡلُومٗا فَقَدۡ جَعَلۡنَا لِوَلِيِّهِۦ سُلۡطَٰنٗا فَلَا يُسۡرِف فِّي ٱلۡقَتۡلِۖ إِنَّهُۥ كَانَ مَنصُورٗا٣٣﴾[الإسراء: 33]

{ Hana dilina Nafta Eebe xarrimay Xaq Mooyee, Ruuxii lagu dilo Gardarro waxaan u yeellay waligiisa Xujo ee yuusan ku xad gudbin Dilka waa loo Gargaaraye.} [suurada al-israa: 33 ].

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وَالَّذِينَ لَا يَدْعُونَ مَعَ اللَّهِ إِلَٰهًا آخَرَ وَلَا يَقْتُلُونَ النَّفْسَ الَّتِي حَرَّمَ اللَّهُ إِلَّا بِالْحَقِّ وَلَا يَزْنُونَ ۚ وَمَن يَفْعَلْ ذَٰلِكَ يَلْقَ أَثَامًا ﴿٦٨﴾﴾[الفرقان: 68]

{ Ee ah kuwaan Caabudayn Eebe La Jirkiisa Ilaah kale, oona Dilayn Naftuu Eebe Xarrimay Dilkeeda Xaq Mooyee oon Zinaysanayn, Ciddii Saas fashana waxay la Kulmi Dambi }. [suurada al-furqaan: 68 }

islaamku wuxuu xarimay in lafasahaadiyo dhulka ilaahayna wuxuu yiri:

﴿وَلَا تُفْسِدُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ بَعْدَ إِصْلَٰحِهَا...﴿٥٦﴾﴾[الأعراف: 56]

{ Hana fasaadinina Dhulka inta la Wanaajiyey ka dib, Baryana Eebe Cabsi iyo Doonidba Naxariista Eebana waxay u Dhawdahay kuwa Samaha Fala,} [suurada al-acraaf: 56 ]

وقال الله تعالى مخبراً عن النبي شعيب عليه السلام أن قال لقومه:

ilaahay ayaa inoo sheegay inuu nabi shucayb ku yiri qoomkiisa:

﴿وَإِلَىٰ مَدْيَنَ أَخَاهُمْ شُعَيْبًا ۗ قَالَ يَٰقَوْمِ ٱعْبُدُوا۟ ٱللَّهَ مَا لَكُم مِّنْ إِلَٰهٍ غَيْرُهُۥ ۖ قَدْ جَآءَتْكُم بَيِّنَةٌ مِّن رَّبِّكُمْ ۖ فَأَوْفُوا۟ ٱلْكَيْلَ وَٱلْمِيزَانَ وَلَا تَبْخَسُوا۟ ٱلنَّاسَ أَشْيَآءَهُمْ وَلَا تُفْسِدُوا۟ فِى ٱلْأَرْضِ بَعْدَ إِصْلَٰحِهَا ۚ ذَٰلِكُمْ خَيْرٌ لَّكُمْ إِن كُنتُم مُّؤْمِنِينَ ﴿٨٥﴾﴾[الأعراف: 85]

{ Madyanna waxaan u Diray Walaalkood Nabi Shucayb wuxuuna yidhi Qoomkayow Caabuda Eebe idiinma sugna Eebe ka soo hadhaye, waxaa idiinka Timid Xagga Eebe Xujee Dhammaystirana Miisidda iyo Miisaanka, hana ka Nusqaaminina Dadka waxooda, hana Fasaadinina Dhulka wanaajin kadib, saasaa idiin khayr roon haddaad Mu'miniin tihii.} [suurada al-acraaf: 85 ].

islaamku wuxuu xarimay sixirka ilaahayna wuxuu yiri:

﴿وَأَلْقِ مَا فِى يَمِينِكَ تَلْقَفْ مَا صَنَعُوٓا۟ ۖ إِنَّمَا صَنَعُوا۟ كَيْدُ سَٰحِرٍ ۖ وَلَا يُفْلِحُ ٱلسَّاحِرُ حَيْثُ أَتَىٰ ﴿٦٩﴾﴾[طه: 69]

{ Tuur waxa midigtaada ku jira ha gurato waxay sameeyeene, waxay uun sameeyeen Dhagar sixir, mana Liibaano Sixirrow meejuu yimaaddo.} [suurada dhaaha: 69 ]

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: wuxuu yiri nabigu kafugaada Todobada lagu halaagsamo sida: Shirkiga (ilaahay oo cid kale lala wadaajiyo). Sixirka. Nafta Ilaahay xarimay dilkeeda. Cunida Ribada. Cunida xoolaha Agoonta. in la cararo oo la cabsado maalinta iska hor yimaadaan Muslimiinta iyo gaaladu. Haweenka Muminaadkaa ee dhawrsan oo la dhaleeceeyo. saxiixulbukhaari 6857 islaamku wuxuu xarimay faaxishnimada teeda muuqata, qarsoon, zinada, iyo liwaadka aayadahaas way noosoo hormareen, sidoo kale wuxuu xarimay islaamku ribada ilaahayna wuxuu yiri:

﴿يَـٰٓأَيُّهَاٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱتَّقُواْٱللَّهَ وَذَرُواْ مَا بَقِيَ مِنَ ٱلرِّبَوٰٓاْ إِن كُنتُم مُّؤۡمِنِينَ ٢٧٨ فَإِن لَّمۡ تَفۡعَلُواْفَأۡذَنُواْبِحَرۡبٖ مِّنَ
ٱللَّهِوَرَسُولِهِۦۖ وَإِن تُبۡتُمۡفَلَكُمۡ رُءُوسُ أَمۡوَٰلِكُمۡ لَا تَظۡلِمُونَ وَلَا تُظۡلَمُونَ ٢٧٩﴾[البقرة: 278-279]

{ kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada Eebe kana taga waxa hadhay oo Ribo ah haddaad Mu'mintihiin. (278) (haddaydaan falin (sidaas) ogaada Dagaal Eebe iyo Rasuulkiisa, haddaad Toobad keentaanna waxaad leedihiin Raasamaalkii Xoolihiina, wax dulminmaysaan idiina laydin ma dulmayo. (279) } [suurada albaqara: 278-279 ].

cid uu ilaahay ugu goodiyay dagaal adag majiro aan ka ahayn kan ribada cuno, waayo ribadu waxay baabi'isaa diimaha, wadamada, maalka, nafaha. islaamku wuxuu xarimay cunida baqtiga, wixii asnaamta loo gooracay, hilibka doofaarka ilaahayna wuxuu yiri:

﴿حُرِّمَتْ عَلَيْكُمُ الْمَيْتَةُ وَالدَّمُ وَلَحْمُ الْخِنْزِيرِ وَمَا أُهِلَّ لِغَيْرِ اللَّهِ بِهِ وَالْمُنْخَنِقَةُ وَالْمَوْقُوذَةُ وَالْمُتَرَدِّيَةُ
وَالنَّطِيحَةُ وَمَا أَكَلَ السَّبُعُ إِلَّا مَا ذَكَّيْتُمْ وَمَا ذُبِحَ عَلَى النُّصُبِ وَأَنْ تَسْتَقْسِمُوا بِالْأَزْلَامِ ۚ ذَٰلِكُمْ
فِسْقٌ ۗ... ٣﴾[المائدة: 3]

{ Waxaa laydinka Xarrimay Bakhtiga iyo dhiigga iyo Hilibka Doofaarka iyo wixii lagu Xuso (Lagu Gawraco) waxaan magaca Eebe ahayn, iyo tii In Ceejiyo, iyo la Ganac gooyo, iyo lan meel ku dhacda, iyo Tii la Hardiyo, iyo Midduu Cunay bahal, wuxaud Gawracdaan mooyee (waxaa kaloo reeban) wixii lagu gawraco Sanam, iyo inaad ku Nasiib doontaan Faal, kaasi waa Fisqi, maantayna ka quusteen kuwii Gaaloobay Diintiinna, Ee ha ka Cabsanina ee iga Cabsada, Maantaan idiin kaamilay (Dhameeyey)

Diintiinna waxaana idiin Taamyeelay Korkiinna Nicmadayda waxaana idiinka Raalli noqday Islaamka Diin ahaan, Ciddii loo Dhibaateeyo Baahi inay cunaan wixii laga xaaraameeyey oon Falayn Dambi Eebc waa dambi dhaafe Naxariista } [Suurada Al-maaidah , aayada: 3 ]

islaamku wuxuu xarimay cabitaanka khamriga, waxyaabaha najaasta ah iyo wixii xunxun ilaahayna wuxuu yiri:

﴿يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا إِنَّمَا الْخَمْرُ وَالْمَيْسِرُ وَالْأَنصَابُ وَالْأَزْلَامُ رِجْسٌ مِّنْ عَمَلِ الشَّيْطَانِ فَاجْتَنِبُوهُ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ﴿٩٠﴾ إِنَّمَا يُرِيدُ الشَّيْطَانُ أَن يُوقِعَ بَيْنَكُمُ الْعَدَاوَةَ وَالْبَغْضَاءَ فِي الْخَمْرِ وَالْمَيْسِرِ وَيَصُدَّكُمْ عَن ذِكْرِ اللَّهِ وَعَنِ الصَّلَاةِ ۖ فَهَلْ أَنتُم مُّنتَهُونَ﴿٩١﴾﴾[المائدة: 90-91]

{ Kuwa Xaqa Rumeeyow Khamrada, qamaarka, Sanamyada «Taagan», iyo Faalku waa uun Xuman (Wasakh) oo Camal Shaydaana ee ka Foogaada inaad Liibaantaan). (Wuxuu uun Dooni Shaydaanku inuu Idinku Dhextuuro Colnimo iyo isnac Khamrada iyo Qamaarka idinkana Celiyo Xusidda Eebe iyo salaadda ee ma ka Joogaysaan (ka Jooga } [suurada al-maaa-idah : 90-91 ].

waxaa kusoo qaadanay faqrada 31 in ilaahay uu kusheegay sifaatka nabi muxamed scw ee kitaabka towreed uu sheegayay inuu xarimayo wixii xun oo dhan ilaahayna wuxuu yiri:

﴿الَّذِينَ يَتَّبِعُونَ الرَّسُولَ النَّبِيَّ الْأُمِّيَّ الَّذِي يَجِدُونَهُ مَكْتُوبًا عِندَهُمْ فِي التَّوْرَاةِ وَالْإِنجِيلِ يَأْمُرُهُم بِالْمَعْرُوفِ وَيَنْهَاهُمْ عَنِ الْمُنكَرِ وَيُحِلُّ لَهُمُ الطَّيِّبَاتِ وَيُحَرِّمُ عَلَيْهِمُ الْخَبَائِثَ وَيَضَعُ عَنْهُمْ إِصْرَهُمْ وَالْأَغْلَالَ الَّتِي كَانَتْ عَلَيْهِمْ ۚ ...﴿١٥٧﴾﴾[الأعراف: 157]

{ ee ah kuwa Raaca Rasuulka Nabiga ah ec Umiga ah ee ah kay ka heleyeen Isagoo ku qoran agtooda Tawreed iyo Injiil Farana wanaagga kana reeba Xumaanta una Baneeya Wanaagga (Xalaasha) kana Xarrima Xumaanta (Xaaraanta) kana dejiya Culayskii iyo Xadhkihii korkooda ahaa, kuwa Rumeeyey Nabigaas oo Qaddariyey oo u Gargaaray oo Raacay Nuurka lagu soo Dejiyey kuwaasu waa uun kuwa Liibaanay.} [suurada al-acraaf: 157 ].

islaamku wuxuu xarimay in lacuno maalka agoonta ilaahayna wuxuu yiri:

﴿وَآتُوا الْيَتَامَىٰ أَمْوَالَهُمْ ۖ وَلَا تَتَبَدَّلُوا الْخَبِيثَ بِالطَّيِّبِ ۖ وَلَا تَأْكُلُوا أَمْوَالَهُمْ إِلَىٰ أَمْوَالِكُمْ ۚ إِنَّهُ كَانَ حُوبًا كَبِيرًا ﴿٢﴾﴾[النساء: 2]

{ Siiya Agoonta xoolahooda hana ku Badalina Xumaan Wanaag, hana Cunina xoolahooda La jirka Xoolihiinna Taasina waa Dambi weyn } [suurada al-nisaa: 2 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿ إِنَّ الَّذِينَ يَأْكُلُونَ أَمْوَالَ الْيَتَامَىٰ ظُلْمًا إِنَّمَا يَأْكُلُونَ فِي بُطُونِهِمْ نَارًا ۖ وَسَيَصْلَوْنَ سَعِيرًا ﴿١٠﴾﴾[النساء: 10]

{ Kuwa u Cunaya Xoolaha Agoonla Dulmi (Xaq darro) waxay uun ku Cunayaan Calooshooda Naar waxayna Gali Saciiro.} [suurada al-nisaa: 10 ]

islaamku wuxuu xarimay in lanuqsaaniyo wax beega iyo miizaanka ilaahayna wuxuu yiri:

﴿وَيْلٌ لِّلْمُطَفِّفِينَ ﴿١﴾ ٱلَّذِينَ إِذَا ٱكْتَالُوا۟ عَلَى ٱلنَّاسِ يَسْتَوْفُونَ ﴿٢﴾ وَإِذَا كَالُوهُمْ أَو وَّزَنُوهُمْ يُخْسِرُونَ ﴿٣﴾ أَلَا يَظُنُّ أُو۟لَٰٓئِكَ أَنَّهُم مَّبْعُوثُونَ ﴿٤﴾﴾[المطففين: 1-4]

{ Wuxuu Halaag u sugnaaday kuwa xaqa nusqaamiya). (Waa kuwa markay miisina oofsada (dhammaystirta). (Markay u miisi ama u miisaamina ka nusqaamiya). (Miyayna u malaynaynin kuwaasi in loo soo bixin } [suurada al-mudhafifiin: 1-4 ]

islaamku wuxuu xarimay qaraaba goonta, waxaana lagu soo sheegay faqrada 31 aayaatkii iyo axaadiistii tusinaysay arinkaas, anbiyad iyo rususha dhamaantood way is ku waafaqsanyihiin muxaramaadkaan xaaraanimadooda..

## 35. islaamku wuxuu mancinayaa akhlaaqda xun sida beenta, dhagarta, khiyaanada, xasadka, tuuganimada, xadgudubka, dulmiga, wuxuuna reebay dhamaan akhlaaqda xun.

wuxuuna reebay akhlaaqda xun guud ahaan ilaahayna wuxuu yiri:

﴿وَلَا تُصَعِّرْ خَدَّكَ لِلنَّاسِ وَلَا تَمْشِ فِي ٱلْأَرْضِ مَرَحًاۖ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يُحِبُّ كُلَّ مُخْتَالٍ فَخُورٍ﴿١٨﴾﴾[لقمان: 18]

{ hana ka jeedin Wajiga dadka hana ugu socon dhulka kibir, Eebana ma jeela mid kastoo isla weyn oo faanbadane.} [suurada luqmaan: 18 ]

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: kaan ugu jeclahay dadka iina dhaw maalinta qiyaame waa kan idinku akhlaaq wanaagsan, kan aan ugu necebahay dadka igana fog fadhi ahaan maalinta qiyaame waa kan hadalka badan, aftahanimada iska doon doon, iyo iskibriye. silsila assaxiixah 791 wuxuuna islaamka reebay beenta ilaahay wuxuu yiri :

﴿... إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهْدِى مَنْ هُوَ مُسْرِفٌ كَذَّابٌ﴿٢٨﴾﴾[غافر: 28]

{ Wuxuu yidhi nin Mu'min ah oo ka mid ah dadka Fircoon oo qarinaayay limaankiisa, ma waxaad udilaysaan in uu yidhi Eebahay waa Alle, isagoo idiinkala yimid xijooyin xagga Eebihiin hadduu beenaale yahayna isagay dhibi beentiisu, hadduu runle yahayna waxaa idin ku dhici wuxuu idiin ku yaboohay qaarkiis, Eebana ma hanuuniyo danbi badane been badan } [suurada gaafir: 28 ]

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yiri: beenta iska ilaaliya waayo waxay gaarsiisaa faajirnimo faajirnimaduna waxay gaarsiisaa naarta ninku kama suulayo beenta iyo ku dadaalideeda ilaalooga qoro ilaahay agtiisa biinbadane. saxiixu muslim 2607

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: calaamadaha lugu garto munaafiqa waa sadex: been buu kusheekeeyaa, balantana wuu kabaxaa, amaanadana wuu khiyaanaa. saxiixulbukhaari 6095

islaamku wuxuu reebay gishiga waana khiyaanada iibsiga kusaabsan xadiis waxaa ku yimid in nabigu uu soomaray raashin meel tuursan, gacantuu galiyay farihiisii qoyaan bay taabteen, wuxuuna yiri: waa maxaay waxaan ninraashinkaan iskalahaw wuxuu yiri: roob baa kuda'ay rasuulka allow wuxuu yiri: maad kayeeshid qeebta sare siday dadka u arkaan, ninkii umada khiyaana wadadayda mahaysto. saxiixu muslim 102

islaamku wuu reebay khiyaanada iyo dhagarta ilaahay wuxuu yiri:

﴿يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا لَا تَخُونُوا اللَّهَ وَالرَّسُولَ وَتَخُونُوا أَمَانَاتِكُمْ وَأَنتُمْ تَعْلَمُونَ﴿٢٧﴾﴾ [الأنفال: 27]

{ Kuwa (Xaqa) Rumeeyow ha Khayaamina Eebe iyo Rasuulka iyo Ammaanadiinna idinkoo Og } [suurada al-anfaal: 27 ]

Ilaahay kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿ٱلَّذِينَ يُوفُونَ بِعَهۡدِ ٱللَّهِ وَلَا يَنقُضُونَ ٱلۡمِيثَٰقَ﴿٢٠﴾﴾[الرعد: 20]

{ ee ah kuwa Oofiya ballanka Eebe oon burininna ballanka adag,} [suurada al-racad: 20 ].

rasuulku wuxuu ku oranjiray ciidankiisa markay baxayaan: jihaada waxna ha xadina, hana khiyamina, ha suurad xumaynina, ilma yarna hadilina. saxiixu muslim 1731

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: afar ninkii laga helo waa munaafiq buuxa qofkii laga helo mid kamida waxaa kusugan qeeb nifaaqa kamida ilaa uu iska daayo: hadii amaano loodhiibto wuu khiyaanaa, hadii balangalo wuu kabaxaa, haduu doodayana wuu faajirnimo falaa. saxiixulbukhaari 34

wuxuuna islaamka reebayaa xaasidnimada ilaahay wuxuu yiri:

﴿ أَمْ يَحْسُدُونَ النَّاسَ عَلَىٰ مَا آتَاهُمُ اللَّهُ مِن فَضْلِهِ ۖ فَقَدْ آتَيْنَا آلَ إِبْرَاهِيمَ الْكِتَابَ وَالْحِكْمَةَ وَآتَيْنَاهُم مُّلْكًا عَظِيمًا ﴿٥٤﴾﴾[النساء: 54]

{ Mise waxay ku Xasdi Dadka waxa Eebe Siiyey oo Fadli ah, waxaan Siinay Ehelkii Ibraahiim Kitaabka iyo Xigmad, waxaana siinay Xukun Wayn } [suuradaal-nisaa: 54 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وَدَّ كَثِيرٌ مِّنْ أَهْلِ الْكِتَابِ لَوْ يَرُدُّونَكُم مِّن بَعْدِ إِيمَانِكُمْ كُفَّارًا حَسَدًا مِّنْ عِندِ أَنفُسِهِم مِّن بَعْدِ مَا تَبَيَّنَ لَهُمُ الْحَقُّ ۖ فَاعْفُوا وَاصْفَحُوا حَتَّىٰ يَأْتِيَ اللَّهُ بِأَمْرِهِ ۗ إِنَّ اللَّهَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ قَدِيرٌ﴿١٠٩﴾﴾[البقرة: 109]

{ waxay jeelyihiin in badan oo ehelu Kitaab ah (Yuhuud iyo Nasaara) inay idiin celiyaan iimaankiina ka dib Gaalo, Xasad naftooda ka yimid

dartiis, intuu xaqu u caddaaday ka dib, ee iska cafiya iskana saamaxa inta Eebe ka keeni amarkiisa (Ia dagallankooda ama islaamkooda) Eebana waxkastuu doono wuu karaa } [suurada albaqara: 109 ].

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: waxaa dhexdiina kufaafay cuduradii dadkii hore: xasad, xanaaq, waana mida wax xiirta, oranmaayo timaha bay xiiraysaa, laakiin waxay xiiri diinta, waxaan kudhaaran ilaahayga naftayda gacantiisa ay kujirto janada gali maysaan ilaad aad rumaysaan mana rumaynaysaan ilaa aad isjeclaataan, maidiin sheegaa arinkaa wuxuu kusugnaanayo? salaanta ku faafiya dhexdiina. sunan altirmidi 2510 wuxuu islaamka reebayaa dhagarta xun ilaahayna wuxuu yiri:

﴿وَكَذَٰلِكَ جَعَلۡنَا فِي كُلِّ قَرۡيَةٍ أَكَٰبِرَ مُجۡرِمِيهَا لِيَمۡكُرُواْ فِيهَاۖ وَمَا يَمۡكُرُونَ إِلَّا بِأَنفُسِهِمۡ وَمَا يَشۡعُرُونَ ١٢٣﴾[الأنعام: 123]

{ Saasaan ugu Yeellay Magaalo kasto Dambilayaal waawayn, inay wax ku Dhagraan Dhexdeeda, waxaan Naftooda ahayna ma Dhagrayaan masc oge } [suurada al-ancaam: 123 ]

ilaahay wuxuu sheegay in yuhuudu ay iskudayeen dilka nabi ciise ayna dhagar layimaadeen laakiin ilaahay uu baabi'iyay dhagartoodi, wuuna alle sheegay in dhagarta xumi inaynan haleelayn cidkale mid kii sameeyay ahalkiisii mooyee ilaahayna wuuu yiri:

﴿۞فَلَمَّآ أَحَسَّ عِيسَىٰ مِنۡهُمُ ٱلۡكُفۡرَ قَالَ مَنۡ أَنصَارِيٓ إِلَى ٱللَّهِۖ قَالَ ٱلۡحَوَارِيُّونَ نَحۡنُ أَنصَارُ ٱللَّهِ ءَامَنَّا بِٱللَّهِ وَٱشۡهَدۡ بِأَنَّا مُسۡلِمُونَ ٥٢ رَبَّنَآ ءَامَنَّا بِمَآ أَنزَلۡتَ وَٱتَّبَعۡنَا ٱلرَّسُولَ فَٱكۡتُبۡنَا مَعَ ٱلشَّٰهِدِينَ ٥٣ وَمَكَرُواْ وَمَكَرَ ٱللَّهُۖ وَٱللَّهُ خَيۡرُ ٱلۡمَٰكِرِينَ ٥٤ إِذۡ قَالَ ٱللَّهُ يَٰعِيسَىٰٓ إِنِّي مُتَوَفِّيكَ وَرَافِعُكَ إِلَيَّ وَمُطَهِّرُكَ مِنَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ وَجَاعِلُ ٱلَّذِينَ ٱتَّبَعُوكَ فَوۡقَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ إِلَىٰ يَوۡمِ ٱلۡقِيَٰمَةِۖ ثُمَّ إِلَيَّ مَرۡجِعُكُمۡ فَأَحۡكُمُ بَيۡنَكُمۡ فِيمَا كُنتُمۡ فِيهِ تَخۡتَلِفُونَ ٥٥﴾[آل عمران: 52-55]

{ Markuu ka kasay Ciise Xaggooda Gaalnimo yuu yidhi yaa iigu gargaari Eebe, waxayna dhaheen Xawaariyiintii (gargaarayaashii) anagaa ah gargaaraha Eebe (Diintiisa) waxaan rumeynay Eebe ee marag ka noqo inaan Muslimiin nahay. (52) (Eebow waan rumeynay waxaad soo dejisay

waxaana raacnay Rasuulka ee nagu qor (nagadhig) la jirka markhaatiyada. (Umadda Nabi Muxamad). (53) (Way xeeladaysteen, Eebana xeelad ayuu dhigay, Eebana u wanaagsan kuwa xeelada dhiga. (54) (Xusuuso markuu ku yidhi Eebe Ciisow waan ku oofsan(aan dhimasho ahayn) waana ku koryeeli, waana kaa dahirin kuwii gaaloobay, waxaana yeeli kuwa ku raaca korka kuwa Gaaloobay tan iyo Qiyaamada, markaasna xaggaygaa laydiin soo celin waana idin kala Xukumi dhexdiina waxaad isku khilaaf sanaydeen. (55).} [suurada aali-cimraan: 52-55 ].

ilaahay wuxuu sheegay in qoomkii nabi saalax ay iskudayeen dilka nabi saalax ayna dhagar layimaadeen laakiin ilaahay uu baabi'iyay ayaga iyo dhagartoodi, ilaahayna wuxuu yiri:

﴿قَالُوا۟ تَقَاسَمُوا۟ بِٱللَّهِ لَنُبَيِّتَنَّهُۥ وَأَهْلَهُۥ ثُمَّ لَنَقُولَنَّ لِوَلِيِّهِۦ مَا شَهِدْنَا مَهْلِكَ أَهْلِهِۦ وَإِنَّا لَصَٰدِقُونَ ﴿٤٩﴾ وَمَكَرُوا۟ مَكْرًا وَمَكَرْنَا مَكْرًا وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ ﴿٥٠﴾ فَٱنظُرْ كَيْفَ كَانَ عَٰقِبَةُ مَكْرِهِمْ أَنَّا دَمَّرْنَٰهُمْ وَقَوْمَهُمْ أَجْمَعِينَ ﴿٥١﴾﴾ [النمل: 49-51]

{ Waxayna Dheheen isku Dhaarta Eebe inaan mirro isaga iyo Ehelkiisaba Markaas aan ku Dhahno Qaraabadiisa Maanaan Joogin Meeshu ku Halaagmay Ehelkiisu waxaana Sheegaynaa Run). (Way Dhagreen Dhagar Anana waan Abaal marinay Iyagoon Ogayn). (ee Day Siday Noqotay Cidhibtii Dhagartooda Anagaa Halaagnay Iyagii iyo Qoomkoodiiba Dhammaan.} [suurada al-namli: 49-51 ].

islaamku wuxuu reebayaa tuugnimada rasuulku scw wuxuu yiri: ma zinaysto zaaniga, tuugana masameeyom waxna maxado , khamrigana macabo iyagoo iimaan kaamil haysta, tawbaduna way ufududahay. saxiixulbukhaari 6810 wuxuuna islaamka reebayaa xadgudubka gardarada ilaahayna wuxuu yiri:

﴿۞ إِنَّ ٱللَّهَ يَأْمُرُ بِٱلْعَدْلِ وَٱلْإِحْسَٰنِ وَإِيتَآءِ ذِى ٱلْقُرْبَىٰ وَيَنْهَىٰ عَنِ ٱلْفَحْشَآءِ وَٱلْمُنكَرِ وَٱلْبَغْىِ ۚ يَعِظُكُمْ لَعَلَّكُمْ تَذَكَّرُونَ ﴿٩٠﴾﴾ [النحل: 90]

{ Eebe wuxuu Fari Caddaalad iyo Samafal iyo Wax siinta qaraabada Wuxuuna reebi Xumaan iyo Munkar iyo Gardarro, Wuuna idin Waanin inaad wax Xasuusataan. } [suurada al-naxli: 90 ].

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: ilaahay wuxuu ii waxyooday inaanaan iskibrin si yuusan ugu xadgudbin ugunaan faanin qofna qof kale. saxiixu abii daawuud 4895 wuxuuna islaamka reebay dulmiga ilaahayna wuxuu yiri:

﴿...وَٱللَّهُ لَا يُحِبُّ ٱلظَّٰلِمِينَ ٥٧﴾[آل عمران: 57]

{ kuwa (Xaqa) rumeeyeyse oo camal fiican falay wuxuu u oofin (dhammayn Eebe) ajirkooda, Eebana majecla daalimiinta} [Suurada Al-cimraan aayada : 57 ]

Ilaahay kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿...إِنَّهُۥ لَا يُفۡلِحُ ٱلظَّٰلِمُونَ ٢١﴾[الأنعام: 21]

{ Wax ka Dulmi Badanna ma jirto cid ku Abuuray Eebe Been ama beeniyey Aayaadkiisa mana Liibaanto Daalimiintu} [suurada al-ancaam : 21 ]

Ilaahay kor ahaaye wuxuu yiri:

﴿... وَٱلظَّٰلِمِينَ أَعَدَّ لَهُمۡ عَذَابًا أَلِيمًا ٣١﴾[الإنسان: 31]

{ Wuxuu galiyaa naxariistiisa ruuxuu doono, daalimiintana wuxuu u darbay cadaab daran} [suurada al-insaan: 31 ]

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: sadex ducadooda lama celiyo: imaamka caadilka ah, qofka sooman inta uu ka afurayo, qofka ladulmiyay ducadiisa waxaa lagu qaadaa daruur waxaana loo furaa albaaha samada rabi baa ku oran waxaan kudhaartay sharaftayda ee waan kuu hiilin haba ahaato muda ka dib. waxaa wariyay muslim 2749 xadiiska oo gaaban, oraahyo kala duwan, oo yar timidina sidookale lam.2526, axmed 8043

lafdigaasna asagaa ayaa wariyay. markuu nabi muxamed uu udiray mucaad yaman wuxuu ku yiri waxaa kamid ahaa: iska ilaali qofka ladulmiyay ashtakadiisa, waayo wax xibaab ah uma dhexayso isaga iyo ilaahay. saxiixulbukhaari 1496

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: qofkii dulmiya gaal balan amaan ah lasiiyay ama xaqira ama ku kalifa

wuxuu awoodin ama kaqaata shay uusan raali ka ahayn aniga nabi muxamed ah ayaa maalinta qiyaame u doodaya. Sunan Abii Dauud 3052

islaamku sidaad aragtay wuxuu reebay akhlaaq xun oo kasta ama mucaamalda dulmi wadata, ama jawrfalka ah.

## 36. islaamku wuxuu xarimay in la adeegsado maalka ribada ah ama uu dhib kujiro ama dulmi, ama khiyaano ama keenaysa khasaaro ama dhib guud oo gaara mujtamacaadka iyo shucuubta iyo qof qofba.

islaamku wuxuu xarimay in la adeegsado maalka ribada ah ama uu dhib kujiro ama dulmi, ama khiyaano ama keenaysa khasaaro ama dhib guud oo gaara mujtamacaadka iyo shucuubta iyo qof qofba. waxaa noogu soo hormartay faqradaan awalkeedii aayadaha iyo axaadiista xarimaysa ribada , dulmiga, khiyaanada, fasaadka dhulka, ilaahayna wuxuu yiri:

﴿وَالَّذِينَ يُؤْذُونَ الْمُؤْمِنِينَ وَالْمُؤْمِنَاتِ بِغَيْرِ مَا اكْتَسَبُوا فَقَدِ احْتَمَلُوا بُهْتَانًا وَإِثْمًا مُّبِينًا۝٥٨﴾[الأحزاب: 58]

{ Kuwa ku dhiba Mu'miniita Rag iyo Haweenba waxayan kasbanin waxay xambaarteen Been abuurasho iyo Dambi cad.} [suurada al-axzaab: 58 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿مَّنْ عَمِلَ صَٰلِحًا فَلِنَفْسِهِۦ ۖ وَمَنْ أَسَآءَ فَعَلَيْهَا ۗ وَمَا رَبُّكَ بِظَلَّٰمٍ لِّلْعَبِيدِ۝٤٦﴾[فصلت: 46]

{ Ruuxi camalfiican fala wuxuu u falay Naftiisa, Ruuxii xumaan falana wuxuu dhibay Naftiisa, allena ma aha dulmiyaha Addoomada.} [suurada fusilat : 46 ].

xadiis waxaa kuyimid:inuu rasuulka uu xukumay in aan dhib lasameen naftaada iyo midkaleba. Sunan Abii Dauud Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: qofkii ilaahay rumeeyay iyo aakhro yuusan dhibin dariskiisa, qofkii ilaahay rumeeyay iyo aakhro hakaraameeyo martidiisa, qofkii ilaahay rumeeyay iyo aakhro khayr haku hadlo ama haiska aamuso, riwayad kale waxay eheyd: ha uwanaag falo dariskiisa. saxiixu muslim 47 Rasuulku Naxariis iyo nabad

galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: qof dumar ah ayaa cadibtay bisad way xabistay ilaa ay dhimatay ka dibna naar bay gashay qoftii mana quudin mana waraabin mana siidaynin siyay u cunto waxa dhulka kasoobaxa. saxiixulbukhaari 3482 kani waa qofkii dhiba bisad ee saw noqonayaa arinkaa qofkii banii aadam dhiba ibnu cumar waxaa laga wariyay inuu yiri: rasuulka scw fuulay minbarka cod dheer buu kuyiri: dadka afka karumeeyow uusan iimankuna udhaadhicin qalbigiisa, hadhibina muslimiinta, hanaceebeenina, ceebtoodana haraacraacina waayo qofkii saa sameeya ilaahay baa raacraaca ceebtiisa, ka dibna wuu fadeexeeyaa, haba kudhexjiree gurigiisa.ibnu cumar ayaa fiiriyay maalin kacbada oona yiri: maxaa kaasharaf badan oo kaa xurmad badan laakiin mu'minkaasa kaasii sharaf wayn. waxaa wariyay tirmidi 2032, ibnu xibaan 5763 Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: qofkii ilaahay rumeeyay iyo aakhro yuusan dhibin dariskiisa, qofkii ilaahay rumeeyay iyo aakhro hakaraameeyo martidiisa, qofkii ilaahay rumeeyay iyo aakhro khayr haku hadlo ama haiska aamuso. saxiixulbukhaari 6018 abu hurayra waxaa laga wariyay inuu nabiga kawariyay inuu yiri: magaranaysaan qofka mufliska ah? waxay yiraahdeen waa qofka aan lacag iyo alaab haysan. wuxuu yiri: waa mid kamid ah umadayda wuxuuna la iman aakhiro soon, salaad, zako, wuuna iman isagoo qof caayay, duray midkale, maal qof kale cunay waa lafariisin xanaadkiisa baa looga jarayaa kan kana sidookale xasanaadkiisiibaa looga jarayaa markay dhamaato xasanaadkiisi intaan ladhamayn waxa denbiga ah ee dushiisa ah waxaa lasooqaadi denbiyadooodii waxaana lasaari dushooda ka dibna lugu tuuri naarta. waxaa wariyay muslim 2582, tirmidi 2418, axmed 8029 oraahdaana axmed baa wariyay. Rasuulku Ilaahay wuxu yiri: waxaa kusugnaa wado laan geed dadka dhibi jirtay ninbaa kaqaaday markaasuu janada ku galay. waxaa wariyay muslim bukhaari 652 macnihiisa, muslim 1914 mid lamid ah, ibnu maajah 3682, axmed 10432 oraahdaana axmed iyo ibnu maajah baa wariyay. hadii janada luggu galayo dhib laga qaaday wadada, kawarama qofka dhibaya dadka noloshoodana fasaadinaya?.

**37. islaamku waxuu layimid in laxafido caqliga iyo inuu xarimay waxkasta oo fasaadinaya sida cabitaanka khamriga wuxuu caqliga kadhigay meesha wax laga wado cibaadada wuxuuna ka badbaadiyay khuraafaatka iyo asnaam caabudida, islaamku wuxuu kugaaryeelay koox kaliya majiro sharaaicdiisa oo dhan waa mid waafaqsan caqliga saxiixa ah waana sida cadaalada iyo xikmada ay kujirto.**

islaamku wuxuu xafiday caqliga arinkiisana korbuu oqaaday ilaahay wuxuu yiri:

﴿... إِنَّ ٱلسَّمْعَ وَٱلْبَصَرَ وَٱلْفُؤَادَ كُلُّ أُوْلَـٰٓئِكَ كَانَ عَنْهُ مَسْـُٔولًا ﴿٣٦﴾﴾[الإسراء: 36]

{ hana dhihin (Raacraacin) Waxaadan u Cilmi lahayn, Illeen Maqalka, Araga iyo Qalbigaba waa lays warsane.} [suurada al-israa: 36 ].

waxaa waajib ku ah insaanka inuu ilaaliyo caqligiisa sidaa darteed islaamku wuxuu xarimay khamriga iyo mukhadaraatka waxaana kusoo sheegnay faqrada 34 aayada badana waxay ku khatintay oraahda ilaahay:

﴿...لَعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٢٤٢﴾﴾[البقرة: 242]

{ saasuuna Eebe idiinku caddayn aayaadkiisa inaad kastaan darteed} [suurada albaqara: 242 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وَمَا الْحَيَاةُ الدُّنْيَا إِلَّا لَعِبٌ وَلَهْوٌ ۖ وَلَلدَّارُ الْآخِرَةُ خَيْرٌ لِّلَّذِينَ يَتَّقُونَ ۗ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٣٢﴾﴾[الأنعام: 32]

{ Nolosha Adduunyana ma aha waxaan Ciyaar iyo Madadaalo ahayn Guriga Aakharaana u Khayr roon kuwa Dhawrsan ee Miyeyydaan wax kasayn} [suurada al-ancaam: 32 ].

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿إِنَّا أَنزَلْنَاهُ قُرْآنًا عَرَبِيًّا لَّعَلَّكُمْ تَعْقِلُونَ ﴿٢﴾﴾[يوسف: 2]

{ Annagaana soo dejinay isagoo Quraan Carabi ah inaad kastaan.} [suurada yuusuf: 2 ]

ilaahay wuxuu cadeeyay in hanuunka iyo xikmada aysan kafaaiidaysan cid kale dadka caqliga fiicanleh mooye oo caqliyada usaaxiibka ah ilaahay wuxuu yiri:

﴿يُؤۡتِي ٱلۡحِكۡمَةَ مَن يَشَآءُۚ وَمَن يُؤۡتَ ٱلۡحِكۡمَةَ فَقَدۡ أُوتِيَ خَيۡرٗا كَثِيرٗاۗ وَمَا يَذَّكَّرُ إِلَّآ أُوْلُواْ ٱلۡأَلۡبَٰبِ ٢٦٩﴾[البقرة: 269]

{ wuxuu siiyaa xigmo cidduu doono, ruuxii la siiyo xigmona waxaa la siiyey khayr Badan, wax waantoobo oon kuwa Caqliga leh ahayna majiro.} [suurada albaqara: 269 ]

sidaasi daraadeed islaamku wuxuu kadhigay caqliga meesha kaliya takliifka qofka laga saaro rasuulku scw wuxuu yiri: sadex qof wax looma qabto: kan hurda ilaa uu tooso, kan yar ilaa uu kaqaangaaro, kan waalan ilaa uu kamiirsado. bukhaari mucalaq oo jazmi ah waxaana kahoreeyay xadiiska 5269, abuu daawuud ayaa xariiriyay xadiiskaas 4402 waana lafdigiisa, tirmidi 1423 nasaa'i kitaabka sunan alkubraa 7346, axmed 956 waxyar bay kula badaln yihiin, ibnu maajah 2042 isagoo gaaban. islaamka wuxuu ka xoreeyay muslimka khuraafatka, asnaam caabudida ilaahay wuxuu yiri isagoo kasheekeeyay xaaladihii umadihii hore say ugu dheganaayeen khuraafaatka, wuuna uceliyay xaqii oo kayimid ilaahay agtiisa.

﴿وَكَذَٰلِكَ مَا أَرْسَلْنَا مِن قَبْلِكَ فِي قَرْيَةٍ مِّن نَّذِيرٍ إِلَّا قَالَ مُتْرَفُوهَا إِنَّا وَجَدْنَا آبَاءَنَا عَلَىٰ أُمَّةٍ وَإِنَّا عَلَىٰ آثَارِهِم مُّقْتَدُونَ ٢٣﴾[الزخرف: 23]

{ Waa saasoo kale umaanaandirin Magaalo hortaa u dige haddii kale waxa dhihi Jireen kuwa raaxaystay anagu waxaan hellay Aabayoowganoo jid ku sugan anaguna raadkooda yaan ku dayanaynaa.} [suurada al-zukhruf: 23 ].

ilaahay ayaa inoo sheegay inuu nabi Nuux yiri:

﴿إِذۡ قَالَ لِأَبِيهِ وَقَوۡمِهِۦ مَا هَٰذِهِ ٱلتَّمَاثِيلُ ٱلَّتِيٓ أَنتُمۡ لَهَا عَٰكِفُونَ ٥٢ قَالُواْ وَجَدۡنَآ ءَابَآءَنَا لَهَا عَٰبِدِينَ ٥٣﴾[الأنبياء: 52-53]

{ Markuu ku Yidhi Aabihiis iyo Qoomkiisii waa maxay Sawiradan aad ku kor Negidihiin (Caabudaysaan). (waxay Dheheen waxaan Hellay Aabayaalkanno oo Caabudi.} [suurada al-anbiyaa: 52-53 ]

islaamkii baa yimid dadkana wuxuu amray in laga tago caabudida asnaamta, iyo khuraafaatka ay kadhaxleen aabayaashood, awoowayaashood, waana inay raacaan wadooyinkii rususha alle n.n.c. islaamku malaha waxyaaba qarsoon ama axkaam ugaar ah koox gooni ah koox kale kasoko. cali bin abii dhaalib-Allaha ka raalli noqdee- ayaa lawaydiiyay oo ahaa Nabi muxamed-sallallaahu calayhi waslam- inaadeerkii, gabadhiisana qabay: majiraan wax nabiga idinku gaar yeelay? wuxuu yiri: (maya waxba naguma gaar yeellin, waxaan ahayn warqada kujirta seeftyadan galkeeda, wuxuuna kasoo bixiyay warqad ay ku qoran tahay: Ilaahay wuu lacnadday ruuxa u gawraca ilaahay waxaan ahayn, ilaahay wuu lacnadday ruuxii ku xadgudba calaamada dhulka, ilaahay wuu lacnaday ruuxa naclada waalidkiis, ilaahay wuu lacnadday cida soo xaro galiyaruux bidcoole ah, saxiixu muslim 1978 Axkaamta islaamka oo dhan waa mid waafaqsan caqliyada saxiixa ah waana sida cadaalada iyo xikmada ay keeneyso.

## 38. diimaha baadilka ah haday dadkeeda aysan fahmin waxyaabaha isburinaya iyo arimaha caqliyadu ay diidayso, islaamku wuxuu aaminsanyahay in ay diintu tahay nuur u ifinaya caqliga wadada saxda ah, amaa diimaha kale ee baadilka kuwa usaaxiibka ah waxay karabaan qofka inuu caqligiisa tuuro oo iyaga raaca, islaamkana wuxuu dooni inuu caqligiisa hurdada katoosiyo siyuu u garto xaqiiqada arimaha wax walba dhabnimadiisa.

diimaha baadilka ah haday dadkeeda aysan fahmin waxyaabaha isburinaya iyo arimaha caqliyadu ay diidayso, islaamku wuxuu aaminsanyahay in ay diintu tahay nuur u ifinaya caqliga wadada saxda ah, amaa diimaha kale ee baadilka kuwa usaaxiibka ah waxay karabaan qofka inuu caqligiisa tuuro oo iyaga raaca, islaamkana wuxuu dooni inuu caqligiisa hurdada katoosiyo siyuu u garto xaqiiqada arimaha wax walba dhabnimadiisa. ilaahay wuxuu yiri:

﴿وَكَذَٰلِكَ أَوْحَيْنَا إِلَيْكَ رُوحًا مِّنْ أَمْرِنَا ۚ مَا كُنتَ تَدْرِي مَا الْكِتَابُ وَلَا الْإِيمَانُ وَلَٰكِن جَعَلْنَاهُ نُورًا نَّهْدِي بِهِ مَن نَّشَاءُ مِنْ عِبَادِنَا ۚ وَإِنَّكَ لَتَهْدِي إِلَىٰ صِرَاطٍ مُّسْتَقِيمٍ ﴿٥٢﴾﴾[الشورى: 52]

{ Saasaannu kuugu waxyoonay nolol amarkanaga ah (Quraanka) maadan aqoonin Kitaab wuxuu yahay iyo Iimaan midna, laakiin waxaan ka yeellay Nuur aannu ku hanuunino ciddaan doono oo addoomadanada ka mid ah, adiguna Nabiyow waxaad ku hanuunin jidka toosan.} [suurada al-shuuraa: 52 ].

waxyiga ilaahay wuxuu xambaarsanyahay xujooyin ku hanuuninaya caqliyada fayaaw xaqiiqooyin gaarsiinaya waxgarashadeeda iyo rumeentiida ilaahay wuxuu yiri:

﴿يَا أَيُّهَا النَّاسُ قَدْ جَاءَكُم بُرْهَانٌ مِّن رَّبِّكُمْ وَأَنزَلْنَا إِلَيْكُمْ نُورًا مُّبِينًا ﴿١٧٤﴾﴾[النساء: 174]

{ Dadow waxaa idiin yimid Xujo Xagga Eebe ah waxaanan idiin soo Dejinay Nuur Cad.} [suurada al-nisaa : 174 ]

ilaahay wuxuu karabaa insaanka inuu kunoolaado nuurka hanuunk, cilmiga, xaqiiqda, shayaadiintuna waxay aldoonayaan insaanka inuu ahaado mugdiyada kufrigamjahliga,baadinimada, ilaahay wuxuu yiri:

﴿اللَّهُ وَلِيُّ الَّذِينَ آمَنُوا يُخْرِجُهُم مِّنَ الظُّلُمَاتِ إِلَى النُّورِ ۖ وَالَّذِينَ كَفَرُوا أَوْلِيَاؤُهُمُ الطَّاغُوتُ يُخْرِجُونَهُم مِّنَ النُّورِ إِلَى الظُّلُمَاتِ ۗ... ﴿٢٥٧﴾﴾[البقرة: 257]

{ Eeba waa u gargaaraha kuwa rumeeyay, wuxuuna ka bixiyaa mugdiga (Gaalnimada) una bixiyaa Nuurka (iimaanka), kuwa Gaaloobayna gargaarahoodu waa Dhaaquut (Xumaan fare) wuxuuna ka bixiyaa Nuurka una bixiyaa Mugdiga (Gaalnimada) kuwaasina waa ehelka Naarta wayna ku waari dhexdeeda.} [suurada albaqara: 257 ]

## 39. islaamku wuxuu waynaynayaa cilmiga saxda ah wuxuuna kuboorin baaris cilmiyeed oon hawa lahayn, wuxuuna uguyeerayaa dadka feero, iyo fakiraad nafsadeena iyo koonka, baaris cilmiyeed kaas oon kahor imaanayn islaamka saxda ah.

wuxuuna islaamku wanaynayaa cilmiga saxda ah ilaahay wuxuu yiri:

﴿...يَرْفَعِ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا مِنكُمْ وَالَّذِينَ أُوتُوا الْعِلْمَ دَرَجَاتٍ ۚ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ﴿١١﴾﴾[المجادلة: 11]

{ Kuwa xaqa rumeeyayow haddii la idin dhaho isu waasiciya fadhiga; isuwaasiciya Ilaahay wanaagga ha idiin waasiciyee, marka la idin yiraahdo Jihaadka iyo Khayrka u degdegana; u degdega Ilaahay wuu koryeelayaa kuwa xaqa rumeeya kuwa cilmiga lehna darajooyin yuu koryeelayaa Eebana waxa la camal fali waa ogyahay} [Al mujaadalah aayada: 11 ]

ilaahay wuxuu laxiriiriyay marqaatida culimada tiisa iyo tan malaa'igta waana mida ugu wayn marqaatida ilaahay wuxuu yiri:

﴿شَهِدَ اللَّهُ أَنَّهُ لَا إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ وَالْمَلَائِكَةُ وَأُولُو الْعِلْمِ قَائِمًا بِالْقِسْطِ ۚ لَا إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ الْعَزِيزُ الْحَكِيمُ﴿١٨﴾﴾[آل عمران: 18]

{ Eebe wuxuu Qirayaa inaan Eebe mooyee Ilaah kale jirin(oo xaq lagu caabudo), Malaa'igtuna (way qiri) iyo kuwa Cilmiga leh, U qumana Cadaalad, Eebe kale ma jiro(oo xaq lagu caabudo) isaga mooyee waana adkaade Falsan.} [suurada aali-cimraan: 18 ]

kani waxuu cadaynayaa makaanada ehlu cilmiga ee kuleeyihiin islaamka ilaahayna nabiga muusan amrin in wax looziyaadiyo aan ka ahayn cilmiga ilaahay wuxuu yiri:

﴿... وَقُل رَّبِّ زِدْنِي عِلْمًا﴿١١٤﴾﴾[طه: 114]

{ waxaa sarreeya Eebaha xaakimka xaqa ah, hana ku degdein quraanka ka hor dhamayn waxyigiisa xaggaaga, waxaadna dhahdaa Eebow ii kordhi Cilmi} [suurada dhaaha: 114 ]

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: qofkii qaada wada uu ku dalbayo cilmi ilaahay baa usahla wadada janada,malaa'igtu waxay u dhigataa kan raadinaya cilmiga garbaheeda iyadoo raali ka ah, daalibu cilmiga waxaa danbi dhaaf u waydiiyo cidkasta oo kusugan samada iyo dhulka xataa kaluun bada, fadliga kan cilmiga leh uu kabadan yahay kan cibaadaysta waa uun sida aw ugu fadliga badan yahay dayaxu xidagaha, culimadu waxay dhaxleen aanbiyada, kamana dahxlin wax lacag ah laakiin waa cilmi qofkii qaata

cilmigaasna wuxuu qaatay nasiib dhamaystiran. abuu daawuud 3641, tirmidi 2682, ibnu maajah 223 lafdigana isaagaa wariyay,axmed 21715islaamku wuxuuna kuboorin baaris cilmiyeed oon hawa lahayn, wuxuuna ugu yeerayaa fiiro iyo fakiraad nafeed iyo koonka, baaris cilmiyeed oon kahor imaanayn islaamka ilaahay wuxuu yiri:

﴿سَنُرِيهِمْ آيَاتِنَا فِي الْآفَاقِ وَفِي أَنفُسِهِمْ حَتَّىٰ يَتَبَيَّنَ لَهُمْ أَنَّهُ الْحَقُّ ۗ أَوَلَمْ يَكْفِ بِرَبِّكَ أَنَّهُ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدٌ ﴿٥٣﴾﴾[فصلت: 53]

{ Waxaanu ku tusin aayaadkanaga jahooyinka iyo Naftooda intey uga caddaato inuu Quraanku xaq yahay, miyuuna ku fillneyn rabigaa inuu waxkaste mid xaadir u ah } [suurada fusilat: 53 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿أَوَلَمْ يَنظُرُوا فِي مَلَكُوتِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا خَلَقَ اللَّهُ مِن شَيْءٍ وَأَنْ عَسَىٰ أَن يَكُونَ قَدِ اقْتَرَبَ أَجَلُهُمْ ۖ فَبِأَيِّ حَدِيثٍ بَعْدَهُ يُؤْمِنُونَ ﴿١٨٥﴾﴾[الأعراف: 185]

{ Miyeyna Dayin Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, iyo waxa Eebe abuuray oo wax ah, iyo inay Mudantahay inay Dhawdahay Ajashoodu, Hadalkayse Quraanka ka dib Rumayn } [suurada al-acraaf: 185 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿أَوَلَمْ يَسِيرُوا فِي الْأَرْضِ فَيَنظُرُوا كَيْفَ كَانَ عَاقِبَةُ الَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ ۚ كَانُوا أَشَدَّ مِنْهُمْ قُوَّةً وَأَثَارُوا الْأَرْضَ وَعَمَرُوهَا أَكْثَرَ مِمَّا عَمَرُوهَا وَجَاءَتْهُمْ رُسُلُهُم بِالْبَيِّنَاتِ ۖ فَمَا كَانَ اللَّهُ لِيَظْلِمَهُمْ وَلَٰكِن كَانُوا أَنفُسَهُمْ يَظْلِمُونَ ﴿٩﴾﴾[الروم: 9]

{ meyeyna ku soconin Dhulka oy eegan siday ahaatay cidhibtii kuwii ka horreeyey (Gaaladii Makaad) waxay ahaayeen kuwo ka daran iyaga kana xoog badan, Dhulkana waybeerteen wayna Dhiseen Dhulka intay dhiseen wax ka badan. waxayna ula timid Rasuulladoodii Xujooyin, Eebana ma aha mid wax dulmiya, laakiin iyagaa naftooda dulmiyey} [suurada al-ruum: 9 ]

natiijooyinkii cilmiga saxda ah kama horimanayo islaamka, hadaan hal tusaale kabixino quraanka wuxuu sheegay 1400 sano kahor arimo daqiiq ah

uu kusaabsan ilmaha yar ee kujira uurka ooyadiis, hadayna cilmi cusub ku ogaadeen arinkaa waana iswaafaqeen quraanka, ilaahay wuxuu yiri:

﴿وَلَقَدۡ خَلَقۡنَا ٱلۡإِنسَٰنَ مِن سُلَٰلَةٖ مِّن طِينٖ ١٢ ثُمَّ جَعَلۡنَٰهُ نُطۡفَةٗ فِي قَرَارٖ مَّكِينٖ ١٣ ثُمَّ خَلَقۡنَا ٱلنُّطۡفَةَ عَلَقَةٗ فَخَلَقۡنَا ٱلۡعَلَقَةَ مُضۡغَةٗ فَخَلَقۡنَا ٱلۡمُضۡغَةَ عِظَٰمٗا فَكَسَوۡنَا ٱلۡعِظَٰمَ لَحۡمٗا ثُمَّ أَنشَأۡنَٰهُ خَلۡقًا ءَاخَرَۚ فَتَبَارَكَ ٱللَّهُ أَحۡسَنُ ٱلۡخَٰلِقِينَ ١٤﴾[المؤمنون: 12-14]

{Wuxuuna Dhihi Eebe imisa Sanaad ku Nagaateen Dhulka). (Waxayna Odhan waxaan ku Nagaanay Maalin ama Maalin Qaarkeed, warsada kuwa wax tiriya «Malaa'gta»). (Wuxuu Yidhi Maydaan Nagaanin wax Yar Mooyee Haddaad wax Ogtihiin} [suurada al-mu'minuun: 12-14 ].

**40. ilaahay ma aqbalo camal ajarna aakhiro ma helo qof ruumeeyay ilaahay iyo rasuulkiisa iyo anbiyada mooye, cibaadana alle kama aqbalo wuxu jideeyay mooyee, sidee udhacdaa inuu qof gaaloobo kadibna ajar helo,qofna iimaankiisa alle ma aqbalo inuu rumeeyo anbiyada oo dhan iyo risaalada nabi muxamed mooyee s.c.w**

laahay ma aqbalo camal ajarna aakhiro ma helo qof ruumeeyay ilaahay iyo rasuulkiisa iyo anbiyada mooye ilaahay wuxuu yiri:

﴿مَّن كَانَ يُرِيدُ ٱلۡعَاجِلَةَ عَجَّلۡنَا لَهُۥ فِيهَا مَا نَشَآءُ لِمَن نُّرِيدُ ثُمَّ جَعَلۡنَا لَهُۥ جَهَنَّمَ يَصۡلَىٰهَا مَذۡمُومٗا مَّدۡحُورٗا ١٨ وَمَنۡ أَرَادَ ٱلۡأٓخِرَةَ وَسَعَىٰ لَهَا سَعۡيَهَا وَهُوَ مُؤۡمِنٞ فَأُوْلَٰٓئِكَ كَانَ سَعۡيُهُم مَّشۡكُورٗا ١٩﴾[الإسراء: 18-19]

{Ruuxi dooni Adduunyo waan ugu soo dedejinaa dhexdeeda waxaan Doonno Ciddaan doonno, markaasaan kayeellaa Jahannamo mid gala isagoo Caayan oo Dullaysan). (Ciddiise Doonta Aakhiro oo u fala camalkeedii isagoo Mu'mina kuwaas Camalkoodu wuxuu Noqon mid la Mahdiyo} [suurada al-israa: 18-19 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿فَمَن يَعْمَلْ مِنَ الصَّالِحَاتِ وَهُوَ مُؤْمِنٌ فَلَا كُفْرَانَ لِسَعْيِهِ وَإِنَّا لَهُ كَاتِبُونَ ٩٤﴾[الأنبياء: 94]

{ Ruuxii Fala Wanaag isagoo Mu'min ah lagama Qariyo Camalkiisa Anguna waan u Qoraynaa} [suurada al-anbiyaa: 94 ].

cibaadooyinka alle kama aqbalo cidna  inay waafaqsantahay sharciga mooye ilaahay wuxuu yiri:

﴿..فَمَن كَانَ يَرْجُو لِقَاءَ رَبِّهِ فَلْيَعْمَلْ عَمَلًا صَالِحًا وَلَا يُشْرِكْ بِعِبَادَةِ رَبِّهِ أَحَدًا ﴿١١٠﴾﴾[الكهف: 110]

{ waxaad dhadha waxaan uun ahay anigu bashar (dad) idinkoo kale ah, waxaa laywaxyooday in uun yahay ilaahiin ilaah kaliya, ruuxiise dooni la kulanka Eebihiis ha falo camal fiican, yuuna la wadaajinna cibaadada Eebihiis cidna} [suurada al-kahaf  : 110 ]

wuxuu cadeeyay camalka inuusan ahaanaynin mid wanaagsan inuu yahay mid alle jideeyay mooyee unakhaalisyeelaya allah  camalkiisa  asagoo ilaahay rumeeyay iyo anbiyadiisa, rusushiisa midka aanan camalkiisa ahayn sidaas ilaahay wuxuu kayiri:

﴿وَقَدِمْنَا إِلَىٰ مَا عَمِلُوا مِنْ عَمَلٍ فَجَعَلْنَاهُ هَبَاءً مَّنثُورًا ﴿٢٣﴾﴾[الفرقان: 23]

{ (Waannu u soo Hormarinay waxay Faleen oo Camal ah Waxaana ka yeelay Dhalanteed la Firdhiyey.} [suurada al-furqaan aayada: 23 ].

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وُجُوهٌ يَوْمَئِذٍ خَاشِعَةٌ ﴿٢﴾ عَامِلَةٌ نَّاصِبَةٌ ﴿٣﴾ تَصْلَىٰ نَارًا حَامِيَةً ﴿٤﴾﴾[الغاشية: 2-4]

{Wajiyaal Maalintaas way dullaysnaan). (Waxayna qaban Shaqo dhib ah). Waxana lagu soli(gali) Naar kulul,} [suurada al-Qaashiyah, aayadda: 2-4 ].

wejiyaddaas waa kuwo khushuucsan oo kudaalay camal/fal, laakiin hanuun aan ku taagnayn,oo naar baa u abaal ah, mar hadday tahay cibbaado iyo camal baadil ah oo aan waafaqsanayn sharciga ilaahay. Cammalka/falka la aqbalo ilaahay agtiisa waa midka waafaqsan wixii uu la yimmidday Rasuulku-sallallaahu calayhi wasalm- , waase yaabe sidee ayuu qofku ugu kufrin rabbigii una rajeyn in wanaag lagu abaalmariyo? qofna camal lagama aqbalo jeeeroo uu ilaahay ka rumeeyo iyo nabiyadiisa dhamaan ooo kow ka yahay Nabi muxamed-sallallaahu calayhi wasalam-. Waxaana inoo soo

hormaray daliiladda/caddaymahooda qaarkood faqraduu 20aad, ilaahayna wuxuu yiri:

﴿آمَنَ الرَّسُولُ بِمَا أُنزِلَ إِلَيْهِ مِن رَّبِّهِ وَالْمُؤْمِنُونَ ۚ كُلٌّ آمَنَ بِاللَّهِ وَمَلَائِكَتِهِ وَكُتُبِهِ وَرُسُلِهِ لَا نُفَرِّقُ بَيْنَ أَحَدٍ مِّن رُّسُلِهِ ۚ وَقَالُوا سَمِعْنَا وَأَطَعْنَا ۖ غُفْرَانَكَ رَبَّنَا وَإِلَيْكَ الْمَصِيرُ﴿٢٨٥﴾﴾[البقرة: 285]

{ wuu rumeeyey Rasuulku wixii looga soo dajiyey Xaga Eebihiis, Mu'miniintuna (way rumeeyeen) dhamaana waxay rumeeyeen Eebe, Malaa'igtiisa iyo kulubtiisa iyo Rasuuladiisa, mana kala geynayno mid ka mid ah Rasuuladiisa dhexdooda, waxayna dhaheen waan maqalnay oon adeecnay, dhaafidaada. Eebahanow xaggaagaana loo ahaan.} [suurada albaqara, aayada: 285 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا آمِنُوا بِاللَّهِ وَرَسُولِهِ وَالْكِتَابِ الَّذِي نَزَّلَ عَلَىٰ رَسُولِهِ وَالْكِتَابِ الَّذِي أَنزَلَ مِن قَبْلُ ۚ وَمَن يَكْفُرْ بِاللَّهِ وَمَلَائِكَتِهِ وَكُتُبِهِ وَرُسُلِهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَالًا بَعِيدًا﴿١٣٦﴾﴾[النساء: 136]

{ kuwa (Xaqa) rumeeyow rumeeya Eebe (si dhabah) iyo Rasuulkiisa iyo Kitaabka uu ku dejiyey Rasuulkiisa iyo Kitaabkuu u dejiyey horay, ruuxiise ka gaalooba Eebe, malaa'igtiisa, kutubtiisa, rasuuladiisa iyo maalinta dambe (Qiyaamada) wuu dhumay dhumid fog. } [suurada al-nisaa aayada: 136 ].

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وَإِذْ أَخَذَ اللَّهُ مِيثَاقَ النَّبِيِّينَ لَمَا آتَيْتُكُم مِّن كِتَابٍ وَحِكْمَةٍ ثُمَّ جَاءَكُمْ رَسُولٌ مُّصَدِّقٌ لِّمَا مَعَكُمْ لَتُؤْمِنُنَّ بِهِ وَلَتَنصُرُنَّهُ ۚ قَالَ أَأَقْرَرْتُمْ وَأَخَذْتُمْ عَلَىٰ ذَٰلِكُمْ إِصْرِي ۖ قَالُوا أَقْرَرْنَا ۚ قَالَ فَاشْهَدُوا وَأَنَا مَعَكُم مِّنَ الشَّاهِدِينَ﴿٨١﴾﴾[آل عمران: 81]

{ Xusuuso) markuu ka qaaday Eebe Ballan adag Nabiyada waxaan idinsiiyo oo Kitaab iyo Xigmo ah markaas idiin yimaado Rasuul rumeyn waxaad haysatan waa inaad rumeysaan una gargaartaan, kuna yidhi (Eebe) Ma qirteen oo ma qaadeen Arrintaas Ballankeyga ah oo dheheen waan qirnay (ogolaanay) markaas ku yidhi Marag ka noqda Anna la

jirkiina yaan ka mid noqon kuwa marag kici. } [Suurada Al-cimraan aayada : 81 ].

## 41. Ujeedadda ama hadafka Fariimaha/risaaladaha oo dhan waa in aadamuhu qabsado diinta xaqa ah, adoon dhab ahna u noqdo Ilaahay, kana xoroobo adoonimada ruux kale ama khuraafaat kaleba. Sida muuqatana Islaamku kama wayneeyo aadamaha maqaamka uu leeyahay meel ka wayn, oo gaadhsiisan Ilaahnimo.

Ujeedada fariimaha/risaalooyinki xaga ilaahay ka yimidday oo dhan xanbaarsan yihiin waa: in aadamuhu ku kala fadli badan yahay inta uu qabsado diinta, noqdana adoon ilaahay kaligii ah, Islaamkuna wuxuu ka xoraynayaa aadamahaas inuu adoon u noqdo cid kale, ama aamino khuraafaad/kutiri-kuteen, Rasuulku isagoo arintaas caddaynaya wuxuu yiri: (waxaa hoogay adoonka shilinka caabuda, iyo dharka-xariirta, hadii wax lasiiyo raalli noqda hadii aan la siina aan raalli noqon), ujeedada xadiiska oo ah aduun jacaylka iyo dhibkiisa, saxiixulbukhaari 6435 Aadamaha toosani waa kan ilaahay isku dhiiba, oo uma noqdo adoon: Maal, Darajo, Sumcad-raadin, Qabiil, intaas xor buu ka yahay. Qisaddan soo socota ayaa waxay ina tusaysaa xaaladda ay ku sugnaayeen dadku intii ayana risaaladu/fariintu u iman iyo siday noqdeen dabadeed?, markay muslimiitii ugu horeeyay markay u hijroodeen dhanka xabasha wuxuu waydiiyay boqorkii wakhtigaas ee Al-najaashi: Waa maxay diintan aad kaga tagteen qoomkiini, oo aydaan usoo galin diintayadanna, ama diimaha kale ee umadaha kale? Jacfar bin abii Daalib oo hogaaminayay saxaabadaas hijrootay ayaa ku yiri: boqorow waxaan ahayn qoom ku sugnaa Jaahilnimi,oo asnaamta ayaan caabuddaynay bakhtiga ayaan cunaynay faaxishadana waan sameynaynay riximkana waan gooynay, dariskana waan xumeeynay midkagaya xooga badan wuxuu cuni jiray kan tamarta daran. Waxaase noo yimidday rasuul anaga ah aan garanayno cidiisa, runtiisa, amaanadiisa, dhowrsanaantiisa,oo noogu baaqay xaga ilaahay, kaligiina aan caabudno kana tagno waxay caabudaan aabayaasheen ee dhagax iyo sanamyo ah, wuxuu na faray inaan la nimaadno runta, amaano gudashada, xidhiidhinta raximkana, wanaajinta dariska,

wuxuu naga reebbay xumaanta iyo odhaahda beenta ah, cunida xoolaha agoonta, qadfida(ceebaynta) gabdhaha dhowrsoon. Waxa kale oo uu noogu baaqay in ilaahay kaligii caabudno, cidna la wadaajin cibaaddadiisa, waliba aan gudano Salaada,sakadda, soonka, iwm. markaasaan rumeenay oon raacnay wuxii uu layimidday, oo ilaahay kaliya ayaan caabudnay, xaaraantii uu naga reebayna waan ka dhawrsanay, wixii uu noo xalaaleeyayna waan xalaalaysanay. Xadiisan waxaa soo saaray Axmed 1740, iyo Abuu nucaym kitaabka xilyatul awliyaa 1/ 115 isoo intan ka gaaban. islaamka ruuxna kama saro marinayo meeqaamka ay mudan yihiin, mana gaadhsiiyo meel lagu sheegto ilaahnimo. Allaha koreeya waxa uu yidhi:

﴿قُلْ يَا أَهْلَ الْكِتَابِ تَعَالَوْا إِلَىٰ كَلِمَةٍ سَوَاءٍ بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمْ أَلَّا نَعْبُدَ إِلَّا اللَّهَ وَلَا نُشْرِكَ بِهِ شَيْئًا وَلَا يَتَّخِذَ بَعْضُنَا بَعْضًا أَرْبَابًا مِّن دُونِ اللَّهِ ۚ فَإِن تَوَلَّوْا فَقُولُوا اشْهَدُوا بِأَنَّا مُسْلِمُونَ ﴿٦٤﴾﴾[آل عمران: 64]

{ Waxaad dhahdaa Nabiyow Ehelu Kitaabow u kaalaya kalimo (odhaah) aan u simanahay aniga iyo adinkaba oo ah inaynaan caabudin Eebe mooyee, (wax kale) oynaan lana wadaajin waxba kana yeelan qaarkeen qaar Eebayaal, Hadday jeedsadaanna waxaad dhahdaa marag noqda inaan Muslimiin nahay.} [Suurada Aal-cimraan aayada: 64 ]

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وَلَا يَأْمُرَكُمْ أَن تَتَّخِذُوا الْمَلَائِكَةَ وَالنَّبِيِّينَ أَرْبَابًا ۗ أَيَأْمُرُكُم بِالْكُفْرِ بَعْدَ إِذْ أَنتُم مُّسْلِمُونَ ﴿٨٠﴾﴾[آل عمران: 80]

{ Idinmana farayo Eebe inaad ka yeelataan Malaa'igta iyo Nabiyada Eebayaal, ma wuxuu idin fari Gaalnimo intaad Muslim noqoteen ka dib} [Suurada Aal-cimraan aayada : 80 ].

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: (ha igu xadgudbina sidii ay ugu xadgudub tay nasaaradu Ciise ibnu Maryam, anigu waxaan ahay uun adoon ilaahay iyo rasuulkiisiiye). saxiix Albukhaari 3445

**42. ilaahay wuxuu inoo jideeyay oo sharciyeeyay Towbadda o ah: in aadamuhu ilaahay u laabto danbigana ka go'o, Islaamku wuu baabi iyaa gaalnimadii ka horeeysay, towbaduna sidoo kale waxay tirtirtaa wixii ka horeeyay ee denbiyo ah, Sidoo kale waxaa muhiim ah in lagu baraarugsanaado inayna toobadda ka mid ahayn in aadamuhu ka hor qiran dabiyadiisa aadame kale, ee ay tahay mid u dhexaysa isaga iyo Rabbigii.**

ilaahay wuxuu inoo sharciyeeyay Towbadda islaamka dhaxdiisa waana: in aadamuhu ilaahay ulaabto danbigana ka tago, isagoo midaas boorinaya ilaahay wuxuu yiri:

﴿...وَتُوبُوا إِلَى اللَّهِ جَمِيعًا أَيُّهَ الْمُؤْمِنُونَ لَعَلَّكُمْ تُفْلِحُونَ﴿٣١﴾﴾[النور: 31]

{ U Tawbad keena Ilaahay dhamaantiinba, Mu'miniineey, waad liibaanaysaane} [Suurada Al-nuur aayada: 31 ].

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿أَلَمْ يَعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ هُوَ يَقْبَلُ التَّوْبَةَ عَنْ عِبَادِهِ وَيَأْخُذُ الصَّدَقَاتِ وَأَنَّ اللَّهَ هُوَ التَّوَّابُ الرَّحِيمُ﴿١٠٤﴾﴾[التوبة: 104]

{ Miyayna Ogayn in Eebe ka aqbalo Toobadda Addoomadiisa Kana qaado Sadaqada (Aqbalo) iyo in Eebe yahay kan toobad aqbalka Badan ee Naxariista.} [suurada al-towbah, aayada: 104 ].

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿وَهُوَ الَّذِى يَقْبَلُ التَّوْبَةَ عَنْ عِبَادِهِ وَيَعْفُو عَنِ السَّيِّئَاتِ وَيَعْلَمُ مَا تَفْعَلُونَ﴿٢٥﴾﴾[الشورى: 25]

{ Eebana waa kan aqbala toobada addoomadiisa, kana dhaafa xumaanta ogna Waxaad falaysaan.} [suurada al-shuuraa, aayada: 25 ].

Rasuulku Naxariis iyo nabad galyo korkiisa ha ahaatee waxa uu yidhi: ilaahay ayaa ku farxid badan adoonkiisa towbadkeenkiisa si kadaran faraxa nin kusugnaa dhul bahgooya watana gaadiid waxaana unasaaranyahay cunadiisii iyo cabitaankiisii oo seexday ka dibna soo toosay iyadoo raaxiladii aysan joogin oo raadiyay ilaa uu ka hanraaday markaas uu yiri: waxaan ku laaban halkaygi waana seexan ilaa aan

kadhinto, wuxuu barkaday cududiisa ama gacantiisa wuu sookacay ayadoo aktiisa ayjoogo faraskii oo u soolaabtay cunadii iyo cabitaankii sidii ay u saaranyihiin, ilaahay ayaa kagafarxad badan tawbada adoonkiisa kan siduu ugu farxay faraskiisii iyo sahaydiisii. saxiixu muslim 2744.

islaamku wuu dumiyaa danbiyadii ka horeeyay, towbaduna waa sidoo kale oo wixii denbi ah ee kahoreeyay way baabi,isaa ilaahay wuxuu yiri:

﴿قُل لِّلَّذِينَ كَفَرُوا إِن يَنتَهُوا يُغْفَرْ لَهُم مَّا قَدْ سَلَفَ وَإِن يَعُودُوا فَقَدْ مَضَتْ سُنَّتُ الْأَوَّلِينَ﴿٣٨﴾﴾[الأنفال: 38]

{ Ku Dheh kuwii Gaaloobay hadday ka Reebtoomaan (Gaalnimada) waxaa loo Dhaafi wixii hor maray, haddayse Daa'imaan (Gaalnimada) waxaa tagtay «horraysay» jidkii kuwii hore} [suurada al-anfaal : 38 ]

ilaahay ayaa nasaarada ugu yeeray inay towbadkeenaan wuxuuna yiri:

﴿أَفَلَا يَتُوبُونَ إِلَى اللَّهِ وَيَسْتَغْفِرُونَهُ ۚ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَّحِيمٌ﴿٧٤﴾﴾[المائدة: 74]

{ Miyeyna u Toobad keenayn Eebe oyna Dambi Dhaaf warsanayn, Eebaana Dambi Dhaafe Naxariista ah.} [suurada al-maa'idah: 74 ].

ilaahay baa jecelsiiyay dhamaan dadka macaasida kudhacay towbata ilaahay wuxuu yiri:

﴿۞قُلْ يَا عِبَادِيَ الَّذِينَ أَسْرَفُوا عَلَىٰ أَنفُسِهِمْ لَا تَقْنَطُوا مِن رَّحْمَةِ اللَّهِ ۚ إِنَّ اللَّهَ يَغْفِرُ الذُّنُوبَ جَمِيعًا ۚ إِنَّهُ هُوَ الْغَفُورُ الرَّحِيمُ﴿٥٣﴾﴾[الزمر: 53]

{ Waxaad dhahdaa Nabiyow addoomadayda ku xad gudbay Naftoodow ha ka quusanina naxariista Eebe, Eeba dhaafa danbiyada dhamaantoode, waana dambi dhaafbadane naxariis badane.} [suurada al-zumur: 53 ].

markuu go,aansaday camar ibnulcaas inuu islaamo wuxuu kacabsaday inaan laga cafinayn dunuubtii hore wuxuuna yiri isagoo mooqifkaa cabirayo: markii ilaahay uu kutuuray qalbigeyga islaamka ayaan u imid rasuulka si uu iila mubaayacoodo gacantuuna ii soofidiyay, waxaana ku iri: makula mubaayacoonmaayo ilaa danbigii hore layaga dhaafo rasuulka ayaa igu yiri: camarow miyaadan ogeen hijrada iyo islaamku inay

masaxaan danbiyadii hore. muslim 121 isoo intaa kadheer, axmed 17827 lafdigaa axmed baa leh.

## 43. islaamku wuxuu kadhigay calaaqada udhaxaysa insaanka iyo ilaahay si toos ah uma baahna qofkale inuu waasida unoqdo, islaamku wuxuu diiday inaan kadhigano basharka ilaahyo ama lawadaaga ilaahay rubuubiyadiisa iyo ilaahnimada.

islaamku uma baahna inuu kaqiro insaanku bini aadam hortiis qefafkiisa ama danbiyadiisa, islaamku wuxuu kadhigay calaaqada udhaxaysa insaanka iyo ilaahay si toos ah uma baahna qofkale inuu waasida unoqdo sidaasaan kusheegnay faqrada 36 in uu ilaahay amray dadka towbadkeen iyo unoqosho sidaas oo kale wuxuu kareebay inay kadhigtaan anbiyada iyo malaa'igta kuwa udhaxeeya isaga iyo adoomadiisa ilaahay wuxuu yiri:

﴿وَلَا يَأْمُرَكُمْ أَن تَتَّخِذُوا الْمَلَائِكَةَ وَالنَّبِيِّينَ أَرْبَابًا ۗ أَيَأْمُرُكُم بِالْكُفْرِ بَعْدَ إِذْ أَنتُم مُّسْلِمُونَ﴿٨٠﴾﴾[آل عمران: 80]

{ Idinmana farayo Eebe inaad ka yeelataan Malaa'igta iyo Nabiyada Eebayaal, ma wuxuu idin fari Gaalnimo intaad Muslim noqoteen ka dib} [suurada aali-cimraan : 80 ]

islaamku saad arkayso wuxuu diiday inaan kadhigano basharka ilaahayo ama kuwa lawadaaga rubuubiyada iyo uluuhiyada ilaahay wuxuu kasheegay nasaarada:

﴿اتَّخَذُوا أَحْبَارَهُمْ وَرُهْبَانَهُمْ أَرْبَابًا مِّن دُونِ اللَّهِ وَالْمَسِيحَ ابْنَ مَرْيَمَ وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا إِلَٰهًا وَاحِدًا ۖ لَّا إِلَٰهَ إِلَّا هُوَ ۚ سُبْحَانَهُ عَمَّا يُشْرِكُونَ﴿٣١﴾﴾[التوبة: 31]

{ waxay ka yeesheen culimadoodii iyo suufiyadoodii Eebayaal ilaahay ka sokow iyo ciise ibnu maryama waxaan cibaadada ilaahay kali ah ahaynna lama farin. Eebe mooyee ilaah kalana ma jiro waana ka nasanyahay waxay la wadaajin.} [suurada al-towbah: 3 ]

ilaahay baa ku inkiray kuwii gaalada ahaa inay kayeesheen kuwo ushafaacaqaada iyaga iyo ilaahay dhexdooda ilaahay wuxuu yiri:

﴿أَلَا لِلَّهِ الدِّينُ الْخَالِصُ ۚ وَالَّذِينَ اتَّخَذُوا مِن دُونِهِ أَوْلِيَاءَ مَا نَعْبُدُهُمْ إِلَّا لِيُقَرِّبُونَا إِلَى اللَّهِ زُلْفَىٰ إِنَّ اللَّهَ يَحْكُمُ بَيْنَهُمْ فِي مَا هُمْ فِيهِ يَخْتَلِفُونَ ۗ إِنَّ اللَّهَ لَا يَهْدِي مَنْ هُوَ كَاذِبٌ كَفَّارٌ ﴿٣﴾﴾ [الزمر: 3]

{ Diinta khaaliska ahna waxay u sugnaatey Eebe, kuwa ka yeesha Eebe ka sokow awliyo waxay odhan uma caabudno inay Eebe noo dhaweeyaan mooyee dhawaansho, Eebaana kala xukumi dadka dhexdooda waxay isku diidaan, Eebana ma hanuuniyo Been badane gaalnimobadan.} [suurada al-zumur: 3 ]

ilaahay wuxuu cadeeyay inay mushrikiintii ehlu jaahiliga ahaa inay ahaayeen kuwa kayeesha dhax dhaxaadiyaal ilaahay iyaga dexdooda waxayna yiraahdeen: waxay inoo dhaweenayaan ilaahay. ilaahay mar haduu kareebay in dhaxdhaxaadiyaal lagadhigto nabiyada iyo malaa'igta iskadaa wixii kasooharaye, bal anbiyadu iyo rusushu waxay ahaayeen kuwa udagdaga inay ilaahay udhawaadaan, ilaahay baa yiri isagoo kawaramaya xaalkooda.

﴿... إِنَّهُمْ كَانُوا۟ يُسَٰرِعُونَ فِى ٱلْخَيْرَٰتِ وَيَدْعُونَنَا رَغَبًا وَرَهَبًا ۖ وَكَانُوا۟ لَنَا خَٰشِعِينَ ﴿٩٠﴾﴾[الأنبياء: 90]

{ Waana Ajiibnay waxaana Siinay Yaxye waxaana u Hagaajinay Haweennaydiisii, waxayna ahaayeen kuwo u Deg dega Khayaadka oo Na barya iyagoo Rajayn oo Cabsan waxayna ahaayeen kuwa Noo Khusuuca.} [suurada al-anbiyaa: 90 ].

Allaha koreeya waxa uu yiri:

﴿ أُولَٰئِكَ الَّذِينَ يَدْعُونَ يَبْتَغُونَ إِلَىٰ رَبِّهِمُ الْوَسِيلَةَ أَيُّهُمْ أَقْرَبُ وَيَرْجُونَ رَحْمَتَهُ وَيَخَافُونَ عَذَابَهُ ۚ إِنَّ عَذَابَ رَبِّكَ كَانَ مَحْذُورًا...﴿٥٧﴾﴾[الإسراء: 57]

{ kuwaas ay caabudina iyagaaba ka dooni xagga Eebe u dhawaansho iyo kusii dhawaansho waxayna Rajayn Naxariistiisa, wayna ka cabsan cadaabkiisa, cadaabka Eebana waa wax laga digtoonaado.} [suurada al-israa: 57 ]

kuwa aad caabudaysaan ilaahay sokadii sida nabiyada iyo kuwii suubanaa iyagaaba ka dooni xagga alle u dhawaansho waxayna Rajayn Naxariistiisa, wayna ka baqaan cadaabkiisa, sidaybay u baryayaan ilaahay waxaan ahayn?.

**44. dhamaadkii kitaabkan waxaan is xasuusin in ay dadku ay kusuganyihiin kaladuwanaan xaga zamanka, qoom ahaan, baladka dadka way iskhilaafsanyihiin xaga fikirka iyo maqsadkooda waxayna ubaahanyihiin qof kuhanuuniyo ama nidaam aruuriyo iyo xaakim ilaaliya, rususha ayaa arintaa maamulayay waxyiga ilaahayna ay kumaamulayeen waxayna ku hanuuniyeen dadka khayrka shariicadana way ku kulmeen xaqna way ku xakumeen umuurtoodana way toostay markay ajiibeen rushushooda iyo dhawaanshaha casriga risaalada,ilaahayna waxuu ku khatimay risaalooyinka risaalada nabi muxamed wayna baaqi noqotay wuxuuna kadhigay mid hanuun u ah dadka iyo naxariis, nuur iyo hanuun geeya wadada ilaahay.**

dhamaadkii kitaabkan waxaan is xasuusin in ay dadku ay kusuganyihiin kaladuwanaan xaga zamanka, qoom ahaan, baladka dadka way iskhilaafsanyihiin xaga fikirka iyo maqsadkooda waxayna ubaahanyihiin qof kuhanuuniyo ama nidaam aruuriyo iyo xaakim ilaaliya, rusushu ayaa arintaa maamulayay waxyiga ilaahayna ay kumaamulaan waxayna ku hanuuniyaan dadka khayrka shariicadana way kulmayn xaqna way ku xumaan xaq umuurtoodana way toostay markay ajiibeen rushushooda iyo dhawaanshaha casriga risaalada,ilaahayna waxuu ku kahatimay risaalooyinka risaalada nabi muxamed wuxuuna lasoodiray hanuun iyo diin xaq ah si uu dadka uga saaro mugdiga gaalnimada iyo jahliga ilaa iimaanka iyo hanuunka.

**45. sidaa darteed waxaan ku yeerayaa insaankow inaad u istaagtid istaag run ah oo kafog caadaadka ogowna in marka aad dhimato aad u laabanaysid ilaahay waana inaad dib u eegtaa nafsadaada iyo koonka agtaada ah islaamka qaado waad liibaanaysaa dunidaada iyo diintaada, hadaad doontid inaad islaamtid dushaada waxkale ma aha inaad qirtid ilaah xaq lugu caabudo inuusan jirin ilaaha xaqa ah mooyee, nabi muxamedna uu yahay rasuul ilaahay waana inaad ka bari noqotid wax kasta oo lacaabudo alle sokodii waana inaan rumeeno in ilaahay uu ka soo saarayo dadka qubuuraha kujira, xisaabta iyo abaalmarintu waa xaq, markii aad qirtid arimahaa waxaad noqotay muslim markaa ka dib waa inaad ilaahay ku caabudid wuxuu sahrciyeeyay oo ah salaad, zaka, soon, xaj hadaad awoodid.**

sidaa darteed waxaan kuugu yeerayaa insaankow inaad u istaagtid istaag run ah oo kafog caadaadka sida uu ilaahayba uu kuugu yeerayo hadalkiisa:

﴿۞قُلۡ إِنَّمَآ أَعِظُكُم بِوَٰحِدَةٍۖ أَن تَقُومُواْ لِلَّهِ مَثۡنَىٰ وَفُرَٰدَىٰ ثُمَّ تَتَفَكَّرُواْۚ مَا بِصَاحِبِكُم مِّن جِنَّةٍۚ إِنۡ هُوَ إِلَّا نَذِيرٞ لَّكُم بَيۡنَ يَدَيۡ عَذَابٖ شَدِيدٖ ٤٦﴾[سبأ: 46]

{Waxaad dhahdaa Nabiyow mid kaliya yaan idinku waanin inaad u jahaysataan Eebe laba labo iyo mid mid markaasna aad fikirtaan inaan saaxiibkiin «Nabiga Muxamed ah» uusan waallayn, uu digihiinna cadaab daran hortiisna uu yahay} [suurada saba : 46]

waana inaad ogaatid markaa dhimato in aad unoqonaysid rabigaa ilaahay wuxuu yiri:

﴿وَأَن لَّيۡسَ لِلۡإِنسَٰنِ إِلَّا مَا سَعَىٰ ٣٩ وَأَنَّ سَعۡيَهُۥ سَوۡفَ يُرَىٰ ٤٠ ثُمَّ يُجۡزَىٰهُ ٱلۡجَزَآءَ ٱلۡأَوۡفَىٰ ٤١ وَأَنَّ إِلَىٰ رَبِّكَ ٱلۡمُنتَهَىٰ ٤٢﴾[النجم: 39-42]

{Ruuxna wuxuusan camalfalin heleeynin). (Camalkiisana la arki doono). (Ka dibna looga abaalmarin doono si buuxda). (Eebaa xaggiisana loo ahaan,} [suurada al-najmi : 39-42]

waana inaad fiirisaa nafsadaada, koongaan kuguxeeranah ilaahay wuxuu yiri:

﴿أَوَلَمْ يَنظُرُوا فِي مَلَكُوتِ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَمَا خَلَقَ اللَّهُ مِن شَيْءٍ وَأَنْ عَسَىٰ أَن يَكُونَ قَدِ اقْتَرَبَ أَجَلُهُمْ ۖ فَبِأَيِّ حَدِيثٍ بَعْدَهُ يُؤْمِنُونَ ﴿١٨٥﴾﴾[الأعراف: 185]

{ Miyeyna Dayin Xukunka Samooyinka iyo Dhulka, iyo waxa Eebe abuuray oo wax ah, iyo inay Mudantahay inay Dhawdahay Ajashoodu, Hadalkayse Quraanka ka dib Rumayn} [suurada al-acraaf: 185].

slaamka qaado waad liibaanaysaa dunidaada iyo aakhiradaada, hadaad doontid inaad islaamtid dushaada wax kale ma aha inaad qirtid ilaah xaq lugu caabudo inuusan jirin ilaaha xaqa ah mooyee, nabi muxamedna uu yahay rasuul ilaahay markuu nabi muxamed u udiray mucaad yaman si uu ugu yeero islaamka wuxuu ku yiri: waxaad u taggi qoom ehlu kitaab ahe ugu baaq: inay qiraan inuusan jirin ilaahay kaliye mooyee mid kale, anniguna aan ahay Rasuulkii ilaahay, hadday midaas kaa ogolaadaan, usheeg in ilaahay ku waajibibyay shan salaadood, maalintii iyo habeenkii, hadday midaas kaa ogolaadaan, u sheeg in ilaahay ku waajibbiyay Sako laga qaadayo intooda laddan, dibna loo siinayo intooda baahan, hadday midaas kaa ogolaadaan, iska jir iyagga iyo maalkooda inta ugu wanaagsanba). (oo ha ku xad gudbin) saxiixu muslim 19

waana inaad ka bari noqotid(fogaatid) wax walba oo la caabaabuddo Alle ka sokow, waana sidaas macnaha odhaahda Xanafiyah, waana Milladii(diintii) nabi Ibraahiim, ilaahay isaga oo midaas qeexaya wuxuu yiri:

﴿قَدْ كَانَتْ لَكُمْ أُسْوَةٌ حَسَنَةٌ فِي إِبْرَاهِيمَ وَالَّذِينَ مَعَهُ إِذْ قَالُوا لِقَوْمِهِمْ إِنَّا بُرَآءُ مِنكُمْ وَمِمَّا تَعْبُدُونَ مِن دُونِ اللَّهِ كَفَرْنَا بِكُمْ وَبَدَا بَيْنَنَا وَبَيْنَكُمُ الْعَدَاوَةُ وَالْبَغْضَاءُ أَبَدًا حَتَّىٰ تُؤْمِنُوا بِاللَّهِ وَحْدَهُ...﴿٤﴾﴾[الممتحنة: 4]

{Waxaa iddiinku sugan kuddayasho iyo tusaale -kuwa xaqa rumeeyow- Nabi Ibraahim iyo kuwii la jirayba, oo qoomkoodu ku dhahay: annagu bari ayaan iddinka nahay idinka iyo waxaad caabuddaysaan ba ilaahay kasoo hadhay, oo waan iddin diidnay, waxaana soo if baxday dhexdeena

caddaawad, iyo is nacayb waligeedba, jeer ood ka rumaysaan Ilaahay kaligii}. [suurada al-mumtaxanah: 4].

waana inaan rumeyso in ilaahay uu ka soo saarayo dadka qubuuraha kujira ilaahay wuxuu yiri:

﴿ذَٰلِكَ بِأَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلۡحَقُّ وَأَنَّهُۥ يُحۡيِ ٱلۡمَوۡتَىٰ وَأَنَّهُۥ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٞ ٦ وَأَنَّ ٱلسَّاعَةَ ءَاتِيَةٞ لَّا رَيۡبَ فِيهَا وَأَنَّ ٱللَّهَ يَبۡعَثُ مَن فِي ٱلۡقُبُورِ ٧﴾[الحج: 6-7]

{Tassna waxaa ugu Wacan in Eebe uun Xaq yahay uuna Nooleeyo waxa Dhintay iyo inuu wax walba Karo). (Iyo in Saacadda Qiyaame iman Shaki la'aan, Eebana wuxuu soo Bixin waxa Qubuuraha ku Sugan.} [suurada al-xaj: 6-7]

xisaabta iyo abaalmarintu waa xaq ilaahay wuxuu yiri:

﴿وَخَلَقَ اللَّهُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ بِالْحَقِّ وَلِتُجْزَىٰ كُلُّ نَفْسٍ بِمَا كَسَبَتْ وَهُمْ لَا يُظْلَمُونَ ٢٢﴾[الجاثية: 22]

{ Fatamim-Eebaa u abuuray samooyinka iyo Dhulka, xaq iyo in laga abaalmariyo Naf walba waxay kasbatay, lamana dulmiyo.} [suurada al-jaasiyah, aayadda: 22]

markii aad qirtid arimahaa waxaad noqotay muslim markaa ka dib waa inaad ilaahay ku caabudid wuxuu sharciyeeyay ee Salaad ah, Sakadda, Soon, Xaj hadaad awoodid iyo wixii kale ee shariciga ku yimiday ba.

waxaa laqoray 19/11/1441 hijradda.

**Waxaa qoray Dr Muxamed bini Cabdillaahi Al-Suxeeym.**
**Waa bare hore cilmiga caqiidadda ka ahaa qaybta diraasaatka islaamig.**
**kuliyada tarbiyada ee jaamacada malik sucuud Riyaad Boqortooyada Sucuudi Carabiya**